



DOWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA



Khariiddada D/goboleedka Puntland ee Soomaaliya

WARBIXINTA WAX-QABADKA DOWLADDA  
EE SANADAHA 2005-2008

WAXAA DIYAARIYEY QAYBAHA, WASAARADAHAY IYO HAY'ADAH  
DOWLADDA DECEMBER 2008



© Puntlandgov.net

Madaxweynaha D/goboleedka Puntland Md. Maxamuud Muuse Xirsi



© Puntlandgov.net

Madaxweyne ku xigeenka D/goboleedka Puntland, Md. Xasan Daahir Maxamuud

## HORDHAC

Sida la wada ogsoon yahay, D/goboleedka Puntland waxaa la dhisay oo tigimada loo dhigay 1998-dii iyadoo haatan lagu guda jiro sanadkii 11aad ee jiritaankeeda. Markii ay dowladdii dhewe suushey dalkana uu dagaal sokeeye ka dillaacay waxaa Soomaaliya si daran u saameeyey burbur, kala go'go' iyo fowdo si fidsan u camimtay dhammaantiba geyiga Soomaaliyeed.

Waxaa la waayey hannaankii dowladnimo iyo dareenkii waddaninnimo, waxaa meeshaba ka baxay dhammaan astaamihii qarannimo, waxaa Soomaali u beryey waa iyo sah aan la mahadin. Waxaa luntay sumcaddii iyo magacii ay jeer Soomaaliya ku dhex lahayd madasha dowladaha adduunka.

Dagaallada sokeeye waxay Soomaali badeen qax,bara-kac iyo is-gensi, waxaa muuqatay rajo-xumo ku aaddan midnimadii,qarannimadii iyo soo celinta sharaftii iyo karaamadii ummadda Soomaaliyeed.

Shacabka Puntland oo cuskanaya dhaqan soo-jireen ah isla markaana ay kasmo siyaasadeed iyo fikrado horumarineedi hagayaan wuxuu ku tallaabsaday curinta hannaan maamul oo bulshada gobolladaan daadihiya. Waxaa lagu guuleystey dhismaha D/goboleedka Puntland ee Soomaaliya oo astaynteeda looga gol lahaa:

- a. Dhismaha maamul ka hawlgala xaqijinta himilooyinka shacabka reer Puntland ee ku aaddan arrimaha bulshada, dhaqaalah, nabadjelyada iyo dhaqanka.
- b. Dhaqan-gelinta barnaamij ku aaddan dimoqraadiyeynta maamulka iyo nidaamka is-xukunka dadweynaha.
- c. Ka-hawlgalka dib u heshiisiinta qaran ee ummadda Soomaaliyeed.
- d. Baadi-goobka qarannimadii iyo midnimadii ummadda iyo hirgelinta hannaan federaal ah oo ay Soomaaliya ku dhaqanto oo ay Puntland qayb ka tahay.

Mabaadi'da, aragtida siyaasadeed iyo ujeeddooyinka muddada dhow/dhewe iyo tan fog ee Puntland waxaa lagu qeexay si cadna loogu fasiray dastuur si dhab ah uga turjumaya kana jawaabaya rabitaanka iyo dareenka shacabka Puntland.

Waxaa laga wada dheregsan yahay in gobollada Puntland ay xilligii dowladihii hore ahaayeen kuwa ka qatan meelnana aan uga jirin khariiddada mashaariicda iyo barnaamijada horumarineed ee dalka.

Waxaa la xusi karaa oo keliya jidka laamiga ah ee isku xira Gaalkacyo-Garowe-L/caanood-Boosaaso, dekeda Boosaaso iyo saldhigiyada korontada ee Boosaaso iyo Qardho, mashaariicdaas oo badidood la fuliyey sanadihii u dambeeyey ee dowladdii dhewe.

Burburkii iyo dagaalladii sokeeye waxay sababeen in boqolaal kun oo dad ahi ku soo qulqulaan gobollada Puntland kuwaas oo isugu jira dad asal ahaan geyigaan ka soo jeeda iyo Soomaali badanoo kale oo nabadjelyo iyo nolol biday ama shaqo iyo ganacsi u soo hayaamay.

Arrintani waxay dhalisay xaalad dimograafika ah oo aad u sarraysa soona kordhisey culays si weyn u saameeyey adeegyadii bulshadeed iyo kaabayaashii horeba ciriiriga u ahaa una itaalka yaraa.

Puntland waxay saaran tahay badweynta Indiya iyo khalijka Cadmeed iyadoo uu meel-dhacaas juqraafiyeed uu ganacsiga iyo dhaqdhaqaqa gaadiidka badda ee caalamiga ah u leeyahay ahmiyad iyo istaraateejiyad ballaaran.

Waxaa sidoo kale in la xuso mudan in Eebbe uu degaamada Puntland ku mannaystay kharyaad dabiici ah oo mug weyn shakina uusan ku jirin inay noqonayaan aalad horseedda oo dhaqaajisa barnaamijyada horumarineed si weyna qayb uga qaadata kor u qaadista heerka maciishadeed ee muwaadinka, abuuridda fursado shaqo iyo guud ahaan sare u qaadista awoodda iyo meeqaamka D/goboleedka Puntland.

Xaqaa'iqa kor lagu soo xusay waxay muujinayaan in la asilbay talada markii la go'aansaday dhismaha iyo astaynta D/goboleedka Puntland.

Waxaa hubaal ah in jiritaanka Puntland ka sokow reer Puntland uu waxtar,hiilo iyo garabba u yahay dhammaan ummadda Soomaaliyeed, waa muunad iyo tusalee ku dayasho u leh sidii ay D/goboleedyo uga hirgeli lahaayeen qaybaha kale ee Soomaaliya loona taabi lahaa xaqijinti himilada ah dhismo hannaan federaal ah oo geyiga Soomaaliya ka hirgala kana hana-qadaa.

Saan-qaadka Puntland wuxuu ahaa mid xambaarsan rabitaanka,dareenka iyo masiirka shacabka Puntland,waa hooy ay Soomaali u irkato,waa astaan ifinaysa in rajo,yididdiilo iyo soo-rayni soo fool leeyihiin.

Inkasta oo maamulka Puntland ay duruufo kala duwani la soo gudboonaadeen haddana la iska ma indhasaabi karo waana la wada qirsan yahay in la mahadiyey oo ay wax badani qabsoomeen iyadoo dhan kalena la qirayo inay jiraan arrimo laga gaabiyeey oo ay qaarkood xaalado la garowsan karaa kallifeen.

Taabbagalka Puntland wuxuu soo jiidey tixgelin ay Soomaali iyo beesha caalamkuba u hayaan reer Puntland, waa guul haddii si habboon loo hanto ay bulshadeenu jeyl-ka-jeyl maali doonto,horumar,ladnaan iyo magacna ay ku heli doonto.

Taageerada joogtada ah ee bulshadeena ayaa fure iyo hiilo u ah maamulka Puntland waana arrinta suurtagelisay in maalinba maalinta ka dambaysa lagu tallaabsado loona saan-qaado horumar iyo guul hor leh.

D/goboleedka Puntland ma aha mid ban-ka-ood ah ama caadifad iyo lab-lakac ku dhalatay balse waa baahi iyo masiir, waa amaanad mustaqbal ka jeylalka soo aaddan astaynaysa, waa bar taariikhda Soomaaliyeed meel la xurmeeyo ka geli doonta.

Si kasta oo la isugu dayo looguna qalin qaato waa adag tahay in qoraal kooban lagu soo ururiyo Puntland, waxaanse shaki ku jirin in dhismaheedu ahaa tallaabo geesinnimo oo ay bulshadeenu qaadday kuna guuleysatey.

Warbixintani waxay ku saabsan tahay wax-qabadkii dowladda ee 4-tii sano kuna aaddan sanadaha 2005-2008.

Maadaama ay muddadii xil-hayntu (2005-2008) dhammaad tahay oo haatan muddo cusub oo xil-hayn la gudageli doono waxaa laga ma maarmaan ah in la bandhigo warbixin si waafi ah loogu muujinayo wax-qabadkii hay'adaha dowladda Puntland.

Waxaa amaanad, waajib dastuuri ah iyo mas'uuliyad akhlaaqi ah in wax-qabadka dowladda lala socodsiiyo shacabka si uu u helo xog, maadaama uu isagu yahay kan loo adeegayo oo amaanada loo hayo.

Haddaba waxaa qoraalkaan lagu qeexayaa wixii la qabtay 4-tii sano ee 2005-2008.

#### QAAB-DHISMEEDKA XUKUUMADDA

##### GOLAH XUKUUMADDA

Golaha xukuumaddu wuxuu ka kooban yahay:

- Madaxweynaha
- Madaxweyne ku xigeenka
- Wasiirro
- Wasiirro/dowlayaal
- Wasiirro ku xigeenno



Mid ka mid ah shirarka golaha xukuumadda GPL

##### GOLAH WASIIRRADA

- January 26, 2005 waxaa xeer Madaxweyne Lr.03 lagu magacaabay golaha xukuumadda oo ka koobnaa 14 wasaaradood oo ay ka mid tahay wasaaradda cusub ee horumarinta haweenka & arrimaha qoysku

Februray 23,2006 waxaa isbeddel lagu ridey xubnaha golaha wasiirrada,iyadoo lagu jideeyey xeer Madaxweyne Lr.28.

- December 15,2007 waxaa mar kale dib-u-habayn lagu sameeyey golaha wasiirrada sida ku cad xeer Madaxweyne Lr.197 iyadoo:
  - a. Lagu kordhiyey wasaaradda tamarta & macdanta  
Wasaaraddii D/ha hoose & HRM iyo wasaaraddii arrimaha gudaha & DDR, loo beddeley sidatan:
    - b- 1, Wasaaradda arrimaha gudaha, iyo
    - b- 2, Wasaaradda amniga & DDR

Isbeddellada lagu ridey ka dib wasaaraduhu waxay haatan ka kooban yihii:

01. Wasaaradda Caddaaladda & arrimaha Diinta
02. Wasaaradda arrimaha gudaha
03. Wasaaradda maaliyadda
04. Wasaaradda amniga & DDR
05. Wasaaradda qorshaynta & iskaashiga caalamiga ah
06. Wasaaradda warfaafinta,dhaqanka,is-gaarsiinta & dalxiiska
07. Wasaaradda hawlaha guud & gaadiidka
08. Wasaaradda ganacsiga & warshadaha
09. Wasaaradda xanaanada xoolaha,beeraha & deegaanka
10. Wasaaradda kalluumaysiga,dekeda & gaadiidka badda
11. Wasaaradda tamarta & macdanta
12. Wasaaradda shaqada & dhalinyarada
13. Wasaaradda waxbarashada
14. Wasaaradda caafimaadka
15. Wasaaradda horumarinta haweenka & arrimaha qoyska

#### **HAY'ADAHA DASTUURIGA AH EE MADAXA BANNAAN**

Hay'adaha leh madax-bannaanida dastuuriga ahi waa kuwa hore asaaskii Puntland lagu dhisay waxayna kala yihii:

- Hay'adda hanti-dhowrka guud ee dowladda
- Bangiga dowladda Puntland

#### **WAKAALADAHA MAAMUL AHAAN MADAXA BANNAAN**

- Hay'adda Jidatka Puntland (Nesha)
- Hay'adda tamarta iyo biyaha (Psawen)

Hay'adahani waxay ku tiirsan yihii oo kormeer iyo la-socod ku leh wasaaradda hawlaha guud & gaadiidka.

#### **HAY'ADAHA LA ABUURAY**

Muddada 2005-2008 dhexdeeda waxaa la abuuray hay'adaha & xafiisyada soo socda:

1. Hay'adda arrimaha beni'aadannimo iyo maaryanta masiibooyinka (HADMA)
2. Hay'adda astaynta maamul-wanaagga (Good Governance Bureau)
3. Akadeemiyada hiddaha & dhaqanka
4. Guddiga shaqaalaha rayadka ah (Civil Service Commission)
5. Xafiiska Nabab-sugidda Puntland (PSS)
6. Guddiga Aids-ka ee Puntland (PAC)
7. Xafiiska Xiriirka Federaalka
8. Xafiiska Website- ka Dowladda (Puntlandgovt.com)

Dhammaan hay'adahaan iyo xafiisyadani waxay hoos yimaadaan madaxtooyada markii laga reebo akadeemiyada hiddaha & dhaqanka oo wasaaradda warfaafinta hoos timaadda.

## XIRIIRKA FEDERAALKA

Dowladda Puntland iyadoo

- cuskanaysa dastuurka Puntland,
- gudaneysa waajibka iyo mas'uulyadda ka saaran soo celinta qarannimadii iyo dowladnimadii Soomaaliyeed,
- Gensaneyisa si weyna uga danqanaysa burburka, dambaynta iyo darxumada ummadda Soomaaliyeed sida daran u saamaysay,
- Fulineysa siyaasaddeeda qeexan kuna addan nidaam dowladeed oo federaal ah oo Soomaaliya ka hana-qada qaybna ay ka tahay,



Madaxweynaha DFKMG Soomaaliya iyo wafdi uu hoggaaminayo oo booqasho rasmi ah ku yimd caasimadda Puntland ee Garowe

Waxay si buuxda u taageertay oo ay gacan siisay dowladda federaalka KMG Soomaaliyeed.

Maamulka Puntland wuxuu dadaal dheer u galay wax badanna uu u quuray taabba-gelinta dowladda federaalka.

Waxaa si is daba-joog ah Puntland booqasho ku yimid mas'uuliin ka tirsan dowladda federaalka oo ay ka mid yihiin, Madaxweynaha, guddoomiyihii hore ee barlamaanka, Ra'iisal-wasaariihii hore, xubno ka tirsan golaha wasiirrada iyo xildhibaanno.



Madaxweynaha DFKMG, Ra'iisal-wasaarihii hore DFKMG iyo  
Madaxweynaha Puntland oo kulansan.

Waxaa sidoo kale xarumaha dowladda federaalka booqasho ku tegey madaxda dowladda Puntland oo ay ka mid yihiin Madaxweynaha iyo mas'uuliin kale.

Wufuud is dhaafsiga labada dhinac waxaa looga hadlayey loogana wada tashanayey danaha Puntland iyo arrimaha dowladda federaalka.



Kulan ballaaran oo ay yeeshen DFKMG & D/goboleedka Puntland.

## SHIRWEYNIHII DIB U HESHIISIINTA EE MUQDISHO

Shirweynihii dib u heshiisiinta beelaha Soomaaliyeed ee lagu qabtay Muqdisho waxaa Puntland uga qayb galay wafdi aad u ballaaran oo ay isimo, waxgarad, cuqaal,haween iyo aqooniyahanno u dhan yihiin.

Wafdigaa Puntland wuxuu shirweynaha ka qaataay dowr muhim ah iyo kaalin loo bogey oo muujisay bisaylka wacyiga siyaasadeed, fac-weynida dhaqan iyo dareenka waddaninnimo ee reer Puntland.

Maamulka Puntland hawl badan ayuu ka galay abaabulka xubnihii bulshada rayadka ah ee magaca Puntland kaga qayb galay shirweynahaas.

### XIRIIRKA DIBADDA:

Dowladdu waxay xiriirro la yeelatay dowlado, hay'ado, shirkado iyo maal-geliyeaal kala duwan.



Madaxweynaha iyo xubno golaha wasiirrada ee Puntland ah oo safar shaqo ku tegey Ra'sal Khayma (UAE)

Mas'uuliinta D/goboleedka Puntland waxay safarro hawleed ku tageen dalalka ay ka midka yihiin:

- Itoobiya
- Djibouti
- Yemen
- Kenya
- UAE
- Boqortooyada Sucuudiga
- Maleesiya
- USA
- UK
- Belgium
- Sweden



Madaxweynaha oo Adis-Ababa ku la kulmay safaaradda Maraykanka

Madaxda dalalkaas u safartay waxaa ka mid ah Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenka, mas'uuliinta golaha wakiilada, xubno ka kala tirsan golaha wasiirrada iyo maamulka dhexe ee dowladda.

Safarradaas waxaa looga gol lahaa arrimo la xiriira danaha siyaasadeed ee D/goboleedka Puntland iyo guud ahaan xaaladda Soomaaliya.



Wafdi uu Madaxweynuhu hoggaaminayo oo boooday imaaraada Ra'sal-Khayma

Dhan kale waxay xiriiradaasi ku saabsanaayeen iskaashi, wada-shaqayn, kasbid maal-geliyeaal iyo shirkado ganacsi.



Madaxweynaha oo kulan la yeeshay madax sare oo Itoobiya

Xiriirada dibadda la la yeeshay natijoojin baa ka soo baxay wax badan  
ayaana ka hirgalay iyadoo ay maanta Puntland kaga hawl jiraan shirkado  
caalami ah oo la la galay heshiisyo maal-gashi oo dalka lagu horumarinayo



Madaxweynaha Puntland oo la kulmay Ra'iisal-wasaaraha Itoobiya

Waxaa sidoo kale Puntland booqasho rasmi ah ku yimid oo isaga soo daba  
noqday wufuud badan oo ka kala socota dowlado, hay'ado & ururro caalami  
ah iyo shirkado.



Madaxweynaha Puntland oo la kulmay Madaxweynaha Kilinka 5aad

Madaxweynayaasha Puntland iyo Kilinka 5aad waxay ka wada hadleen sidii loo xoojin lahaa xiriirka sokeeye ee labada shacab ee Puntland iyo Kilinka 5aad.



Madaxweynaha & wasiirro Puntland ah oo la kulmay danjirayaal

Waxaa Puntland kaga hawl jira hay'ado ka tirsan ummadaha midoobey (UN agencies) iyo sidoo kale ururro caalami ah (international NGOs).

Hawlahay hay'adahaasi waxay qayb ka yihiin barnaamijyada horumarinta iyadoo ay dowladdu gacan ku siiso hawlgalkooda una abuurto jawi soo-dhoweyn iyo wada-shaqayn.



Wakiilka UN ee Soomaaliya ahna xiriiriyaha hawlahay beni'aadannimo  
Eric Laroch oo safar hawleed ku yimd Puntland

Iyadoo sida la ogsoon yahay uu dalka Isutagga Imaaraadka Carabtu (UAE) yahay halka uu inta badan ganacsiga Puntland ku xiran yahay waxaa RAK iyo imaaradaha kale ee dalkaas booqasho ku tegey mas'uuliin kala duwan oo Puntland ka socota taasoo looga gol lahaa xoojinta xiriirka ganacsi ee labada dhinac iyo kasbashada ganacsato ka qayb qaadata maalgashiga Puntland oo qayb ka ah barnaamijka horumarinta.



Madaxweynaha iyo sheikh Sacuud Bin Saqr Al-Qasimi (ku xigeenka suldaanka RAK) oo 14.4.2007 kala saxiixanaya heshiis ku saabsan iskaashiga labada dal

#### WAX-QABADKA W. CADDAALADDA & ARR. DIINTA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey C/risaaq Yaasiin C/Ile (Geesood), wasiirka caddaaladda iyo arr.Diinta.

Wasaaraddu waxay ka mid tahay wasaaradaha ugu muhimsan dhismaha xukuumadda markii la tixgeliyo ahmiyadda iyo baaxadda hawlaha ay u xil saaran tahay ee dastuurka ku qeexan.

Wasaaraddaan waxaa hore loogu magac-daray awqafta & arrimaha diinta iyadoo dib sida ku cad xeer-sharci Lr.02 ee December 7, 2006. lagu magacaabay wasaaradda caddaaladda & arrimaha diinta.

Tallaabadaan waxaa loo la jeedey sugidda iyo xoojinta wada-shaqaynta wasaaradda iyo maxkamadaha, iyadoo sida la ogsoon yahay uu garsoorku madax-bannaan yahay oo uu guddiga sare ee garsoorku hago.

Muddadii 4-ta sano ahayd ee 2005-2008 wasaaraddu waxay fulisey barnaamijyo ballaaran oo soo gala hawlaha uu dastuurku ku waajibiyey, iyadoo la xusi karo:

01. Dhismaha, dayactirka iyo qalabeynta maxkamadaha Qardho, Burtinle,L/caanood iyo Goldogob iyadoo isla markaana maxkamadahaas loo shaqaaleeyey hawl-wadeennadii iyo shaqaalihii looga baahnaa.
02. Dhismaha xabsi weyn oo cusub lagana fuliyey Qardho.
03. Dhismaha xabsiga cusub ee Gaalkacyo.
04. Dayactirka xabsiyada Garowe iyo L/caanood.
05. Dayactirka xabsiga Boosaaso iyadoo lagu kordhiyey qayb cusub oo ay ka mid tahay hooso la qalabeeeyey looguna tala galay waxbarashada maxaabbiista si ay u yeeshaan xirfado ay ku shaqaystaan markii ay xabsiga ka baxaan.
06. Waxaa qaab-dhismeedka wasaaradda lagu kordhiyey waaxda xeer-dejinta oo aan hore u jirin.

07. Waxaa xabsiyada Boosaaso iyo Gaalkacyo mid kasta la guudoonsiyyey gaari shabaqle ah oo maxaabbiista lagu qaado.
08. Deeq waxbarasho ayaa 10 arday loogu diray dalka Suudaan.
09. Heshiis ku saabsan abuuridda maxkamad guurguurtta (mobile court) ayaa la la galay UNDP.
10. Waxaa jaamacadda PSU ee Garowe lagu kordhiyey kuliyadda sharciga.
11. Hawl-wadeennada wasaaradda, maxkamadaha,xeer-ilaalinta,xubno ka kala tirsan ciidamada booliska iyo asluubta waxaa la siiyey tababarro iyo aqoon-is-weydaarsiyo kala heer ah lana xiriira sharciga, garsoorka iyo guud ahaan hawlaha hay'adaha sharci-fulinta.
12. Waxaa tababarro dibadeed loo diray qaar ka mid ah madaxda hay'adaha sharciga.
13. Waxaa culumaa'udiinka loo qabtay tababarro iyo aqoon is-weydaarsiyo marxaladaysan oo kala heer ah.
14. Diyaarinta hawlaha Xajka.
15. Xiriirinta iyo tababaridda waacidiinta masaajidaya
16. Wacyi gelinta bulshada lana xiriirta tarbiyadda Islaamka.
17. Ka qayb-galka hawlaha nabadaynta, heshiisiinta iyo xallinta khilaafaadka mararka qaarkood beelaha soo dhexgalay.



Hooso maxaabbiista lagu tababarayo oo lagu kordhiyey xabsiga  
Boosaaso



Qayb cusub oo lagu kordhiyey xabsiga Boosaaso.

#### WAX-QABADKA WASAARADDA ARRIMAHAGUDAHA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey C/xamiid Garaad Jaamac, wasiirka arrimaha Gudaha.

Wasaaradda arrimaha guduuhu waxay ka mid tahay hay'adaha laf-dhabarta u ah hawlaha dowladda, waxayna mas'uul ka tahay hawlaha iyo barnaamijiyada gobollada iyo degmooyinka iyo hubinta sida ay laamaha dowladdu uga hawlgalaan.



Xarunta cusub ee wasaaradda arr. Gudaha-Garowe

December 2007 waxaa wasaaraddaan lagu soo biirihey wasaaraddii hore ee dowladaha hoose & horumarinta reer miyiga iyadoo isla markaana hawlaho amniga loo wareejiyey wasaarad cusub oo loogu magac-daray wasaaradda amniga & DDR.

Muddada 2005-2008 wasaaradda arrimaha guduuh waxay soo qabatay hawlo baaxad weyn oo laga xusi karo kuwa soo socda:



Doorashada xubnaha golaha degaanka degmada Jarriiban

1. Dhismaha golayaasha degaanka ee degmooyinka:

Iyadoo la fulinayo barnaamijka dowladda ee ku aaddan dimoqraadiyeeynta maamulka iyo is-xukunka dadweynaha waxaa la fuliyey dhismaha golayaasha degaanka ee degmooyinka soo socda:

01. Golaha degaanka degmada Garowe
02. Golaha degaanka degmada Qardho
03. Golaha degaanka degmada Burtinle
04. Golaha degaanka degmada Dangorayo
05. Golaha degaanka degmada Boosaaso
06. Golaha degaanka degmada Eyl
07. Golaha degaanka degmada Gaalkacyo
08. Golaha degaanka degmada Baran
09. Golaha degaanka degmada Dhahar
10. Golaha degaanka degmada Boocame
11. Golaha degaanka degmada Bayla
12. Golaha degaanka degmada Taleex
13. Golaha degaanka degmada Xuddun
14. Golaha degaanka degmada Horufadhi
15. Golaha degaanka degmada Wirwir
16. Golaha degaanka degmada Buuhoodle
17. Golaha degaanka degmada L/qoray
18. Golaha degaanka degmada Xingalool
19. Golaha degaanka degmada Fiqi-fuliye
20. Golaha degaanka degmada Jarriiban
21. Golaha degaanka degmada Goldogob
22. Golaha degaanka degmada Qandala
23. Golaha degaanka degmada Ufayn
24. Golaha degaanka degmada Caluula
25. Golaha degaanka degmada Baargaal



Doorashada xubnaha golaha degaanka degamada Boocame

Dhismaha golayaasha degaanka ee la hirgellyey waxaa garab socdey taran ay degmooyin cusubi abuurmayeen, iyadoo xilligii dhismaha golayaasha la bilaabay ay tirada degmooyinku ahayd 28 degmo halka tiradu ay haatan ka marayso 35 degmo.

## 2. Taakulaynta gobollada & degmooyinka:

Si loo xaqijiyo in maamulada gobollada iyo degmooyinku ay taabbagalaan waxaa loo fidiyey taakulo iyo taageero isugu jirta maaliyad, kaalmo farsamo, qalab, gaadiid iwm iyadoo la xusi karo:

- a. Degmada Garowe,  
-3 gaari
- b. Degmada Burtinle  
- 1 gaari,  
- daabacaad dokumeentiga cashuuraha  
- lacag dhan Sh.So.50,000,000.
- c. Degmada Dangorayo,  
- 1 gaari  
- daabacaad dokumeentiga cashuuraha
- d. Degmada Eyl,  
- 1 gaari  
- daabacaad dokumeentiga cashuuraha  
- lacag dhan Sh.So.150,000,000.
- e. Degmada Dhahar,  
- 1 gaari  
- daabacaad dokumeentiga cashuuraha  
- lacag dhan Sh.So.100,000,000.
- f. Degmada Xingalool,  
-1 gaari  
-lacag dhan Sh.So.100,000,000.

- g. Degmada L/qoray
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
- h. Degmada Baran
  - 1 gaari
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - lacag dhan Sh.So.100,000,000.
- i. Degmada Boocame,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- j. Degmada L/caanood,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- k. Degmada Xuddun,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- l. Degmada Taleex,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- m. Degmada Ufayn,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- n. Degmada Baargaal,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
- o. Degmada Caluula,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari
  - lacag dshan USD.11,000.\$
- p. Degmada Qardho,
  - 1 gaari
  - lacag dhan Sh.So.100,000,000.
- q. Degmada Bayla,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 2 gaari
- r. Degmada Waaciye,
  - daabacaad dokumeentiga cashuuraha
  - 1 gaari

### 3.Xallinta khilaafaadka:



Khilaafkii la xalliyey ee degaanka Cagaarre

Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa guddoomiyeyaasha gobollada iyo degmooyinka waxay ka qayb qaadatay, kaalin weyna ay ka gashay hawlo nabadayn ah oo lagu heshiisiinayo beelo ka tirsan degaamada puntland.

Arrintaan oo ay laamaha dowladdu si wadajir ah isugu hawleen waxaa looga bedbaaday dhibaatooyin soo gudboonaan lahaa haddii aan khilaafaadkaas la daweyn xalna aan loo helin.

Sidoo kale waxay wasaaraddu xallisay khilaafaad soo dhix maray maamulada gobollada iyo degmooyinka qaarkood.

Inkastoo aan halka lagu soo koobi karin arrimaha nabadaynta, heshiisyada iyo xallinta khilaafaadka ay wasaaraddu ka hawl gashay haddana waxaa la xusi karaa:

a. Beelo la heshiisiyey:

- Heshiiskii Cagaarre (Sool & Mudug)
- Heshiis ku saabsan la dagaallanka xaalufka (Karkaar & Sanaag)
- Heshiisiin 2 beelood oo gobolka Karkaar ah (Qardho & Shaxda)
- Heshiiskii Booraan & Dacare (Nugaal, Mudug & Sool)
- Heshiiskii Ceel-xidid (Burtinle & Boocame)
- Heshiiskii Tukaraq (Buurawadal & Tukaraq)

b. Khilaafaad gobollada & degmooyinka dhixamray oo la xalliyey:

- Khilaafkii guddoomiyaha iyo xoghayaha degmada Gaalkacyo
- Khilaafkii guddoomiyaha iyo isuduuhaha gobolka Sanaag
- Khilaafkii xubnaha golaha degaanka ee degmada Garowe
- Khilaafkii maamulka degmada L/caanood

4. Barnaamijyada & mashaariicda hay'adaha la la kaashaday:  
Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa hay'adaha & ururrada caalamiga iyo  
kuwa waddaniga ah waxaa u suurta gashay fulinta barnaamijyo iyo  
mashaariic waxtar weyn u leh horumarinta bulshada iyo maaraynta hawlahaa  
maamulada degmooyinka.

Dowladda Puntland oo wasaaradda ku matalani si toos ah ayey hawlahas  
uga qayb qaadatay.

Waxaa halka lagu soo taxayaa barnaamijyada iyo mashaariicda ay  
wasaaradda iyo hay'aduhu wada fuliyeen:

Degmada Garowe,



Guryaha loo dhisay IDPs Garowe

- Dib-u-dhiska xarunta D/hoose, Waxaa fuliyey WAG & UN-Habitat
- Qoondaynta dhulka IDPs,waxaa fuliyey WAG & dadweynaha
- Dhiraynta dooxada Cadadheero iyo hagaajin buundo,waxaa fuliyey WAG,D/hoose,Kaaloo iyo Diakonia
- Dhismaha suuqa hanti-wadaag,waxaa fuliyey D/hoose iyo UNDP
- Dhismaha saldhigga booliska Waaberi,waxaa fuliyey D/hoose iyo UNDP
- Dayactirka suuqa Fadhixun,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UNDP
- Dhismo 4 suuq oo yaryar,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UNDP/FOPAC
- Dhiraynta magaalada (270 geed),waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UNDP/FOPAC
- Diyaarinta iyo daabacaadda buugga tirakoobka waxaa fuliyey,WAG iyo D/hoose
- Qalabeynta qolka shirarka D/hoose,waxaa fuliyey WAG iyo Diakonia
- Qalabeynta xafiisyada D/hoose,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo Diakonia
- Dhismaha 300 guri ee IDPs,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UN-Habitat.

- Bannayn waddooyin,waxaa fuliyey,shirkado ganacsi,WAG iyo D/hoose
- Qashin-gur & hawlo nadaafadeed,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UNICEF/MIRE
- Dhismaha suuqa gowraca,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UN-Habitat
- Hawlahaa biyaha ee guryaha IDPs-ta waxaa fuliyey,WAG,D/hoose iyo UN-Habitat
- Waddooyin xirnaa oo la furay waxaa fuliyey dadweynaha iyo D/hoose
- Diiwaangelinta ganacsatada Garowe,waxaa fuliyey WAG,D/hoose iyo UOP

Degmada Burtinle,

- Tababar socdey 21 maalmood waxaa fulisey WAG
- Tababar 3 marxaladood ahaa waxaa fulisey PDRC

Degmada Eyl,

- Dhismaha xarunta maamulka degmada waxaa fuliyey WAG iyo Action Aid
- Dhismaha guriga martida degmada waxaa fuliyey WAG iyo D/hoose
- Dayactirka saldhigga booliska waxaa fulisey D/hoose
- Dayactirka xarunta maxkamadda waxaa fulisey D/hoose
- 60 guri oo qaxooti loo dhisay waxaa fuliyey WAG iyo Action Aid
- 1 gaari oo D/hoose iibsatey waxaa fulisey D/hoose
- 
- 1 gaari oo booliska loo iibiyey waxaa fulisey D/hoose

## WAX-QABADKA WASAARADDA MAALIYADDA

Warbixintaan waxaa soo Wada diyaariyey:

1. C/risaaq Maxamed Xasn, agasimaha guud ee mmaaliyadda
2. C/risaaq Xasan Muuse, xisaabiyyaha guud ee dowladda
3. Axmed Jaamac Xasan , Xoghayaha Wasiirkha Maaliyadda

Wasaaradda maaliyaddu waxay ka mid tahay wasaaradihi ugu horreeyey ee astayntii D/goboleedka Puntland lagu asaasay iyadoo ah aaladda laf-dhabarta dhaqaalaha Puntland.

Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay oo ay u xil saaran tahay arrimaha soo socda:

1. Dejjinta siyaasadda dhaqaalaha
2. Qorshaynta iyo maaraynta dakhliga guud ee dowladda
3. Maamulka deeqaha ay dowladdu hesho
4. Abuuridda ilo iyo barnaamijyo ku aaddan xoojinta iyo sare u qaadista dhaqaalaha dalka
5. Dhiirrigelinta wax-soo-saarka
6. Ilaalinta iyo ku dhaqanka miisaaniyadda dowladda
7. Dejjinta iyo meelmarinta nidaamka cashuuraha guud
8. La socodka dhaqdhaqaqa suuqa iyo heirka maciishadda
9. Dhiirri-gelinta maal-gashiga waddaniga ah iyo kan ajnebiga ah

Kharajka guud ee dowladdu wuxuu ka kooban yahay:

1. libka gaadiidka dowladda
2. libka gaadiidka ciidamada
3. Qalabka ciidamada
4. safarrada dibadda
5. martigelinta
6. Taakulada siyaasadda (dowladda federaalka iwm)
7. Gurmadka degdega ah (ciidamada)
8. Deeqaha iyo kaalmada guud
9. Ilaalinta kontarabaanka
10. Lacag celinta
11. ballaarinta cashuuraha dowladda
12. Daabacaadda buugaagta dowladda
13. Kaalmada masaakiinta iyo agoomaha

Mashaariicda la fuliyey:

1. Dhismooyinka xafiisyada dowladda
2. Dhismooyinka arrimaha bulshada sida,
  - Isbitaallada
  - Dugsiyada iyo goobaha isboortiga
  - Dhismaha & hagaajinta waddooyinka
  - Qodista & dayactirka ceelasha

Kharajka guud ee dowladda:

Sanadka	kharajka
2005	4,417,300.00 \$
2006	5,265,391.30 \$
2007	9,588,115.50 \$
2008 (Jan-Sep)	6,243,573.70 \$
Wadar,	25,514,380.50 \$

Mashaariicda la fuliyey:

Sanadka	Kharajka
2005	146,723,20 \$
2006	448,036,70 \$
2007	643,389,20 \$
2008 (Jan-Sep)	260,501,70 \$
Wadar	1,498,650.80 \$

Faahfaahinta qayb ka mid ah kharajka kor ku qoran ee 2005-2008:

- Garoonka dayaaradaha ee Boosaaso, 2,000,000 \$
- Maxjarka, 200,000 \$
- Dhismaha daarta cusub ee dekedda, 250,000 \$
- Dayactirka xafiiska maaliyadda gobolka Karkaar, 20,000 \$
- Dhismo cusub & dayactir xafiiska maaliyadda gobolka Nugaal, 40,000 \$
- Dhismaha xafiiska maaliyadda gobolka Mudug, 25,000 \$

- Dhismaha kastamka kontaroolka Boosaaso,  
20,000 \$
- Dhismaha xafiiska maaliyadda degmada Xaafuun,  
15,000 \$
- Dayactirka xafiisayada maaliyadda ee L/qoray,Baran & Dhahar,  
10,000 \$
- Ka qayb-qaadasho dayactir jidad,  
300,000 \$
- Dhismaha xafiiska xarunta wasaaradda haweenka ee Garowe,  
7,000 \$
- Qodis iyo dayactir ceelal ee Cayn,Bari,Nugaal & Mudug,  
800,000 \$
- Ka qayb-qaadasho barnaamijka ETA (emergency technical  
assistance),  
70,000 \$
- lib qalab & gaadiid ciidan,  
4,000,000 \$
- Taakulada akadeemiyada Carmo,  
120,000 \$
- Soo dhoweynta wufuudda federaalka,  
1,670,000 \$
- Dayactirka xabsiyada gobollada,Bari,Karkaar,Nugaal,Sool &  
Mudug,  
211,000 \$
- Ka qayb-galka dhismaha madaxtooyada ee Garowe,  
65,000 \$
- Dhismaha xafiiska PRA ee Boosaaso,  
28,000 \$
- Dayactirka saldhigga Booliska L/caanood,  
10,000 \$
- Dayactirka Runway-ga garoonka Gaalkacyo,Garowe & Boosaaso,  
108,000 \$
- Kharaj xafaarad ee dekeda Boosaaso,  
50,000 \$
- Matorro loo iibiyey W.maaliyadda,dekeda & ENEE  
400,000 \$
- Dhul loo iibiyey ciidanka Booliska Boosaaso,  
20,000 \$
- Arrimaha heshiisiinta beelaha Gaalkacyo & Gal-guduud,  
181,000 \$
- Sugidda ammaanka & xuduudaha Puntland,  
3,000,000 \$
- Caafimaadka shaqaalah & ciidamada,  
200,000 \$
- Ka qayb-qadashada dhismaha isbitaallada & MCH-yada,  
150,000 \$
- Ka qayb-qadashada dhismaha & dayactirka dugsiyada,  
100,000 \$

Lacagaha kor ku qoran waxay ku salaysan yihiin heerka sarrifka kala ah:

Sanadaha, 2005-2006, 1 US \$ = Sh.So. 15,000.

Sanadka, 2007, 1 US \$ = Sh.So. 18,000.

Sanadka, 2008, 1 US \$ = Sh.So. 22,000.

Curaaro: 2005-2008 US \$ 13,190,175.30

Khidmado: 2005-2008 US \$ 05,191,404.60

Deymanka baxay: US\$ 04,962.536.50



Dhismaha xafiisyada cusub ee laga dhisay gudaha dekeda Boosaaso



Xafiiska Website-ka dowladda oo ku dhex yaal madaxtooyada-Garowe  
Sare u qaadista awoodda wax-qabad (Capacity building):  
Si sare loogu qaado awoodda wax-qabad (Capacity building) ee  
wasaaradda loona horumariyo hay'ad-dhismeedkeeda (institutional  
development) waxay wasiirka maaliyadda iyo xubno kale safar shaqo ku  
tageen dalka Maraykanka iyadoo loo oggolaaday kaalmo farsamo  
(Technical assistance) loogu magac-daray ETA (Emergency technical  
assistance).

wafdi ka socda Bangiga adduunka ee barnaamijka ETA oo Puntland yimid Heshiis arrintaan ku saabsan ayey wasaaradda maaliyadda iyo wasaaradda qorshaynta & iskaashigu la saxiixdeen Bangiga adduunka iyo UNDP.



Khubarada ka hawl geleysa mashruuca ETA  
Mashruucaan oo socon doona 12 billood waxay Bangiga adduunka iyo  
UNDP ku bixiyeen lacag dhan USD.150,000 \$ looguna tala galay hawlgalka  
5 khabir iyo 3 xiriiriye oo fuliya barnaamijka isuguna jira:

- o Taxation consultant
- o Policy analysis consultant
- o Gender policy consultant
- o Aid coordinator
- o Economist (Consultant)
- o Project coordinator, Admin/finance & Computer operator



Kulamo shaqo oo ay ku wada jiraan mas'uuliinta Wasaaradda Maaliyadda &  
Khubarada mashruuca ETA.

Hirgelinta barnaamijka ETA:

Mashruuca ETA si rasmi ah ayuu u hirgalay waxaana ka soo baxay talooyin iyo buugaag ku saabsan shuruuc iyo hab-maamul wanaag loogu tala galay in lagu horumariyo hawlahaa iyo tayada wax-qabad ee wasaaradaha.

Dhan kale waxaa la garowsaday in mashruucaan la ballaariyo maadaama uu ahaa kii u horreeyey oo ay wasaaradda maaliyaddu heshay intii ay jirtey.

Heshiis 2 sano soconaya:

Waxaa mar kale 2008 la ansixiyey heshiis 2 sano soconaya kuna aaddan arrimaha soo socda:

1. In agaasimayaasha iyo hawl-wadeennada wasaaradda maaliyadda la baro xirfadaha adeegsiga teknoolojijada casriga ah (Computer technology) si ay uga gudbaan habka dambeeya ee hadda lagu shaqeeyo loona hanto adeegsiga IT (Information technology)
2. In wasaaradda maaliyadda loogu deeqo:
  - o Computers, printers, scanners, fax & photocopy machines
  - o Gaadiid ah 4WD iyo basas loo adeegsado ilaalinta cashuuraha iyo hawlaha dakhli-ururinta
  - o Dab-dhaliyeaal loogu tala gelayo dhammaan goobaha ay wasaaraddu ka hawl gasho oo ay degmooyinka iyo tuuloooyinku ku jiraan
  - o Qalabka casriga ah ee looga shaqeeyo furdooyinka adduunka
  - o La-taliyeaal u dhashay dalalka horumaray ee Yurub oo gacan ka geysta horumarinta iyo tayeynta hawlaha iyo barnaamijyada wasaaradda
  - o In hay'adda hanti-dhowrka guud loogu deeqo gaadiid iyo qalab u suurta gelin kara gudashada waajibaadka saaran
  - o Dejinta hannaan iyo tabo ay wasaaradda maaliyadda iyo wasaaradda qorshayntu ku la xisaabtamaan deeq-bixiyaasha

La dagaallanka lacagaha been-abuurka ah:

Wasaaradda maaliyaddu waxay xil iska saartay la dagaallanka lacagaha isugu jira shilin soomaaliga iyo doolarka ee been-abuurka ah.

Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa ciidanka booliska iyo kan xuduudaha waxaa suurta gashay:

- o In gacanta lagu dhigo makiinado lagu sameeyo lacagaha shilinka iyo doolarka ee been-abuurka ah
- o In la qabto lacago badan oo la been abuuray
- o In la is hortaago in Puntland la keeno makiinado lagu sameeyo lacagaha been-abuurka ah

Si hawlahaasi u qabsoomaan waxay wasaaraddu bixisay kharaj aad u fara badan iyadoo isla markaana kharaj aan yarayn lagu bixiyey xogaha arrinta la xiriira.



Hawlgal ku saabsan la dagaallanka lacagaha been-abuurka ah

Ka qaybgal dhismo maktabadeed:  
Iyadoo la qiimaynayo baahida loo qabo maktabad dadweyne waxay  
wasaaraddu bixisay 10 % hawsha dhismaha maktabadda dadweynaha ee  
Garowe



Makatabadda dadweynaha ee Garowe oo ay 10 % dhismaheeda dowladdu bixisay

#### WAX-QABADKA WASAARADDA AMNIGA & DDR

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey, Yaasiin Cali C/Ile, wasiir ku xigeenka amniga

Wasaaradda amniga & DDR waxay ka mid tahay wasaaradaha hormuudka  
ka ah hawlaaha dowladda,waxayna u qaybsan tahay:

- Qaybta amniga dadweynaha (Public security), iyo
- Qaybta dib-u-dejinta,dhaqan-celinta,hub-ka dhigista & miinasaarka (DDR).

Hawlahay ay wasaaraddu u xil saaran tahay waa kuwa macne weyn iyo  
qiime badan ugu fadhiya shacabka Puntland.

Waa arrin la wada qirsan yahay in amnigu yahay tiirkka iyo tiginka dhabta ah  
ee nolosha aadanaha iyo degganaanshaha bulshada,waana sababta wax  
kastoo kale looga hormariyo oo mudhaanta iyo fiirada gaarka ah loo siiyo.

Suurtagal ma aha in nolol iyo karaamo lagu joogo amaba horumar la  
toogeysto iyadoo ay amni-darro jirto.



PUNTLANDGOV.NET

Akadeemiyada Booliska ee Carmo

Xaqiqadaas ayaa keentay in dal kastaa ka hawlgalo wax kastana uu sugidda amniga u huro.

Dhan kale amnigu waa aalad loo baahan yahay in si dhab ah loo asteeyo oo kaabayaasha laga ma maarmaanka u ah loo dhammaystiro si loo hanto nabadgeleyo lagu seexdo oo lagu kalsoonaado isla markaana leh jiritaan waara.

Amnigu wuxuu ugu horreyyaa arrimaha ay Puntland,dowlad iyo shacabba sida buuxda isha loogu hayo,maxaa yeelay barnaamijka iyo hawlaha nabadgeleyada la xiriira taabbagal ma noqon karaan haddii aan gacan,taageero iyo hiilo bulshada laga helin.



Ra'iisal-wasaarihii hore ee DFKMG iyo Madaxweyne ku xigeenka Puntland oo furay akadeemiyada Booliska ee Carmo.

Sidaa daraaddeed waxaa laga ma maarmaan in muwaadin kastaa xil iska saaro oo uu ku mitido sugidda amniga iyo ka hortagga wixii nabadda iyo xasiloona carqalad ku ah.

Dowladdu waxay abuurtay wasaarad arrimaha amniga u gaar ah, taasoo ka marag kacaysa sida loo danaynayo, waxay ku dhaqaqday tallaabooyin iyo fulinta barnaamijyo looga gol leeyahay xoojinta awoodda wax-qabad iyo tayeynta ciidamada amniga.

Si amni-darrada loo la tacaalo waxaa laga ma maarmaan ah in si weyn wax looga qabto arrimaha sababa ama kaaliya nabadjelyo-xumida, sidaa daraaddeed waxaa ahmiyad iyo waxtarba leh wacyi-gelinta bulshada ee ku aaddan nabadda iyo amniga.

Inkastoo ayan fududayn in warbixin kooban lagu soo ururiyo wax-qabadka wasaarad ay hawlaheedu sidaas u baaxad weyn yihlin haddana waxaa laga ma maarmaan ah in la xuso arrimaha ugu muhimsan ee wax-qabadka wasaaraddaan muujinaya.

#### I. Qaybta amniga

##### 1. Hawlaha nabadaynta:

Wasaaraddu waxay ka hawl gashay xallinta iyo heshiisiinta beelo ay colaad iyo xiisado dhixmareen oo dhan 37 xaaladood.

Colaadahaas waxaa ku naf waayey 55 qof.

Arrimahaasi waxay nabadjelyo-xumo ka abuureen meelo ka mid ah Puntland.

Arrimaha in laga heshiyo lagu guuleystey suluxana laga gaarey waxaa ka mid ah:

Degaanka	Taariikhda	Tirada xaaladaha	Dil	Natiijada
Karkaar	2005/06	23	14	heshiis

Burt/L-caanood	2007	4	10	heshiis
Mudug	2006/07	3	3	heshiis
Buuhoodle	2007	1	21	heshiis
Bari	2006	4	5	heshiis
Sanaag	2005/06	2	2	heshiis

Wadar,                    37                    55



Xubno boolis ah oo dhammaystay tababarka akadeemiyada Carmo

## 2. Taakulaynta tayeynta ciidanka Booliska:

Wasaaraddu iyadoo gacan ka heshay hay'adaha caalamiga ah iyo xukuumadda waxay 2008-dii ku guuleysatey dhammaystirka qaybtii 2 aad ee akadeemiyada ciidanka Booliska Carmo iyadoo isla markaana qaybtii 3 aad dhowaan la bilaabi doono.



Ciidan tababr dhammaystay oo salaan ku bixinaya barxadda akadeemiyada Carmo

## 3. Dhisidda SPU:

Sanadkii 2007 wasaaraddu waxay fulisey dhisidda, tababaridda iyo hawlgelinta kooxda Booliska ee ilaalinta hay'adaha caalamiga ah kuwaas oo 2 marxaladood oo tababar Carmo ku dhammaystay tiradooduna dhan tahay 270 askari.

#### 4. Sugidda ammaanka Boosaaso:

Sanadka 2008,wasaaraddu waxay dib u habayn ku samaysay hawgallada Booliska ee gobollada Bari iyo Karkaar.

Ol'olahaan waxaa lagu qabqabtay oo xabsiga la dhigay 83 dambiile oo galay dembiyada kala duwan oo isugu jira gacan-ku- dhiiglayaal,burcad iyo tuugo.

Waxaa si weyn loogu guuleystey sugidda nabadjelyada labadaas gobol siiba magaalooinka Boosaaso iyo Qardho oo hawlgalkaas ka hor ay dhibaato amni-darro ka jirtey.

Xaaladaha kale ee uu Boolisku gacanta ku dhigay oo maxkamado la horgeeyey waa sidatan:

Dembii	2006	2007	2008	Isugeyn
Dil	118	126	114	358
Kufsi	77	94	21	192
Dhac baabuur	84	92	51	227
Burcad badeed	7	8	11	26
Afdub	12	18	17	47

#### 5. Dugsiga tababarka ciidanka Booliska ee Qardho:

Wasaaraddu waxay dugsigaan hirgelisey 2006-2007 iyadoo ay ilaa iyo hadda ku tababarmeen 450 xubnood oo Boolis ah.

#### 6. Saraakiil cusub:

Waxaa akadeemiyada Carmo tababar layli saraakiileed loogu furay 120 arday oo loo diyaarinayo inay ku biiraan ciidanka Booliska.Tababarku wuxuu ku saabsan yahay shuruucda iyo hawlahaa laamaha kala duwan ee Booliska.Tababarkani wuxuu socon doonaa ilaa iyo 2010.

#### 7. Ururka birmadka Booliska:

Waxaa la dhisay ciidanka birmadka Booliska oo ka kooban 450 xubnood oo saraakiil iyo askar isugu jira.

#### 8. Ka hortagga tahriibta:

Arrimaha ugu culus oo dhibaataada leh waxaa ka mid ah tahriibta oo ay dad Soomaali iyo ajneebiba lihi si joogto ah ku halaagmaan.

Inkastoo si weyn la isugu dayey joojinta tahriibta haddana waxaa cad in wax ka qabashadeedu tahay hawl culus oo ayan Puntland oo keliyahi wejihi karin.

In badan ayaa arrintaan laga la hadlay beesha caalamka iyo gaar ahaan hay'adaha sharci ahaan ay tahay inay wax ka qabtaan, hayeeshee hay'adahaasi arrintaas dheg waa u dhigi waayeen.

Waxaa arrin la la yaabo ah in dadka tahriiba markay badda ka gudbaan ay hay'aduhu intooda bedbaadda u gurmadaan oo ay xeryo qaxooti dejyaan, iyadoo hay'adahaas laga la caalwaayey inay tahriibta wax ka qabtaan intaan laba gaarin in khasaaro dhaco.

Si kasta ha ahaatee maamulka Puntland inta tabartiisa waa isku dayey inuu hakiyo tahriibta, isku-daygaasina waa sii socon doonaa inkastoo tas-hiilaad

badan, gaadiid berri iyo mid badeed oo dheereeya, qalab ciidan iyo adeegyo kaloo badan loo baahan yahay.

Daawada dhabta ah ee dhibaatada tahriibta lagu xallin karaa waa iyadoo baraha ay Puntland tahriibayaashu ka soo galaan lagu hakiyo oo ay UNHCR iyo hay'adaha kale ee arrintaas u xil saarani wax ka qabtaan.

Dadka inay tahriibaan doonayaa waxay isugu jiraan Soomaali ka soo barakacday qaybaha kala duwan ee Soomaaliya iyo ajnebi fara badan oo dalalka deriska iyo dalal kaleba ka yimaada. Sidaa daraaddeed joojinta tahriibta waxaa ka horraysa sidii loo sugi lahaa in laga hortago.

Halkaa waxaa laga garan karaa in arrinta tahriibtu tahay hawl ballaaran oo loo baahan yahay inay xallinteeda waxa kaga aaddan ka qabtaan hay'adaha qaabilsan iyo dalalka laga soo qaxayo.

#### 9. Xallinta dhibaatada burcad-badeedka:

Muddadaan dambe waxaa si dardar leh u soo kordheysa hawlaха burcad-badeedka oo waxyeladeedu adduunka oo idil saamaysay.



Burcad-badeed doon af-duubtay oo ay ciidamadu gacanta ku soo dhigeen

Burcadda baddu waxay si is-daba-joog ah u afduubaan doonyo iyo maraakiib, arrintaas oo dhib weyn ku noqotay dhaqdaqaqa gaadiidka badda iyo guud ahaan ganacsiga caalamiga ah.

Inkasta oo ay burcaddu afduubka ka geysato badaha Soomaaliya, haddana waxaa cad in arrintu Puntland iyo guud ahaanba Soomaaliya dhaafsiisan tahay oo abaabulka iyo hawl-gelintu meelo badan ka socoto.

Dowladda Puntland iyo DFKM in badan bey beesha caalamka ugu baaqeen in arrinta burcad-badeedka wax laga qabto, hayeeshee beesha caalamku arrintaas in badan waa iska indhatirtay ilaa ay xaaladdii gacanta ka baxday oo ay danihii dalal badani khatar galeen oo ay hadda markay taabatay dareemeen oo bilaabeen inay arrinta ka danqadaan.

Haddii markii hawlaха burcad-badeedku bilowga ahayd la tixgelin lahaa codsiyadii iyo qaylo-dhaantii Puntland iyo sidoo kale DFKM waxaa suurta geli lahayd in waqtii iyo kharaj yar lagu joojiyo.

Haddii beesha caalamka laga heli lahaa kaalmo maaliyadeed, qalab iyo mid farsamo waa lagu filnaan lahaa xallinta arrinta burcad-badeedka.

Si kasta ha ahaatee mamulka Puntland wuxuu danaynayaa oo uu diyaar u yahay inuu intii tabartiis ah ka qayb galo barnaamij iyo hawlgal kasta oo arrintaan lagu la tacaalayo, waxaana u daliil ah doontii ay dhowaan burcaddu af-duubtay ee ay ciidamada Puntland gacanta ku soo dhigeen.

#### 10. La dagaallanka mukhaddaraadka:

Mukhaddaraadku waa aafu halis ku ah bulshada loona baahan yahay in si adag loo la tacaalo. Suurtagal ma aha in degaan si weyn looga isticmaalo maan-dooriyaal uu yeesho cudud fayow oo barnaamijyada horumarinta hanan karta.

Ciidamada amnigu muddada 2005-2008 waxay ku dhaqaaqeent fulinta barnaamij ku wahahan la dagaallanka mukhddaraadka waxaana gacanta lagu dhigay dad badan oo arrintaas lagu qabqabtay.

#### II. Qaybta DDR

##### a. Jiheyn

2005-2007 waxaa la jiheeyey 272 askari oo ka tirsanaa qaybaha kala duwan ee ciidamada iyadoo la siiyey tababar xirfadeed.

b. Waxaa la dhmmaystiray qorshe sanadkan 2008 lagu jiheynayo 501 qof

c. Waxaa la qabtay tababarro is daba-joog ah oo ku saabsan halista iyo dhibaatooyinka hubka fudud ee ku jira gacanta dadweynaha. Tababarradaan waxaa lagu qabtay Boosaaso, Qardho, Garowe iyo Gaalkacyo. Arrintaan si weyn ayey qaybaha kala duwan ee bulshadu u soo dhoweeyeen, waxaana dadweynaha laga helay taloojin wax ku ool ah oo barnaamijkaan la xiriira.

d. Hay'adda UNDP waxay gacan weyn ka geysatey dhismaha xafiisyada PDDRU, qalabaynta, gunnooyinka shaqaalaha iyo kharajka hawl socodsiinta.

e. Waxaa socda barnaamijka miina-saarka oo sida la ogsoon yahay ahmiyad ballaaran leh iyadoo la sameeyey wixii daraasado iyo sahamo ah ee hawshaan la xiriira ku talagalkuna yahay in mustaqbalka dhow laga hawlgalo fulinta mashruuca miina-saarka.

##### f. Diiwaan-gelinta qaxootiga

wasaaraddu waxay fulisey oo shaqo gelisey xafiiska diiwaan-gelinta qaxootiga ku sugar Puntland.

Barnaamijkaan waxaa la la kaashaday hay'adda UNHCR, waxaana la diiwaan-geliyey 1,127 qof, tiradaas oo 164 ka mid ah oo keliya ay UNHCR qaxootinnimo u aqoonsatay.

Wasaaraddu waxay kaloo 2008 dadaal dheeraad ah gelisey joojinta iyo xakamaynta tahriibta oo sida la ogsoon yahay ay dad badani ku naf waayaan.

Waxay wasaaraddu xallinta dhibaataada tahriibta kala xaajooteey hay'adaha caalamiga ah ee hawlaas qaabilسان sida UNHCR iyo kuwa kale.

Joojinta tahriibta ilaa iyo hadda lagu ma guuleysan maxaa yeelay waxaa lagu hungoobey in hay'adaha caalamiga ahi arrinta ka qabtaan waxa kaga aaddan.



Dhismaha xarunta cusub ee wasaaradda qorshaynta & iskaashiga-Garowe

Wasaaradda qorshaynta & iskaashiga caalamigu waxay ka kooban tahay:

1. Agaasinka guud ee qorshaynta
2. Agaasinka guud ee iskaashiga caalamiga.

Wasaaradda waxay u xil saaran tahay:

- Ururinta xogta looga baahan yahay qorshe-diyaarinta
- La socodka fulinta qaybaha iyo marxaladaha qorshaha degsan
- Diyaarinta iyo bandhigidda tirakoobyada
- Qeexidda kala mudnaanta barnaamijyada iyo mashaariicda kala duwan
- Diyaarinta barnaamijyada iyo mashaariicda maalgelinta loo baadigoobayo
- Diiwaangelinta,la-shaqaynta iyo la-socodka hawlgalka hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah ee ka shaqeeya Puntland
- Isku dubaridka hawlaha hay'adaha
- Isku-xirka laamaha dowladda iyo hay'adaha caalamiga iyadoo la tixgelinayo dabeecadda hawlaha ay hay'ad kastaa ku hawlan tahay
- U fududaynta hawl-wadeennada iyo shaqaalaha hay'adaha Puntland ka shaqeeya wixii arrimo ah oo hawlgalkooda la xiriira
- Baadigoobka kaalamada farsamo ee ay laamaha dowladdu uga baahan yihiin deeq-bixiyaasha,hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah
- Qiimaynta iyo dabagalka sida ay hay'adaha iyo ururrada caalamigu hawlhooda u fuliyaan
- Diyaarinta shirarka ku saabsan iskaashiga dowladda iyo hay'adaha & ururrada caalamiga ah

Wasaaraddu muddada 4-ta sano ee 2005-2008 waxay fulisey hawlo iyo barnaamijyo ballaaran oo ay ka mid yihiin:

1. Qorshaha 5ta sano ee puntland



Shir ku saabsan qorshaha oo ay ku wada tashanayaan dowladda iyo hay'adaha caalamigu.

Sida laga wada warqabo qorshe la'aan horumar la ma gaari karo, sidaa daraaddeed wasaaraddu iyadoo fulineysa siyaasadda iyo barnaamijka dowladda waxay ka hawl gashay in Puntland yeelato qorshe 5 sano.

Arrintani waa tallaabo si weyn u saamaynaysa mustaqbalka reer Puntland.

Diyarinta qorshaha 5ta sano waxay socotey muddo dheer waxaana la geliyey dadaal badan, waxaa ka qayb qaataq aqooniyahannada Puntland ee takhasusyada kala duwan, kuwaas oo si hagar la'aan ah hawshaan ugu tafa-xeytey kana mira dhaliyey.

Dokumeentiga qorshaha 5ta sano wuxuu koobayaan arrimaha:

- Dhaqaalaha (economy)
- Kaabayaasha (infrastructure)
- Bulshada (social)
- Wax-soo-saarka (production)
- Caddaaladda & aminga (Justice & security)
- Maamul-wanaagga (good governance)

Diyarinta barnaamijka waxaa gacan ka geysatey oo kaalmo farsamo u fidisay hay'adda UNDP.



Wafdi UN oo booqasho ku yimid Puntland

In badan bey Puntland ku taameysey dejinta qorshaha 5ta sano waxaana maanta suurtagal noqotay in himiladaas la xaqijiyo.

## 2. Heshiis is-afgarad

Waxaa la meelmariyey heshiiska is-afgarad (Memorandum of Understanding- MOU).

Dokumeentigaani wuxuu qeexayaa sida ay laamaha dowladda iyo hay'adaha caalamigu u wada shagynayaan, wawa daraf kasta ku waajiba iyo sida xaalad kasta oo soo gudboonaata loo maaraynayo.

Heshiiskani wuxuu laga ma maarmaan u yahay hawlgalka hay'adaha iyo ku dhaqanka hannaan hufan oo ay dowladda iyo hay'aduhu ku wada shaqeeyaan.

Dokumeentiga heshiiska is-afgarad ee ay dowladda iyo hay'adaha caalamigu kala saxiixdeen waa miro ka dhashay dadaal, doodo badan iyo wada hadallo muddo dheer jiitamayey.

Heshiisku wuxuu ka jawaabayaa si buuxdana u waafaqsaqn yahay siyaasadda dowladda ee iskashiga iyo wada-shaqynta ku wajahan iyadoo isla markaana la tixgeliyey lana xurmeeyey xeerarka caalmiga ah ee arrinta ku saabsan.

## 3. Horumarka Puntland

Waxaa la diyaariyaa oo la soo saaraa qoraal tilmaamaya horumarka ay Puntland hadba ka gaarto dhinacyada dhaqaalaha, bulshada, kaabayaasha iwm (Puntland in progress).

## 4. Qormada "Figures & Facts"

Waxay wasaaraddu soo saartay buugga (figures & facts) oo suurad cad ka bixinaya dhammaan xaaladaha kala duwan ee Puntland.

**5. Xarunta cusub ee wasaaradda**

Waxaa socda oo dhammaad ku dhow dhismaha xarunta cusub ee wasaaradda oo ah deeq Puntland loo fidiyey,

Xaruntaan waxaa laga dhisayaa caasimadda Puntland ee Garowe.

**6. Sahamo**

Waxaa laga hawlgalaa, si marxaladaysanna loo sameeyaa sahamada kala geddisan ee soo gala hawlaха qorshaynta.

**7. Tababarro**

Waxaa wasaaradaha mid kasta loo tababaray 2 hawl-wadeen oo u qaabilسانانaya qorshaha iyo tirakoobka

**8. Kaalmo farsamo**

Waxaa la fuliyey kaalmo farsamo oo ay hay'adaha caalamigu u fidiyeen hawl-wadeennada dowladda qaarkood

**WAX-QABADKA W.WARFAAFINTA,DH. ISG. & DALXIISKA**

Warbixintaan waxaa diyaariyey Dr. Yaasiin Aadan Rooble,  
agaasimaha waaxda maamulka.

Wasaaradda warfaafinta, dhaqanka, isgaarsiinta & dalxiisku waxay mas'uul ka tahay:

- Dejinta, horumarinta iyo tayeynta siyaasadda warfaafineed ee puntland
- Xaqijinta hannaanka warbaahinta xorta ah oo waafaqsan dastuurka Puntland
- Dejinta iyo meelmarinta nidaam warfaafineed oo ka turjumaya kana jawaabaya himilada shacabka Puntland
- La saan-qaadka iyo adeegsiga teknoolojiyada cusub iyo tabaha casriga ah ee warbaahinta
- U bandhigidda dadweynaha Puntland, qaybaha kale ee Soomaaliya iyo beesha caalamka horumarka Puntland ee dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka iwm
- Bandhigidda khayraadka dabiiciga ah ee Puntland
- Ururinta taariikhda,hiddaha iyo suugaanta Soomaaliyeed guud ahaan iyo Puntland gaar ahaan
- 
- Dejinta nidaam isgaarsiineed casri ah iyo sugidda habsamida adeegga shirkadaha isgaarsiinta
- Dhiirrigelinta hirgelinta mashaariicda idaacadaha, televisiannada iyo wargeesyada gaarka ah
- Diyaarinta xeerarka nidaamiya shirkadaha iyo xafiisyada warbaahinta & isgaarsiinta

Muddada 4-ta sano ee 2005-2008 wasaaraddu waxay soo qabatay hawlo badan iyadoo la tilmaami karo kuwa ugu muhimsan ee soo soda:

1. Waxaa la horumariyey sharciga warfaafinta
2. Waxaa laga hawlgalay oo socda barnaamij lagu midaynayoascaarta adeegsiga gudaha ee taleefannada iyo noocyada kale ee isgaarsiinta laguna nidaaminayo hawlaха shirkadaha isgaarsiinta
3. Waxaa socda barnaamij ku saabsan idaacad awood badan oo ay dowladda Puntland yeelato.

4. Waxaa la wadaa hirgelinta madbacad dowladeed
5. Waxaa dib u habayn lagu hayaa sharciga isgaarsiinta Puntland
6. Waxaa la fuliyey barnaamijyo wacyi-gelin oo kala heer ah laguna qabtay xarumaha maamulada gobollada
7. Waxaa la dayactiray xarunta wasaaradda ee gobolka Bari
8. Waxaa dib loo nidaamiyey oo guddi maamul loo dhisay idaacadda dowladda ee Gaalkacyo
9. Waxaa tababarro marxaladaysan la siiyey hawl-wadeennada qalabka warbaahinta Puntland
10. Waxaa iskaashi xagga farsamada ah la la leeyahay laanta afka Soomaaliga ee idaacadda BBC-da
11. Waxaa kaalmo idaacadda Gaalkacyo ee dowladda iyo idaacadaha gaarka ah looga helay hay'adda CARE, iyadoo tababarro dibadda ah loo diray qaar ka mid ah hawl-wadeennada warbaahinta tasoo la la kaashaday USAID.
12. Waxaa la tirakoobay lana diliwaan geliyey hoteellada magaalo madaxyada gobollada Puntland
13. Waxaa la sahamiyey lana ururiyey dhismooyinka iyo goobaha kale ee taariikhiga ah iyadoo la diyaarinayo daraasad la hordhigi doono hay'adda UNESCO
14. Waxaa la abuuray oo ku hawljirta akadeemiyada hiddaha iyo dhaqanka
15. Waxaa la qorsheeyey dhismaha matxafka dhexe ee Puntland

#### **WAX-QABADKA W. HAWLAHA GUUD & GAADIIDKA**

Warbixintaan waxaa laga soo gudbiyey xafiiska wasiirka hawlaха guud (WHGGDH/XW/212/08).

Wasaaradda hawlaха guud iyo gaadiidku waxay qaabilسان tahay kaabayaasha ay ka midka yihiin dhismaha guud, tamarta, biyaha, gaadiidka, jidadka, garoomada dayaaradaha,magaaleyn ta iwm.

Hawlaха ay wasaaraddu u xil saaran tahay waa kuwa fure u ah horumarka,waa kuwa taabanaya si toos ahna u saamaynaya dhinacyada,dhaqaalaha,arrimaha bulshada iyo kaabayaasha la xiriira.

Ahmiyadda hawlaха wasaaradda waxaa laga garan karaa halka ay kaabayaashu kaga jiraan qorshaha 5-ta sano ee D/goboleedka Puntland iyadoo ay kaabayaashu yihiin mid ka mid ah 6-da qaybood ee uu qorshuhu ka kooban yahay. Waxaa kaloo xusid mudan in barnaamijyada dowladda si gaar ah hawlaха biyaha, korontada iyo kaabayaasha gaadiidka loogu tixgeliyo taasoo u macna dhacaysa qirashada kaalinta ay arrimahaasi horumarka dalka kaga jiraan.

Muddada 4-ta sano ee 2005-2008 waxaa qabsoomay hawlo iyo mashaariic aad u fara badan oo soo gala arrimaha ay wasaaraddu u xil saaran tahay iyadoo la xusi karo kuwa hoos ku taxan:



Muuqaalka guud ee daarta garoonka Boosaaso ee cusub  
(Terminal building front elevation)

#### A.Garoomada dayaaradaha (Airports)

##### a. Garoonka dayaaradaha cusub ee Garowe (Conoco)

Hawsha mashruucaani waa socotaa waxaana maalgelintiisa iska kaashaday dowladda iyo dadweynaha.

Mashruucani wuxuu leeyahay ahmiyad ballaaran maadaama uu ka dhismayo caasimadda Puntland iyadoo uu dhan kalena dowr weyn ka qaadanayo dhaqdhaqaaqa socdaalka dadka,kobcinta dhaqaalahi iyo awoodda duulimaadka rayadka ah ee Puntland.

Mashruuca garoonka caasimaddu wuxuu ka koobnaanaya dhabbada dayaaradaha (Runway), daarta garoonka (Terminal building) iyo adeegyada kale ee laga ma maarmaanka u ah hawlgeinta garoonka iyo hawlaha duulimaadka cirka.

Dhanka farsamada waxaa mashruuca la la kaashaday hay'adda ICAO si uu dhismaha garoonku u noqdo mid waafaqsan shuruudaha iyo tilmaamaha farsamo ee laga doonayo garoomada duulimaadka rayadka ah

## b. Dayactirka garoonka Gaalkacyo

Sida la ogsoon yahay garoonka Gaalkacyo waa mid asal ahaan loogu tala galay dayaaradaha ciidamada taasoo dhismaha dhabbada (Runway-ga) lagu saleeyey.

Dhumaca runway-ga oo aad u yar oo aan dayaaradaha rayadka ee ganacsiga loogu tala gelin wuxuu soo jiidey oo uu sababay burbur ka soo gaarey dayaarado culculus oo garoonka ku soo degey kuwaas oo sida la ogsoon yahay dhaawac weyn geystey.

Haddaba iyadoo la tixgelinayo ahmiyadda dhaqaale ee garoonka Gaalkacyo waxaa laga hawlgalay dayactirka runway-ga iyo sidoo kale dhammaystirka daarta garoonka (Terminal building) oo ilaa iyo dowladdii dhexe oo hore qabyo ahayd.

Hawlaха daycatirka garoonka Gaalkacyo waxaa maalgelisey dowladda iyadoo ay dadweynuhuna gacan ka geysteen, taageerana ay la garab istaageen.

## c. Dayactirka garoonka Boosaaso

- Waxaa qalabka ifa lagu sameeyey garoonka Boosaaso (reflexive light) taasoo suurtagal ka dhigtay in dayaaraduhu habeennimada ku degaan.
- Mashruucaan waxaa iska kaashaday dowladda iyo hay'adda caalamiga ee duulista rayadka (ICAO).
- Waxaa dalka gudihisa lagu qabtay tababarro sare loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee hawl-wadeennada iyo shaqaalaha garoomada dayaaradaha Puntland lana xiriirta hawlaха duulimaadka iyo maaraynta garoomada.
- Waxaa tababar dibadeed loo diray hawl-wadeenno ka tirsan agaasinka duulista hawada si ay aqoontoodu u korarto, waayo-aragnimo dheeraad ahna ay u helaan.

Dhismaha garoonka cusub ee Boosaaso:

### a. Runway

Runway-ga cusub ee garoonku wuxuu cabbir ahaan dhan yahay 3,700 m oo dherer ah iyo 45m oo ballac ah waxaana loogu tala galay duulimaadka ganacsiga caalamiga ah iyadoo ay ku soo degi kari doonaan dayaaradaha calculus.




Puntlandgov.Net

Dhagax-dhigga Runway-ga garoonka cusub ee Boosaaso

## GOVERNMENT of PUNTLAND STATE SOMALIA BOSASSO AIRPORT BENDER QASSIM New Construction Runway CAT. 4 E

 Design and General Contractor   
CORMIO ENGINEERING S.r.l.

Viale Ettore Andreis, 74 - 25015 Desenzano del Garda (BS) Italy - Tel. +39 030 9912474 - Fax +39 030 9912471  
P.IVA 01616650980 - C.F. 03001460173 - C.C.I.A. 38876 - www.cormio.it - e-mail: info@cormio.it



Naqshadda guud ee Runway-ga garoonka cusub ee Boosaaso

- b. Daarta garoonka (Terminal building) oo ka kooban:
- 1. Qolka sugitaanka iyo adeegyada la xiriira sida soodhoweynta, qolalka taleefannada, baarar iwm
- 2. Qaybta dhoofka iyo adeegyada la xiriira
- 3. Qaybta baarista
- 4. Xafiisyada furdada, laanta socdaalka iyo duulimaadka rayadka
- 5. Qaybta suuqa xorta ah (free duty area)
- 6. Qaybta fadhiga rasmiga ah (VIP)
- 7. Xafiisyada duulimaadka iyo shirkadaha dayaaradaha
- 8. Tower
- c. Qaybta farsamada oo ka kooban:
  - o Xafiisyo
  - o Qolka shirarka
  - o Maqaasiin

- Qolka tababarrada
- Adeegyo kala duwan
- Barxadda baabuur-dhigashada
- d. Qaybta dab-demiska oo ka kooban:
  - No. 2 xafiis
  - Maqaasiin
  - Qolka tababarrada
  - Hooso
  - Adeegyo
  - Barxadda baabuur-dhigashada
- e. Qaybta Cargo:
  - Warehouse (sqm 600)
  - Maqaasiino
  - Xafiiska furdada
  - Adeegyo
  - Barxadda baabuur-dhigashada
- f. Masjid
- g. Qaybta dab-dhaliyaasha (sqm 120)
- h. Ceelal Nos.3
- i. Haan biyo (90 cum)
- j. Saldhig boolis



Terminal-ka garoonka cusub ee Boosaaso

Horumarinta,maaraynta iyo ganacsiyeynta garoonka Boosaaso:  
Sida laga wada warqabo garoonka cusub ee Boosaaso ilaa iyo hadda oo ay shaqo mug weyni qabsoontay waxaa lagu wadey maalgelinta reer Puntland.

Haddaba,si mashruuca garoonka loo gaarsiiyo heer uu garoon caalami ah noqdo waxaa laga ma maarmaan noqotay in shirkado maalgelineed la la kaashado.

Siyaasadda horumarineed ee Puntland waxay soo dhoweyneysaa oo ay jawi dhiirri geliya u abuuraysa maalgashiga gudaha iyo kan ajnebiga ahba.

Sidaa daraaddeed dowladdu waxay heshiis ku saabsan maalgelinta, horumarinta iyo maaraynta garoonka Boosaaso la gashay shirkadda Lootah Investment Group ee laga leeyahay dalka UAE (United Arab Emirates).

Dowladda iyo shirkadda Lootah Investment Group waxay ku heshiyeen in la dhiso shirkad wadaag ah oo loogu magac-daray Bosaso Air-port Company.

Heshiiska oo la kala saxiiday Oct.28,2008 wuxuu waafaqsan yahay sharciga maalgashiga Puntland wuxuuna si buuxda uga jawaabayaa himilada laga leeyahay horumarinta iyo casriyeynta adeegyada garoonka Boosaaso.

#### B. Dhismaha:

Mudada 4-ta sano ee 2005-2008 waxaa dhammaan gobollada Puntland laga fuliyey dhismooyin aad u fara badan oo isugu jira:



Xafiiska PRA ee Boosaaso

- Xafiisyo
- MCH-yo
- Dugsiyo
- Suuqyo
- Xarumo IDPs, iwm
- Dhismooyin & dayactir jidad,



Qolka shirarka madaxtooyada ee Garowe

- Qaybo ka mid ah xafiisyada madaxtooyada ee Garwoe
- Hawlo la xiriira ballaarinta tamarta korontada
- Mashaarilic qodis iyo dayactir ceelal



Suuqa biyo-kulule ee Boosaaso

Wasaaradda hawlaha guud waxaa ku tiirsan hayeeshee maamul ahaan madax bannaan hay'adaha kala ah:

- 1- Hay'adda jidadka (Nesha), iyo
2. Hay'adda tamarta iyo biyaha (Psawen)

Wax-qabadka labadaan hay'adood gaar ayaa loo muujinayaan

## WAX-QABADKA W. GANACSIGA & WARSHADAHA

Warbixintaan waxaa soo wada gudbiyey

1. C/samad Yuusuf Maxamed, wasiirka ganacsiga & warshadaha
2. C/risaaq Nuux Maxamed (Hantiile), agaasimihii guud hore ee wasaaradda ganacsiga, iyo
3. Saciid Maxamed Yuusuf, agaasimaha maamulka ee wasaaradda

Ganacsigu waa halbowlaha dhaqaalaha Puntland, sidaa daraaddeed dowladdu fiiro gaar ah ayey u leedahay nidaaminta,ballaarinta iyo xoojinta kaabayaasha ganacsiga.

Ganacsigu wuxuu meel weyn kaga jira barnaamijka dowladda iyadoo la dejiyey qorshe lagu tala galay in si maraxaldaysan loo fuliyo.

Puntland, gaar ahaan magaalada dekeda ee Boosaaso waxay noqotay xarunta ganacsi oo ay ku tiirsan yahiin dhammaan gobollada Soomaaliyeed iyo kilinka 5 aad ee Soomaalida Itoobiya

Meel-dhaca juqraafi, u dhowaansha jasiiradda Carbeed gaar ahaa dalalka khaliijka ayaa Puntland ka dhigay halka ugu habboon ee uu ganacsiga Soomaalidu ku soo ururi karo.

Wasaarddu muddada 4-ta sano ee ku aaddan 2005-2008 waxay qaadday tallaabooyin badan oo la xiriira horumarinta ganacsiga, iyadoo la xusi karo:

1. Dejinta qorshe la xiriira dlb u habaynta iyo horumarinta shuruucda iyo xeerka nidaamiya ganacsiga
2. Dliwaangelinta ganacsatada iyo shirkadaha ganacsiga ee kala heerka ah
3. Xoojinta xiriirka ganacsi ee la la leeyahay dalalka jaarka ah, sida Yemen,Itoobiya iyo Djibouti
4. Tayeynta iyo casriyeynta habka ganacsi ee Puntland,siiiba dhoofinta xoolaha nool oo sida la ogsoon yahay ah isha ugu mihimsan ee dakhliga iyo guud ahaan dhaqaalaha dalka
5. Waxaa heshiisyo lagu dhiirri gelinayo maal-gashiga la la galay dalal ay ka mid yahiin UAE ,Sucuudigu iyo Yemen,iyadoo gaar ahaan dowladda Yemen lagu la heshiiyey in ganacstada reer Puntland loo fidhiyo tas-hiilaad u fududeeyya hawlahooda ganacsi
6. Waxaa la qalabeeeyey dhammaan xafiisyada wasaaradda
7. Waxaa hawlahaa wasaaradda lagu fidiyey gobollada Puntland
8. Waxaa socda barnaamij dib loogu habaynayo rugta ganacsiga & warshadaha Puntland
9. Waxaa la sameeyey xog ururin iyo daraasado ku saabsan warshadaha shqeeya ee Puntland iyadoo la la kaashaday khubaro ka socda hay'adaha caalamiga ah
10. Waxaa socota diyaarinta daraasad la xiriirta khayraadka dabiiciga ah ee Puntland ee warshadeynta saldhigga u noqon kara
11. Waxaa tababarro loo sameeyey hawl-wadeennada wasaaradda si aqoontooda sare loogu qaado loona xirfadeeyo



Dhismaha xafiiska cusub ee wasaaradda ganacsiga (waa socdaa)-  
Boosaaso

12. Waxaa socda dhismo xarun cusub oo wasaaradda looga dhisayo Boosaaso.Dhismahaan waxaa lagu wadaa maalgelinta dowladda iyo rugta ganacsiga
13. Waxaa la dayactiray xarunta dhexe ee wasaaradda ee caasimnadda Garowe
14. Waxaa la qabanqaabinaya sidii ay ganacsatada Puntland ay uga qayb geli lahaayeen carwooyinka dibadeed si loo bandhigo wax soo-saarka Puntland loona xoojiyo awoodda suuq-geyn ee ganacsatada Puntland
15. Wasaaraddu waxay ka hawl gashay sugidda fayadhowrka badeecadaha la soo dejijo iyo sidoo kale kuwa la dhoofiyi, iyadoo isla markaana la fuliyey barnaamij ganacsatada lagu wacyi gelinayo oo arrinta ku aaddan
16. Waxaa la ururiyaa xogta ku saabsanascaarta badeecadaha iyo heerka sarrifka lacagaha qalaad
17. Wasaaraddu waxay qayb weyn ka qaadatay meelmarinta mashruuca maxjarka xoolaha ee Boosaaso
18. Waxaa dib u habayn lagu sameeyey sharcigii shutuudda ganacsiga

Muddada 2005-2008 wasaaraddu waxay khasnadda dhexe ee dowladda ku xaraysay tirada lacageed ee soo socota:

Sanadka	Dakhliga
2005	Sh.So. 160,500,000
2006	Sh.So. 120,000,000
2007	Sh.So. 123,000,000
2008 (Ilaa November)	Sh.So. 181,656,000

---

Sh.So. 585,156,000

Sida la wada ogsoon yahay xoolaha nooli waa laf-dhabarta dhaqaalaha Puntland iyo guud ahaanba Soomaaliya.

Dhoofinta iyo guud ahaan ka-ganacsiga xooluhu waa isha ugu muhimsan ee lacagta adagi Puntland ka soo gasho.

Dhan kale cudud dadeed oo aad u fara badan ayaa ku hawlan dhaqashada, ka-ganacsiga iyo adeegyada kale ee xoolaha nool la xiriira.

Barnaamijka dowladda Puntland iyo siyaasadda horumarintaba waxay xanaanada xooluhu kaga jirtaa kaalin muhim ah iyadoo arrintaan si weyn loogu tiixgeliyey meel hormuud ahna ay kaga jirto qorshaha 5-ta sano ee D/Goboleedka Puntland.

Xooluhu waxay Puntland,dowlad iyo shacabba ka mudan yihiin daryeel iyo xanaano,waxaa loo baahan yahay in sida si ugu fiican looga faa'ideysto loona manafacaadsado xoolaha faraha badan ee tayada dabiiciga ah leh oo uu Eebbe geyigeena ku mannaystay.

Mar haddii ay xoolaha nooli ahmiyaddaas u leeyhiin bulshadeena waxaa laga ma maarmaan ah in la meelmariyo si buuxdana loo taabbageliyo barnaamij lagu horumarinayo xoolaha kuna aaddan muddada fog.

Dhan kale waxaa laga ma maarmaan ah in la tacaalo wax kastana loo quuro tayeynta iyo caafimaadka xoolaha si loo ilaaliyo sumcadda ganacsii ee uu dalkeenu ku leeyahay seyladaha adduunka.

Waa arrin jirta in dadaal badan loo baahan yahay si loo xaqijiyo loona fuliyo barnaamij xambaarsan ujeeddooyinka laga leeyahay xanaanada iyo tayeynta wax-soo-saarka xoolaha.

Waxaa la qirsan yahay in saan-qaad la bilaabay hayeeshee waa in mar kasta maanka lagu hayaa in wax badani dhiman yihiin loona baahan yahay in la qaado tallaabooyin is daba-joog ah oo maalinba maalinta ka dambaysa horumar hor leh la gaaro.

Muddada 2005-2008 waxaa lagu tilmaami karaa xilligii la qaaday tallaabooyinkii ugu muhimsanaa, xilli si dhab ah loogu dhaqaaqay barnaamijyo ay bulshadeenu u aayi doonto.

Wasaaraddu waxay ka kooban tahay 2 qaybood oo kala ah:

- Agaasinka guud ee xanaanada xoolaha, iyo
- Agaasinka guud ee beeraha iyo deegaanka

Waxaa halka si urursan lagu bandhigayaa wax-qabadkii wasaaradda ee 2005-2008.

Syaasadda wasaaradda:

Si loo hormariyo hawlaha ay wasaaraddu u xil saaran tahay waxaa loo baahday in la cayimo itijaaha iyo istaraateejiyada lagu hawl gelayo. Sidaa daraaddeed waxaa la dejiyey:

- Siyaasadda xanaanada xoolaha ee Puntland
- Siyaasadda beeraha ee Puntland
- Siyaasadda ilaalinta deegaanka ee Puntland
- Diiwaanka xirfadlayaasha xanaanada iyo daaweynta xoolaha ee Puntland
- Diiwaanka xirfadlayaasha beeraha ee Puntland
- Sharciga fayadhowrka hilibka
- Xeerka daryeelka xoolaha
- Sharcigabaarista bed-qabka hilibka
- Sharcigabaarista bed-qabka beeraha (Agricultural Quarantine Inspection)

Kaabayaasha hay'adeed (Institutional infrastructures):

Wasaarddu si ay ugu suurta gasho inay barnaamijiyadeeda iyo qorshaha u degsan fuliso waxay is hordhigatay kana jiba keentay meelmarinta arrimaha la xiriira kaabayaasha hay'adeed (Institutional infrastructures) ee soo socda:

1. Dhismaha iyo qalabeynta sheybaarka Gaalkacyo
2. Diyaarinta iyo habaynta 12 barood oo caano
3. Qaybinta qalab ku habboon xafidaadda iyo fayoobida caanaha
4. Astaynta maalin la xuso caanaha iyadoo lagu lammaaniyey barnaamij wacyi-gelin oo ku saabsan tayada,nadaafada,xafidaadda iyo kordhinta wax-soo-saarka
5. Hawlgelinta iyo qalabeynta xafiis qaabilsan baarista cunnada
6. Qalabeynta xafiis yada xarunta dhexe oo wasaaradda ee caasimadda Garowe
7. Dhismaha iyo shaqo-gelinta 10 farmashiye ee daawada xoolaha lagana fuliyey gobollada Puntland
8. Tababar ku saabsan gargaarka degdegga ah ee xoolaha oo si marxaladaysan loo siiyey xoolo dhaqatada
9. Beero tijaabo ah oo lagu dhaqo xoolaha iyadoo la garab wado hawlo beero

Xiriirka wasaaradda & hay'adaha caalamiga ah:

Wasaaraddu waxay xiriir iskaashi la leedahay hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah iyo kuwa waddani ah oo ku hawlan barnaamijiyada iyo mashaariicda soo gala hawlaha wasaaradda.

Wasaaraddu waxay hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah ka heshaa taageero dhinacyo badan iyo kaalmo farsamo (Technical assistance).

Waxaa booqasho Puntland ku yimid wakiilka OIE & FAO ee Bariga Dhexe iyo Bariga Afrika iyadoo qayb ka ahayd dadaalkii dheeraa ee loo galay caddaynta in xoolaha Puntland ayan haba yaraatee qabin wax cudur ah oo dhoofintooda xayiraad ku keeni kara.

Daaweynta xoolaha:

Wasaaraddu waxay fulisey 8 ol'ole oo isugu jira:

- Daaweynta xoolaha
- Tallaalka xoolaha
- Kormeer la xiriira hargabka shimbiraha

4 ka mid ah ol'olayashaas waxaa maalgelisey dowladda Puntland, halka ay 4-ta kale gacan ka geysteen VSF Suisse, Escali iyo SAHSP.

Kooxaha wasaaradda la shaqeeya:

- Kooxaha u gurmada cudurrada xoolaha
- Guddiga ka warbixiya cudurrada degdegga ah
- Veterinary Board
- PULPA
- EPDMU



Baarista caafimaadka xoolaha dekeda Boosaaso laga dhoofiyo

#### Barnaamijka wacyi-gelinta:

Markii la fiiriyo ahmiyadda iyo baxadda ay hawlaho wasaaraddu leeyihii waxaa la garan karaa baahida weyn ee loo qabo wacyi-gelinta bulshada ee la xiriirta xanaanada, daaweynta iyo daryeelka xoolaha.

Sidaa daraaddeed waxay wasaaraddu dejisay qorshe ballaaran oo lagu fulinayo barnaamij qorshaysan kuna saabsan wacyi-gelinta.

Wasaaraddu waxay arrimaha wacyi-gelinta u adeegsataa qalabka warbaahinta, sida idaacadaha, televishannada, wargeesyada iwm.

Waxaa sidoo kale la baahiya qoraallo sida farriimo iyadoo dhan kalena la dhejiyo hal-ku-dheyo xambaarsan farriimaha mihimka ah ee xoolaha ku saabsan.

Barnaamijka wacyi-gelintu waa mid ku baahsan dhammaan degaamada Puntland.

Arrimaha sida gaarka farta loogu fiiqo wacyi-gelinta waxaa ka mid ah:

- Joojinta dhir-jaridda iyo dhuxusha
- Joojinta laynta ugaarta
- Nadaafadda kawaannada iyo suuqyada hilibka
- Maamulka daaqa
- Fayadhowrka caanaha
- Nidaamka xafidaadda daawooyinka xoolaha, iwm

#### Maxjarka Boosaaso:

Waxaa la wada ogsoon yahay in dhoofinta xoolaha nool ee Soomaaliya ay muddo dheer xayiraadi saarnayd iyadoo dalalka suuqa u ah laga diidey in si rasmi ah loogu dhoofiyo.

Arrintaasi waxay sababtay khasaaro badan oo si daran u saameeyey dhaqaalaha, ganacsiga, maciishadda iyo guud ahaan danaha xoolo dhaqatada.

Waxay noqotay in xoolaha loo dhoofifiyo si aan rasmi ahayn oo suuq madow ah, taasoo laga la kulmay khasaaro aan la qaadi karin oo si daran u curyaamisey dhaqdhaqaqii iyo ka ganacsigii xoolaha nool.

Maadaama ay dhoofinta xoolaha nooli tahay tiirka udub-dhexaadka u ah Puntland waxa laga ma maarmaan noqotay in xal loo helo dhibaataadaas muddada dheer soo jiitantey oo dhaqaalaha dalka sida weyn u curyaamisey dhaawaca culusna u geysatey.



Munaasabadda saxiixa heshiiska Maxjarka Boosaaso

Inkasta oo baaris is daba-joog ah oo xoolaha Puntland lagu sameeyey ay goor kasta natijjo fiican oo baxaysey oo ay caddaan ahayd inay fayow yihiin,haddana dowladaha dalakooda loo iib geyaa waxay joogteeyeen xayiraadda xoolaha.



Qayb ka mid ah maxjarka Boosaaso laga dhisay

Maamulka Puntland wuxuu sameeyey isku-day iyo dadaal badan oo ku aaddan sidii dhoofinta xoolaha looga qaadi lahaa xayiraadda aan garowsiimaha lahayn.



Mas'uuliin iyo takhaatiirta xoolaha oo u diyaar-garooobaya furitaanka maxjarka

Iyadoo la la kaashanayo hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah waxay dowladdu xoog saartay tayeysta xoolaha,daaweyntooda iyo xanaanadooda.

Waxaa suurta gashay in la fuliyo barnaamijyo iyo mashaariic kala duwan oo laga hirgeliyey dhammaan gobollada Puntland.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka oo si rasmi ah u furaya maxjarka dowladda ee Boosaaso.

Si kastaba ha ahaatee waxaa la ma huraan noqotay in la maro laguna dhaqaako tub kasta oo xal u noqon karta qaadista xayiraadda dhoofinta xoolaha saarnayd.

Si ay xoolaha Puntland ka dhoofayaa u noqdaan kuwa aan wax iin ah lahayn oo caafimaad-qabkooda la hubiyey waxaa laga ma maarmaan noqotay in Boosaaso laga fuliyo mashruuca maxjarka oo haatan hawlihiisi intoodi badnayd dhammaadeen.

Sida laga wda warqabo maxjarku waa goobta lagu hubiyo laguna sugo caafimaadka xoolaha isla markaana laga soo daayo xolo xaaladdoodu waafaqsan tahay shuruudda la aqoonsan yahay ee xolo dhoofinta.

Maadaama uu mashruuca maxjarku yahay mid maaliyad badan,hawlo farsamo iyo hannaan maamul oo ganacsiyeysan u baahan waxa laga ma maarmaan noqotay in la baadi goobo maalgashi ajnebi ah oo lagu kalsoonaan karo.

Waxaa heshiis la la galay shirkad wadaag ah oo laga leeyahay dalalka U.A.E iyo Suciudiga iyadoo lahaansha Puntland ee maxjarka (ownership) la sugay.



Wasiirka X.xoolaha,wasiirka warfaafinta, guddoomiyeyaaha gobolka Bari iyo degmada Boosaaso oo soo dhoweeyey ganacsato khliijka ka socota oo danaynaysa ka ganacsiga xoolaha nool ee Puntland

Xoolaha la soo mariyo maxjarka waxaa loo samaynayaa shahaado caddayn ah (certificate) la aqoonsan yahay oo ay ku suurta geleyso in xoolaha loo dhoofiyo meelihii loogu tala galay.

Waa iska caddahay in maxjarku leeyahay faa'idooyin badan oo waxtar weyn u leh dhaqaalaha,ganacsiga,maciishadda iyo nolosha xolo dhaqatada.

Hirgelinta maxjarku waxay Puntland ka dhigtay suuqa xarunta u ah ganacsiga xoolaha ee Soomaaliya.

Tababarrada hawl-wadeennada wasaaradda:

Waxaa la qabtay tababarro kor loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee hawl-wadeennada wasaaradda iyo bulshada ku hawl leh xoolaha, beeraha iyo deegaanka,sida hoos ku cad:

1. Qlimayn iyo dabagal,waxaa fulisey ECSALI, waxaa ka qayb galay 2 qof, Nairobi
2. Dhaqashada shinnida waxaa fulisey FAO, waxaa loo qabtay 75 beeraley ah, Garowe,Boocame,Qardho iyo Baran
3. Horumarinta timirta,waxaa fulisey CEFA,waxaa loo qabtay 25 beeraley ah,Boosaaso
4. Kor u qaadista tayada xirfadlayaasha beeraha,waxaa fulisey UNA-IPM,waxaa loo qabtay 30 xirfadle, Boosaaso
5. Qaabka gudbinta farriimaha xoolaha,waxaa fulisey SAHSP,waxaa ka qayb galay 30 ah shaqaalaha wasaaradda,Garowe
6. Shuruucda caalamiga ah ee ka ganacsiga xoolaha, waxaa fulisey FAO, waxaa ka qayb galay 40 qof ah bah-wadaagta xoolaha,Garowe
7. Horumarinta kawaannada,waxaa fulisey Som-meat,waxaa ka qayb galay 20 hilible,Qardho iyo Garowe
8. Horumarinta kawaannada,waxaa fulisey Som-meat,waxaa ka qayb galay 20 hilible,Gaalkacyo
9. Soo bandhigidda siyaasadda xoolaha ku wajahan,waxaa ka qayb galay 30 qof oo ah bah-wadaagta xoolaha,Garowe
10. Iskaashiga shaqaalaha gaarka ah iyo kuwa maamulka,waxaa fulisey ECSALI, waxaa ka qayb galay 30 khabiir,Garowe
11. Aqoonta sheybaarka,waxaa fulisey FAO/LAS, waxaa ka qayb galay 8 ah shaqaalaha wasaaradda,Gaalkacyo
12. Baarista caanaha,waxaa fulisey VSF Germany,waxaa ka qayb galay 2 ah shaqaalaha wasaaradda,Nairobi
13. Hubinta tayada hilibka,waxaa fulisey FAO/LAS,waxaa ka qayb galay 45 ah shaqaalaha wasaaradda,Garowe
14. Qaabka shahaado siinta xoolaha Bariga Afrika,waxaa fulisey SOLICEP,waxaa ka qayb galay 1 qof oo ka tirsan shaqaalaha wasaaradda,Adis-Ababa
15. Tirakoobka, waxaa fulisey FAO, waxaa ka qayb galay 1 qof oo ah shaqaalaha wasaaradda,Nairobi
16. Baarista xoolaha qalan,waxaa fulisey SAHSP,waxaa ka qayb galay 4 qof oo ah shaqaalaha wasaaradda,Shekh
17. Maarataynta deegaanka,waxaa fulisey CARE,waxaa ka qayb galay 30 qof oo ka kala tirsan maamulka iyo reer guuraaga,Garowe

18. Maayanta khayraadka dabiiiciga ah,waxaa fulisey VET-AID,waxaa ka qayb galay 30 ah shaqaalaha wasaaradda,Garowe
19. Dib u eegista sharciga deegaanka ee Puntland,waxaa fulisey CARE,waxaa ka qayb galay 30 qof,Garowe
20. Is barbar-dhigga sharciyada deegaanka & kuwa caalamiga ah,waxaa fulisey VET-AID, waxaa ka qayb galay 40 reer-guuraa ah,Garowe

Wasaaraddu waxay sahan ku samaysay qaabka ay u shaqeeyaan dalalka ay Puntland la leedahay xiriirka ganacsi ee dhanka xoolaha.Mas'uuliin sarsare oo ka tirsan dowladda ayaa boqasho shaqo oo sahan iyo xograadin ah ku tegey dalalka Suciudiga,Yemen,Cumaan,UAE,Djibouti iyo Kenya.

#### **WAX-QABADKA W. KALLUUMAYSIGA, D.& G.BADDA**

Warbixintaan waxaa soo diyaariyey:

1. Maxamed Axmed Nuur, agaasimaha guud ee dekedaha & G. badda.
2. C/waaxid Maxamed Xirsi, agaasimaha guud ee kalluumaysiga

Wasaaradda kalluumaysiga, ekedaha & G.baddu waxay u qaybsan tahay:

- a. Agaasinka guud ee kalluumaysiga, iyo
- b. Agaasinka guud ee dekedaha & G.badda

Qayta kalluumaysigu waxay u xil saaran tahay:

- Suurtagelinta in shacabku ka faa'ideysto khayraadka badaha iyo dejinta nidaam kalluumaysi oo waafaqsan shuruucda kalluumaysiga,ilaalinta deegaanka badaha & xeebaha iyo farsamada kalluumaysiga
- Ilaalinta xeebaha Puntland iyo ka-hortagga kalluumaysiga sharcidarrada ah
- Sugidda dakhliga maaliyadeed ee ay thay in dowladdu ka hesho kalluumaysiga iyo khayraadka kale ee badaha Puntland
- Dhiirri-gelinta sare u qaadista aqoonta xirfadeed ee kalluumaysatada si loo tayeeyo loona kordhiyo wax-soo-saarka
- Dhiirri-gelinta maal-gashiga waddaniga ah iyo kan ajnebiga kuna saabsan kalluumaysiga iyo horumarinta xeebaha Puntland
- Xoojinta,tayeynta iyo ballaarinta ganacsiga la xiriira kalluunka iyo khayraadka kale ee badaha
- Ka-hawlgalka diyaarinta daraasado iyo barnaamijyo cilmi-baaris ah kuna saabsan badaha Puntland
- Abuuridda dugsiyo farsamo lana xiriira xirfadaha kalluumaysiga
- La-shaqaynta ururrada caalamiga iyo kuwa goboleed kuna saabsan kalluumaysiga iyo hawlaha badaha si ka jawaabeysa danaha Puntland

Warbixin kooban oo ku saabsan xeebaha Puntland:

D/goboleedka Puntland waxay leedahay xeebta ugu dheer uguna hodansan markii loo fiiryo Soomaaliya inteeda kale.

Xeebta Puntland waxay ku taxan tahay oo ay u dhexysaa Laasa Surad oo gacanka Cadmeed ah iyo Garacad oo badweynota India saaran,wuxuuna dhererkeedu dhan yahay 1,600 km oo qiyaastii u dhiganta 50 % dhererka badaha Soomaaliya ee dhan 3,300 km.

Bulsho aad u ballaaran oo ku dhaqan degaamada xeebaha ayaa noloshoodu ku tiirsan tahay kalluumaysiga iyo khayraadka kale ee badda.

Xeebaha Puntland ma laha tas-hiilaadkii kalluumaysiga looga baahnaa,sida qaboojiyeaasha kaydinta wax-soo-saarka,jidad,hoosooyin qalabka iyo gaadiidka kalluumaysiga lagu dayactiro iyo sidoo kale suuqyadii kalluunka loo iib geyn lahaa.

Sahan ay wasaaraddu samaysay waxaa ka soo if baxay in kalluumaysatada Puntland ay dhan yihiin 22,610 oo isugu jira kuwa joogto ah iyo qayb ah kalluumaysato-xilliyeed waana sidatan:

Degmada	Joogto	Xilliyeed	Wadar
L/qoray	1,254	840	2,094
Boosaaso	408	605	1,013
Qandala	402	267	669
Caluula	2,844	1,679	4,523
Baargaal	1,151	766	1,917
Xaafuun	1,835	1,220	3,055
Bayla	1,707	1,137	2,844
Eyl	2,628	1,800	4,428
Garacad	1,337	730	2,067
Wadar,		13,566	9,044
			22,610

Halkaas waxaa laga garan karaa sida uu ka-faai'deysiga kalluumaysigu u hooseeyo markii loo fiiryo oo la garab dhigo mugga khayraadka badan ee uu Eebbe Puntland ku mannaystay.

Dhan kale waxaa badaha Puntland laga wadaa kalluumaysi sharci-darro ah oo ka sokow boobka khayraadka ay haddana weheliso in si daran badda loo xaafulinayo.

Haddaba si wax looga qabto dhibaatooyinka xeebaha Puntland ka jira,sarena loogu qaado tayada was-soo-saarka iyo nolosha kalluumaysatada reer Puntland waxaa la abuuray wasaaradda kalluumaysiga,dekedaha & gaadiidka badda.

Qaybta dekedaha & G.baddu waxay u xil saaran tahay:

- Ilaalinta,dayactirkha,horumarinta iyo maaraynta hawlaha dekedda
- Socodsiiinta hawl-maalmeedka dekedda
- U fududaynta ganacsatada adeegyada la xiriira dhoofinta iyo soo-dejinta badeecadaha
- Tababaridda shaqaalaha iyo hawl-wadeennada si ay u hantaa fulinta hawlaha kala geddisan ee ay u xil saaran yihiin
- Sugidda,xiriirinta iyo xoojinta wada-shaqaynta hay'adaha dekedda ku shaqada leh
- Nidaaminta gaadiidka badda ee dekedda adeegsada
- Sare u qaadista iyo tayeynta hannaanka maamul iyo maaraynta hawlaha dekedda
- Sare u qaadista kaabayaasha dekedda si loo helo adeeg tayeysan oo dhammaystiran
- Hirgelinta barnaamij ku aaddan dekedo yaryar oo Puntland laga hirgeliyo
- Ururinta iyo kaydinta tirakoobka la xiriira hawlaha dekedda

Warbixin kooban oo dekeda Boosaaso ku saabsan:  
Marxaladda 1aad ee dekeda Boosaaso waxaa la dhammaystiray 1990-kii  
iyadoo lagu dhisay maalgelin ay dowladda Talyaanigu ku deeqday ee  
mashruucii (FAI).

Burburkii dowladda dhexe iyo dagaalladii Soomaaliya ka dillaacay waxay  
carqaladeeyeen fulinta marxaladihii qorshaysnaa ee dekeda lagu  
dhammaystiri lahaa.

Qiyaastii waxaa dekeda bishiiba ku soo xirta 6-7 maraakiib ah iyo 60-90  
doonyo ah.

Dekeda Boosaaso waa wadnaha dhaqaalahi iyo horumarka  
Puntland, waana isha ugu weyn ee ay miisaaniyadda dowladdu ku tiirsan  
tahay.

Dekeddu dowl aan la la mid ahayn ayey kaga jirtaa kobcinta dhaqaalahi iyo  
xoojinta awoodda ganaci ee Puntland.

Wax-qabadka qaybta kalluumaysiga:

- Waxaa la dhisay oo la tababaray ciidanka ilaalinta xeebaha  
kaasoo loo dhammaystiray qalabkiil ciidan ee ay ku hawl gel  
lahaayeen.
- Waxaa la abuuray raxan maraakiib ah oo loogu tala galay la-  
dagaallanka kalluumaysiga sharci-darrada ah.
- Waxaa la dhisay baro ilaalin iyo raadaarro suurta gelinaya in la la  
socdo dhadhaqaqa badda ka jira.
- Waxaa la asteeyey bar internet ah oo ay ku kaydsan yihiin  
dhammaan macluumaadka loo baahan yahay sida:
  - a. Shuruucda kalluumaysiga
  - b. Xeerka iyo sharciga dekeda Boosaaso
  - c. Siyaasadda iyo istaraateejiyadda wasaaradda  
kalluumaysiga, dekedaha & G.badda



Doonyo & qalab kalluumaysi oo la guddoonsiinayo dadkii Tsunami ku hanti beeelay

### Bad-giriirkii Tsunami:

Bad-giriirkii Tsunami ee xeebaha Puntland ku dhuftay wuxuu sababay khasaaro ballaaran oo nool iyo moodba leh si daranna kalluumaysatada iyo bulshada xeebaha ku nool u saameeyey.



Burburkii bad-giriirkii Tsunami uu geystey

Tirakoobka qoysaska kalluumaysatada ee ay Tsunami waxyeoleysay:

Degmada	Tirada qoysaska	Tirada dadka
Xaafuun	1,290	7,740
Bayla	1,800	10,800
Baargaal	9,010	5,460
Caluula	120	720
Dangorayo	440	2,640
Eyl	1,950	11,700
Jarriiban	1,910	11,460
L/qoray	800	4,800
Wadar	9,220	55,320



Dadkii Tsunami ku tabaaloobey oo loo gurmanayo

Wasaaraddu waxay ka hawl gashay sidii loogu gurman lahaa dadka waxyeeloobey hantiduna ay dhaaftay.

Barnaamjika gurmadku wuxuu ka koobnaa 2 marxaladood oo kala ah:

- Heerka quudinta
- Heerka soo-kabashada

Tirakoobka qalabka kalluumaysatada loo qaybiyey:

Qalab	Tiro
Shabaag kalluun	8,000
Shabaag libaax	16,900
Shabaag aragoosto	5,000
Xargo	115,600
Ookiyaale	5,000
Kabo	5,000
Jiibo	23,000
Baroosin	3,400



Qalab loo qaybiyey kalluumaysatadii ay hantidu ku dhaftay Tsunami

Tirakoobka doonyaha kalluumaysatada loo qaybiyey:

Degmada	D. waaweyn	D. yaryar	Hay'adda bixisay
Baargaal	8	15	M.Aid
Xaafuun	16	52	Care,M.Aid
Bayla	16	31	UNA,M.Aid
Dangorayo	3	14	Adra,M.Aid
Eyl	10	32	Adra.Action A
Garacad	20	20	Adra,Action A

Wadar,

73

164



Doonyo loogu deeqay kalluumaysatadii Tsunami ku tabaalooobey

Si sare loogu qaado nolosha kalluumaysatada loona suurta geliyo in wax-soo-saarka kalluumaysatada suuqyada gudaha la soo gaarsiyo, waxaa degaamada ay Tsunami waxyelaysay laga dhisay qaboojiyeyaal iyo baraf-dhaliyeyaal.

Barnaamijkaan qayb weyn ayaa laga fuliyey iyadoo ay qorshaysan tahay in la sii wado.

Ururrada kalluumaysatada:

Dowladdu waxay deeq-bixiyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah ugu baaqday in mashaariicda loo qabanayo dadkii ay Tsunami waxyelaysay ay noqdaan kuwa muuqda, waxtar ah isla markaana jiritaan waara leh.

Si arrintaan loo meelmariyo waxaa la abaabulay kalluumaysatada si ay u samaystaan ururro kalluumaysi iyo guddiyo hoggaamiya iyadoo loo habeeeyey xeerar iyo nidaam ay isku maamulaan, dhan kalena laga hawl galay in wasaaradda iyo kalluumaysatadu isku xirmaan.

Waxaa la abuuray ururrada kalluumaysi ee soo socda:

- Ururka kalluumaysatada degmada Boosaaso
- Ururka kalluumaysatada degmada Baargaal
- Ururka kalluumaysatada degmada Xaafuun
- Ururka kalluumaysatada degmada Bayla
- Ururka kalluumaysatada degmada Jarriiban

Si ay ururradaasi u taabba galaan waxaa gacan siiya wasaaradda, hay'adda Hadma iyo maamulada gobollada & degmooyinka.

Kalluumaysatada waxaa loo qabtay 36 tababar oo ku saabsan:

- Maamulka & xisaabaadka
- Farsamada kalluumaysiga
- Habka taxan ee diyaarinta kalluunka
- Ilaalinta deegaanka
- Ilaalinta xaalufka noolaha
- Dayactirka doonyaha, matoorrada iyo qalabka kalluumaysiga.

Wax-qabadka qaybta dekedaha & G.badda:

Xoolaha dekedda laga dhoofiyey 2005-Oct.2008 (Neef):

Sanadka	Geel	Lo'	Ari
2005	26,109	91,910	1,594,859
2006	33,720	104,595	1,777,283
2007	27,744	95,896	1,524,095
Ilaa Oc.2008	26,171	65,551	605,213

Wadar,	113,744	357,952	5,501,450
--------	---------	---------	-----------

Gaadiidka badda ee dekedda ku soo xirtay 2005-Oct.2008:

Sanadka	Maraakilb	Doonyo
2005	85	654
2006	102	804
2007	97	926
Ilaa Oct.2008	90	700
Bisha Novenber 2008	10	130

Wadar,	384	3,214
--------	-----	-------

Badeecadaha dekedda laga soo dejiyey 2005-Oct.2008:

Badeecadda (T)	2005	2006	2007	Ilaa Oct.2008
Sonkor	54,701	56,598	80,440	122,500
Bariid	53,946	53,566	58,377	34,817
Bur	33,909	39,124	43,163	46,221
Sibir	72,513	82,885	91,089	68,285
Badeecado kala duwan	8,817	943	3,087	5,291
Qalab dhismo	18,019	11,648	10,723	11,984
Shidaal	34,353	40,378	52,919	42,491
Bagaash & gaadiid	79,208	60,970	69,864	63,863



Dhaqdhaqaqa wax soo dejinta dekedda Boosaaso

F.G, Badeecadaha dekeda laga soo dejiyey Novenber 2008:

Sonkor	6104 Tan
Bariis	4215 =
Bur	2872 =
Sibir	5000 =
Badeecado kala duwan	4046 =
Shiidaal	4480=
Qalabka dhismaha	1121 =
Bagaash iyi Gaadiid	9098 =

Xoolaha iyo badeecadaha dekeda laga dhoofiyey November 2008:

Geel	1330 Neef
Lo'	3355 =
Ari	515,410 =
Harag	3,690 BND
Shark	12 Tan
Faleen	79 Tan



Markab xoolo sida oo laga raray dekeda Boosaaso

Dakhliga dekeda ka soo xerooday 2005-Oct.2008:

Sanadka	Dakhliga
2005	1,017,281\$
2006	1,272,842\$
2007	1,446,539\$
2008 (Jan-Oct)	1,335,229\$

Wadar, 5,071,891\$

Shidaalka uu maamulka dekedu siiyey hay'adda Psawen (fuusto):

	2005	2006	2007	2008
Bisha				
January	201.50	146	230	326
February	106	242	203	253
March	222	271	178	275
April	181	228	233	236
May	173.50	231	272	199
June	194	207	226	213
July	148	183	235	156
August	285	216	209	208
September	237	250	305	272
October	259	282	318	186
November	231	175	410.50	472
December	346	300	338	-----
Wadar,	2,584	2,731	3,157.50	2,796

Mashruuca horumarinta dekeda Boosaaso:

Ahmiyadda dekeda Boosaaso iyo kaalinta ay horumarka Puntland kaga jirto ma aha arrin halka lagu soo koobi karo, waxayse ku jirtaa in la xuso arrimaha soo socda:

1. Kobcinta dhaqaalaha guud ee Puntland
2. Sugidda maaliyadda lagu socodsiiyo hawlaha dowladda
3. Ballaarinta ganacsiga iyadoo ka sokow geyiga Puntland u adeegta gobollada dhewe, koofureed iyo waqooyi ee Soomaaliya iyo dalalka deriska ah
4. Sare u qaadista heerka maciishadeed ee dadweynaha
5. Dhoofinta xoolaha nool iyo badeecadaha kale ee dalka
6. Gacansiinta gaadiidka badda ee dekeda adeegsada
7. Soo-dejinta badeecadaha kala duwan

Waxaa kaloo la xusi karaa in kumanyaal dad ahi ay nolol maalmeedkoodu ku tiirsan yahay dekeda Boosaaso.

Mar haddii ay dekeddu sidaas u tahay kaabe ahmiyad ballaaran oo macne iyo waxtar weyn ugu fadhiya reer Puntland iyo guud ahaanba Soomaaliya waxaa laga ma maarmaan ah in laga hawlgalo sidii dekeda loo horumarin lahaa.

Maadaama mashruucii asalka ahaa ee dekeddu qabyo yahay oo inta la fuliyey ay ku aaddan tahay oo keliya marxaladii 1aad, waxaa loo baahan yahay:

1. In la ballaariyo dekeda si kor loogu qaado awooddeeda lana gaarsiyo heer ay dabooli karto baahida muddada dhewe iyo muddada fog
2. In loo dhammaystiro kaabayaasha laga ma maarmaanka u ah habsami u socodsiiinta adeegyada dekeda
3. In la casriyeeyo maaraynta dekeda
4. In la sugo helitaanka qorshe nidaamsan oo ku saabsan dayactirka joogtada ah iyo kan marxaladaysan (Routine & periodic maintenance)

Si himiladaas loo gaaro waxaa laga ma maarmaan noqotay in la helo maalgelin iyo shirkado ku takhasusay horumarinta iyo maaraynta kaabayaasha ay dekeddu ka midka tahay isla markaana leh awood dhaqaale iyo mid xirfadeed.

Dhan kale siyaasadda horumarineed ee Puntland waxay dhiirrigelineysaa in la kasbo lana soo jiito maal-gashiga waddaniga ah iyo kan ajebiga ah si waafaqsan shuruucda iyo danaha Puntland iyadoo la abuurayo jawi maal-gashi oo lagu kalsoonaan karo.

Dowladdu waxay heshiis ku saabsan maalgelinta iyo horumarinta dekeda Boosaaso la gashay shirkadda Lootah Investment Group ee laga leeyahay dalka UAE (United Arab Emirates).

Dowladda iyo shirkadda Lootah Investment Group waxay ku heshiyeen in la dhiso shirkad wadaag ah oo loogu magac-daray Bosaso Sea-port Company.

Heshiiska oo la kala saxiixday Oct.28,2008 wuxuu waafaqsan yahay sharciga maalgashiga Puntland wuxuuna si buuxda uga jawaabayaa himilada laga leeyahay horumarinta iyo casriyeeynta adeegyada dekeda Boosaaso.

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey Faarax Cabdi Xuseen oo uu u xil saaray Xasan Cusmaan Maxamuud, wasiirka tamarta iyo macdantu.

Sida la wada ogsoon yahay Puntland waa geyi hodan ah oo uu Eebbe ku mannaystay khayraad dabiici ah oo aad u mug weyn.

Puntland wuxuu Eebbe u sakhiray degaan ballaaran oo ay bad iyo berriba khayraad aad u badani ku jiraan.

Muddo aad u fog oo xilligii gumeysiga ku aaddan waxaa la hadal hayey in shidaal iyo macaadini Soomaaliya ka buuxdo iyadoo aan si dhab ah oo uu rabitaan ku dhan yahay loogu qalab qaadan.

Waa la garan karaa in shidaalku yahay badeecad istareeteejiyadeed, sidaa daraaddeedna ay soo saaristiisu ku xiran tahay arrimo siyaasadeed iyo qorshaha dalalka ay danahoodu sida weyn shidaalka ugu tiirsan yihiin.

Dhan kale waxaa maalinba maalinta ka dambaysa sii kordheysa baaihda ay dalalka adduunku u qabaan shidaalka oo ah aaladda nolosha iyo horumarka.

In tamartu tahay waxa ugu muhimsan ee ay dalalka horumaray iyo kuwa soo korayaaba indhaha ku hayaan iyo saamayska ay heerka maciishadda, wax soo-saarka iyo awoodda wax-iibsashada ku leedahay waxaa caddaynaya sida ay dowladuhu u danaynayaan.

Isbeddel kooban (koror iyo hoos-u dhac) oo shidaalka ku dhacaa wuxuu si toos ah khalkhal iyo xasloon-darro ugu ridaa suuqyada waaweyn iyo hay'adaha maaliyadeed ee adduunka.

Markii Puntland si gaar ah looga hadlo waxay ku jirtaa oo gar iyo dowba loo arkaa in la isweydiyo maxay soo-saarista shidaalku Puntland u tahay ?, shidaalkuse ma istaahilaa dadaalka, kharajka, waqtiga iyo abaabulka maamulka Puntland ka galay ?

Waxaan shaki ku jirin in soo-saarista shidaalku ay isbeddel weyn ku rideyso nolosha shacabka Puntland, horumarinta dhinacyada dhaqaalah, bulshada iyo kaabayaasha iyadoo isla markaana ay faa'idadaasi gaareyso Soomaali oo idil.

Inkasta oo aan si kooban loo xaddidi karin waxa mashruuca shidaalka laga maalayo iyo kaalinta uu ka gelayo horumarka Puntland waxaa farta lagu fiiqi karaa arrimaha soo socda:

- Waxaa sare u kacaya heerka maciishadda dadweynaha iyadoo 75 % uu dakhli-maalmeedka qofku ka yar yahay 1 \$.
- Waxaa horumar laga gaarayaa waxbarashada iyadoo la ogsoon yahay:
  1. Waxaa isbeddel ku dhacayaa xaqiqa ah in carruurta da' dugsiyedka gaartey 23.40 % oo keliya ay ka helaan waxbarashada dugsiga hoose.
  2. Waxaa suurta geleysa in wax laga beddelo xaaladda ah in carruurta da'doodo u dhexayso 7-14 oo 2003di tiradooda lagu qiyaasay 465,000 ay 35,000 oo keliyihi ka helaan waxbarashada dugsiga sare

3. Waxaa sidoo kale suurta gal noqonaysa in ardada dhammaysata waxbarashada dugsiga sare ay helaan fursad ay ugu gudbaan waxbarashada heerka jaamacadeed.
- Waxaa la fulin karayaa barnaamijyo lagu horumarinayo kaabayaasha gaadiidka sida, jihadka, garoomada dayaaradaha iyo dekedaha.
  - Awood dhaqaale iyo maaliyadeed oo la helaa waxay saleysaa in la horumariyo adeegyada caafimaadka oo sida la ogsoon yahay haatan ciriiri ah oo badanaa magaaloooyinka ku kooban, iyadoo ay laga ma maarmaan tahay in sare loo qaado awoodda iyo tayada isbitaallada iyo xarumaha caafimaadka hadda jira laguna fidiyo miyiga iyo degaamada fogfog.
  - Waxaa awood loo helayaa in la fuliyo mashaariic lagu horumarinayo adeegyada la xiriira biyaha (miyiga iyo magaaloooyinka) iyo sidoo kale korontada, adeegyadaas oo sida la ogsoon yahay mudnaan u leh nolosha iyo horumarka bulshada.
  - Waxaa abuurmaya goobo iyo fursado shaqo oo xal iyo daawo u noqda shaqo la'aanta iyo saboolnimada.
  - Waxaa si weyn u kobcaya dhaqaalahaa.
  - Waxaa la ballarinayaa ganacsiga
  - Waxaa la horumarinayaa magaaleynta iyo guryo-dhisika
  - Waxaa abuurmaya shirkado waddani ah oo yeesha awood maal-gelineed.
  - Waxaa sare u kacaya tayada iyo awoodda wax soo-saar ee xoolaha, kallunka faleenka iwm.

Haddaba markii la qiimeeyo, fiirana loo yeesho arrimaha kor lagu soo xusay waxaa muuqanaysa sida loogu baahan yahay in dadaal loo galoo wax badanna loo huro baarista iyo soo-saarista shidaalka.

Dowladdu iyadoo maanka ku haysa arrimaha la soo tilmaamay waxay curisay fikrad ku jeedda baadi-goobka awood dhaqaale oo si baahsan isbeddel ugu ridda xaaladda nololeed ee bulshada iyo guud ahaan fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta.


Meelaha ugu muhimsan ee loo arkay in xaaladda dambaynta iyo saboolnimada looga bixi karo, ka sokow khayraadka kale waa shidaalka iyo macdanta.

Si fikraddaan loo meelmariyo loona xaqiijiyo ujeeddooyinka laga leeyahay waxaa la dhisay wakaaladda tamarta iyo macdanta oo mar dambe la gaarsiiyey heer wasaaradeed.

Waxaa laga wada warqabaa in iskudayga Puntland ee ku wajahan baarista iyo soo-saarista shidaalka iyo macdanta ay la soo gudboonaadeen dhibaatooyin badan iyadoo ay jiraan kooxo iyo ururro diiddan oo gensanaya tallaabada ay Puntland qaadday iyo tubta horumarineed ee ay u saan-qaadday.

Si kastaba ha ahaatee dowladda iyo shacabka Puntland si wadajir ah ayey ugu dhiirradeen fulinta barnaamijkaan ballaaran waana ku guuleysteen.

January 2007 dowladda Puntland iyo Canmex- Renge resources waxay Dubai (UAE) ku kala saxiideen heshiis ku saabsan wadaagga wax soosaarka (production shering agreement).



Heshiiska baarista shidaalka oo Dubai lagu saxiixay

Heshiiskani wuxuu ku aaddan yahay in 4 ceel oo tijaabo ah laga qodo Nugal Valley iyo Dharor Valley.

February 2008, waxaa hawl-wadeennada wasaaradda tababar loogu diray Perth, Australia taasoo ahayd deeq ay shirkado bixiyeen iyadoo ay isku dubbariddey wasaaradda khayraadka ee Western Australia.

Tababarkani wuxuu ahaa mid caalami ah oo lagu baranayey habka casriga ah ee loo maamulo khayraadka.

March 2008 waxaa la soo bandhigay sharciga lagu maamulayo khayraadka Puntland, kaas oo la mariyey golaha wasiirrada oggolaanshana looga helay golaha wakiilada.

Sharcigaan waxaa ku qeexan:

- Dhulka uu sharcigu khuseeyo
- Lahaanshaha khayraadka
- Maamulidda iyo maarataynta khayraadka
- Hawlgallada khayraadka
- Shariyada hawlgallada
- Mabaad'ida ku dhaqanka caddaaladda
- Iskaashiga hay'adaha federaalka

Waxaa kaloo ku cad:

- Dejinta istaraateejiyadda siyaasadeed
- Qaybsashada dakhliga
- Dib u dhiska
- Wada-shaqayn xaddidan
- Kala qoqobidda dhulka
- Qaabka arjiyada
- Royalitiga
- Hawlgallada
- Ilaalinta deegaanka

May 2008 waxaa bilowday hawlgalkii lagu baarayey baaxad dhan 2,600 sq km oo ah Dhoroor. Hawshaan waxaa wadda shirkadda AOC/IMC, iyadoo ilaa iyo hadda la dhammaystiray 782 sq. km.



Mid ka mid ah qalabka ay shirkadda baarista shidaalku keensatay

Xogta ilaa iyo hadda la helay waxay muujisay in shidaal aad u mug weyni ku jiro Dhoroor (Valley).

Dhanka Nugaal Valley baaristii ay hore shirkadihii u sameeyeen ayaa xog buuxda laga helay.



Hawlgalka Baarista Macdanta

Xogtaas markii dib loo fiirihey waxaa la caddeeyey in shidaal aad u mug weyni uu Nugal Valley ku jiro, iyadoo qodis mooyee aan baaris dambe loo baahnayn.

Xogta laga helay Dharoor Valley iyo Nugal Valley awgood waxaa January 2009 la keenaya riig.

Muddada yar ee ay baaristu socoto waxaa bulshada Puntland shirkadda ka soo gala ugu yaraan USD. 500,000 \$ bishii kuna saabsan kirooyin, mushaaraad iyo adeegyo kale.

Laga bilaabo January 2009 markii riigga la keeno wuxuu kharajkaasi gaarayaa qiyaastii USD. 1,000,000 \$.

Dhan kale waxaa marxaladdaan baarista barnaamijkaan laga shaqaaleeyey 450 qof, iyadoo xilliga soo aaddan ay kumanyaal ka shaqaaloobi doonaan.

Shaqaalahi hadda shirkadda la shaqeeya waxaa la siiyey tababar la xiriira xirfado kala duwan.

## WAX-QABADKA W. SHAQADA, DH. & ISBOORTIGA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey C/nuur Cilmi Maxamuud, wasiirka shaqada.

Wasaaradda shaqada,shaqaalaha,dhalinyarada & isboortigu waxay ka kooban tahay qaybaha kala ah:

- Agaasinka guud ee shaqada & shaqaalaha
- Agaasinka guud ee dhalinyarada & isboortiga

Waxaa si urursan loo soo bandhigayaa hawlihii ay wasaaraddu qabatay muddada 2005-2008.

### A. Agaasinka dhalinyarada & isboortiga:

#### a. Waaxda isboortiga:

1. Waxaa sanadkii 2005 magaalo madaxda gobolka Sanaag ee Baran laga dhisay garoonka kubbadda kolayga.
2. Magaalo madaxda gobolka Sool ee L/caanood waxaa sanadkii 2005 la dayactiray garoonka kubbadda kolayga
3. Sanadkii 2006 waxaa la dayactiray oo la qalabeeyey garoonka kubbadda cagta ee caasimadda Puntland ee Garowe.
4. Dhammaan kooxaha isboortiga ee gobollada Puntland waxay wasaaraddu sanadihii 2006 & 2007 u qaybisay qalab isboorti oo dhammaystiran.
5. Sanadkii 2006 waxaa la qabtay cayaaro goboleed oo lagu kala qabtay Bari iyo Mudug ka dib markii ay duruufu dhaqaale awgeed suurtagal noqon weydey in hal meel la isugu keeno.
6. Sanadihii 2005-2007 waxaa la qabtay tababarro kor loogu qaadayo aqoonta madaxda isboortiga ee gobollada iyo degmooyinka.
7. Sanadka 2007 waxaa la dayactiray garoonka kubbadda cagta ee Gaalkacyo,magaalo madaxda gobolka Mudug.
8. Waxaa la qalabeeyey dhammaan xafiisyada isboortiga ee gobollada.
9. Iyadoo la la kaashanayo ururrada waddaniga waxaa bisha barakaysan ee Ramadaan caasimadda Garowe lagu qabtaa cayaaro ay gobolladu ka qayb galaan.

#### b. Waaxda dhalinyarada:

1. Sanadkii 2005 waxaa dhammaan gobollada Puntland loo dhisay dallado dhalinyaro oo heer gobollo ah.
2. Sanadaha 2006 iyo 2007 dhammaan xafiisyada dhalinyarada ee gobollada waxaa loo qaybiyey alaab xafiis (stationeries).
3. Sanadaha 2005,2006,2007,2008 waxaa ururrada dhalinyarada mid kasta 2 jeer loo fuliyey barnaamij wacyigelin ah.
4. Waxaa caasimadda Puntland ee Garowe laga bilaabay dhismaha xarunta dhalinyarada Puntland.

## B. Agaasinka shaqada & shaqaalaha:

1. Waxaa la diyaariyey sharciga shaqaalaha (law No.5) oo laba jeer la daabacay sanadhihi 2006 iyo 2007 loona qaybiyey dhammaan wasaaradaha,hay'adaha dowladda iyo ururradaba.
2. Waxaa la dhammadystiray turjumaaddii sharciga (law No.65).
3. Sanadaha 2005,2006,2007 iyo 2008 waxaa la kormeeray shaqada wasaaradaha iyo gobollada.
4. Waxaa heshiis ku saabsan dhismo xafiisyo cusub la la galay hay'adda shaqada adduunka (International Labour Organization-ILO).
5. Waxaa la nidaamiyey galalka shaqaalaha dowladda.
6. Waxaa sanadka 2007 la qalabeeeyey xafiisyyada xarunta wasaaradda iyo laamaheeda gobollada.

## WAX-QABADKA WASAARADDA WAXBARASHADA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey Cabdi Maxamuud Maxamed, wasiir ku xigeenka waxbarashada.

Sida la ogsoon yahay waxbarashadu waa tiirkha horumarinta bulshada, maxaa yeelay dalna horumar ma gaari karo haddii ayan cudud aqooneed jirin.

Sidaa darteed waxbarashadu waxay meel weyn kaga jirtaa siyaasadda dowladda iyo barnaamijka horumarinta ee degsan.

Muddada 4-ta sano ee 2005-2008 waxay xoogga la saaray kor u qaadista tayada waxbarashada iyo tirada ubadka gala waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe iyo kuwa dugsiyada sareba gala.

Si ay arrintaasi u suurta gasho waxaa la ma huraan noqotay in tixgelin gaar ah la siiyo waaxaha waxbarashada xarunta dhexe ee u adeegga horumarinta waxbarashada asaasiga ah iyo tan sareba.

Si haddaba ujeeddadaas loo fuliyo waxaa muhim noqotay in la helo hannaan waxbarasho oo toosan,waxaana:

- La dejiyey siyaasadda waxbarashada ee GPL
- La dejiyey siyaasadda barayaasha ee GPL
- La dejiyey siyaasadda dugsiyada gaarka ah ee GPL
- La dhisay xafiiska manaahijita
- La dhisay xafiiska imtixaanaadka
- La dhisay xafiiska waaxda tababarka macallimiinta
- La dhisay xafiiska waaxda dugsiyada sare
- La dhisay xafiiska qorshaynta iyo tira-koobka
- La dhisay xafiiska agaasinka waxbarashada haweenka
- La hawlgeliyey machadka tababarka macallimiinta dugsiyada hoose
- La dhisay bakhaar agabka wasaaradda lagu kaydiyo

## Siyaasadda waxbarashada:

Wasaaraddu waxay ku tallaabsatay diyaarinta siyaasadda guud ee waxbarashada GPL oo laga ansixiyey golaha xukuumadda iyo golaha wakiilada.

Siyaasadda waxbarashada waxaa saldhig looga dhigay mabaadi'da dimoqraadiyadda ee jideeyey in waxbarashadu ka mid tahay xuquuqda qofka beni'adanka ah loona siman yahay iyadoo ay tahay in la gaarsiiyo dhammaan xubnaha u baahan ee bulshada.

Siyaasadda waxbarashada GPL waxay si weyn u tixgelineysaa carruurta, haweenka iyo bulshada laga tirada badan yahay.

Siyaasadda waxbarashada waxaa laga dheehdaa hadafka guud iyo ujeeddada ay waxbarashadu ku jeeddo.

Waxaa kaloo siyaasadda ka muuqda noocyada waxbarashada sida,waxbarashada tooska ah, waxbarashada dadban iyo barashada xirfadaha.

Sidaa darteed siyaasadda waxbarashada dalka ayaa lagu saleeyaa manaahijja iyo barnaamijyada waxbarashada.

Dhan kale siyaasadda waxbarashadu waa aalad muhim ah oo loo adeegsado horumarinta waxbarashada.

## Siyaasadda barayaasha:

Wasaaraddu waxay diyaarisay siyaasadda barayaasha oo ku salaysan kana jawaabeysa siyaasadda guud ee waxbarashada GPL.

Siyaasadda baruhu waa aalad lagu jaangooyo ujeeddada baridda iyo barashada macallinka, heerka tababaraha ka qayb gelaya macallinnimada, iyo heerka aqooneed ee manhajka ku aaddan.

Siyaasadda baruhu waxay kaloo tilmaamaysaa shuruudaha laga ma maarmaanka u ah hirgelinta machadyada tababaridda barayaasha.

Wasaaraddu waxay tababarka macallimiinta u magacowday waax u gaar ah iyadoo isla markaana loo dhisay xarun dhewe oo ah xafiis loogu tala galay fulinta hawlaha tababarka macallimiinta.



Xafiiska waaxda tababarka macallimiinta

Siyaasadda dugsiyada gaarka ah:

Waxaa la diyaariyey siyaasadda waxbarashada ee dugsiyada gaarka ah kuna salaysan siyaasadda guud ee waxbarashada GPL.

Arrintaan waxaa looga gol leeyahay in lagu mideeyo manaahijta waxbarashada dalka lagana gudbo manaahijta kala duwan ee dibadda laga soo qaato, taasoo aan waafaqsanayn caadaadka, dhaqanka, juqraafiga iyo arrimaha dalka gaarka u ah ee barashadooda loo baahan yahay. Macnuhu waa in ardayga dalkiisa la baro.

Manaahijta:

Wasaaraddu waxay ku tallaabsatay dib u cusboonaysiinta manhajka dugsiyada asaasiga ah 1-8, manhajkaas waxaa la diyaariyey sanadkii 1997 oo ay hadda 11 sanadood ka soo wareegtey.

Sidaa daraaddeed waxaa laga ma maarmaan noqotay in manhajka lagu saleeyo xaaladaha horumarka bulshada, dhaqanka iyo dhaqaalaha dalka.

Manhajkaan wuxuu marayaa heer gabogabo ah.



Xafiiska waaxda manaahijta

Barnaamijka gaarsilinta:

Waxaa fursad waxbarasho loo abaabulay ubadka ku jira da'da 9-14 sano oo aan hore u helin nasiib ay kaga qayb galaan waxbarashada xilligii ku habboonaa oo da'dooda ku aaddanaa kuwaas oo aan hadda da'da dugsiyada hoose la fariisan karin.

Barnaamijkaan waxaa loogu tala galay in da'daas lagu gaarsiyo muddo gaaban jeylkooda ee hore waxbarashada uga faa'ideystey.

Ilaa iyo hadda waxaa barnaamijkaan ka faa'ideystey 3,500 arday oo dib u dhacsanaa.

Waxaa la diyaariyey barnaamij 3 bilood ku muddeysan oo loogu tala galay ardada wax ka barta barnaamijka gaarsilinta.

Kordhintaa tirada ardada dugsiyada asaasiga ah:

Si tiro badan oo ka mid ah ubadka da'ada dugsiyada gaarey ay u helaan fursad waxbarasho waxaa dugsiyadii hore u jirey lagu kordhiyey 40 dugsi oo cusub, waxaa la dayactiray 40 dugsi iyadoo 60 dugsi oo kalena la ballaariyey.

Sanadka	Tirada dugsiyada asaasiga	Tirada ardada
2005	236	63,347
2006	442	84,198
2007	474	106,049
2008	524	133,480

Kor u qaadista tayada ardada dugsiyada asaasiga ah:

Waxaa la shaqaaleeyey oo tirada macallimiinta sanad-dugsiyedkii 2005/2006 lagu kordhiyey, miisaaniyadda dowladdana ku jira 400 bare oo cusub.

Waxaa la shaqo geliyey machadka soo saara barayaasha dugsiyada hoose/dhexe kuwaas oo ku takhasusa maaddooyinka kala duwan ee dugsiyada laga dhigo isla markaana la baro hababka gudbinta casharrada. Ilaa iyo hadda waxaa machadkaas ka qalin jebiyey 40 bare.

Waxaa intaas weheliya 1,700 oo isugu jira barayaasha tuuloooyinka iyo magaaloooyinka oo dhammaystay 2 sano oo shaqo ku tababarid ah.

Barnaamijka dugsiyada Qur'aanka:

Barnaamijkaan waxaa loogu tala galay in dugsiyada Qur'aanka Kariimka ahi ay ubadka yaryar sii baraan xuruufta far-barashada si ay dugsiyda hoose ugu biiraan iyagoo ay wax u bilaaban yihiiin.

Waxaa barnaamijkaan laga bilaabay gobolka Bari oo ay tijaabo ahaan 6 dugsi ka hawl galeen.

Barnaamijka waxbarashada dadka waaweyn:

Waxaa la shaqo geliyey 108 xarumood oo gobollada iyo degmooyinka Puntland ku baahsan oo ay ka faa'ideysanayaan 6,000 arday dad waaweyn ah kuwaas oo aan hore fursad waxbarasho u helin



Xarunta NFE

Barnaamijka barashada xirfadaha:

Horumar lagu ma hammiyi karo haddii ayan jirin cudud dadeed oo aqoon xirtfadeed leh iyadoo sida la ogsoon yahay ay farsamada gacantu tahay aaladda lagu fuliyo laguna hanto barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta.

Waxbarashada xirfadaysan waxaa ilaa iyo hadda ka qalin jebiyey 1,500 qof.

Dugsiyada sare:

Waxaa hubaal ah in korarka tirada dugsiyada sare iyo kuwa hoose/dhexe ay isa saameeyaan.

Kororka dugsiyada hoose/dhexe wuxuu soo jiidaa baahida helitaanka tiro dugsiyo sare oo dabooli karta baahida ardada soo kororta.

Tirada dugsiyada sare ee Puntland waxay haatan maraysaa 36 dugsi oo ay wax ka bartaan 9,399 arday taasoo suurta gelineysa in ardada dhammaysata heerka waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe ay helaan fursad ay waxbarashada ku sii wataan.



Xafiiska waaxda dugsiyada sare

Xafiiska imtixaanaadka:

Waxaa la dhisay xarun u gaar ah in lagu qaado imtixannada dugsiyada asaasiga ah,dugsiyada sare iyo kuwa xirfadah.

Xafiiskan waxaa loo magacaabay guddi aqoon iyo khibradba u leh fulinta hawlahaa imtixaanaadka.



Waaxda imtixaanaadka (dabaqa hoose)  
Waaxda qorshaynta & tirakoobka (dabaqa sare)

#### Xarunta qorshaynta & tirakoobka:

Waxaa gacanta lagu hayaa dhismaha xafiiska qorshaynta iyo tirakoobka ee wasaaradda.

Xafiiskaani wuxuu xal u noqonayaahelitaanka tirakoob dhab ah oo si ay kalsooni ku jirto lagu jaangoyn karo qorshaha horumarinta waxbarashada.

#### WAX-QABADKA WASAARADDA CAAFIMAADKA

Warbixintaan waxaa soo diyaariyey, Cabdi Ibraahim Warsame, agaasimaha guud ee caafimaadka.

Caafimaadku waa tiirka asaasiga ah ee nolosha iyo horumarka bulshada, xaqiiqadaas oo laga ma maarmaan ka dhigtay in dowladaha adduunku ay adeegga iyo guud ahaan hawlahaa caafimaadka siiyan tixgelin iyo fiiro gaar ah.

Dastuurka, barnaamijka iyo siyaasadda horumarineed ee Puntland waxay si cad u qeexayaan mudnaanta uu caafimaadku leeyahay iyo kaalinta hormuudka ah ee uu hawsha dowladda kaga jiro.

Si loo gaaro ujeeddooyinka muddada fog ee barnaamijka caafimaadka waxay wasaaradda caafimaadku is-hordhigtay fulinta waajibaadka soo socda:

1. Horumarinta adeegga caafimaad ee dalka
2. Helitaanka daawooyinka, tallaalada iyo dhammaan agabka hawlahaa caafimaadka looga baahan yahay
3. In la cirib tiro ama hoos loo dhigo cudurrada faafa siiba qaaxada, duumada iyo HIV/AIDS
4. In adeegyada caafimaadka lagu saleeyo xaaladaha juqraafi ee dalka
5. In la sugo helitaanka dhaqaalaha lagu socodsiinayo barnaamijyada caafimaadka si loo gaaro adeegyo caafimaad oo leh jiritaan waara
6. In fiiro dheeraad ah loo yeesho cilmi-baarista ku saabsan arrimaha caafimaadka

7. In la dejiyo barnaamij meelmar ah oo ku saabsan tayeynta adeegyada caafimaadka iyo helitaanka cudud aqoon xirfadaysan u leh hawlahaa caafimaadka

Wasaaradda caafimaadku iyadoo kaashanaysa deeq-bixiyaasha,hay'adaha & ururrada caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah waxay muddada sanadaha 2005-2008 fulisay hawlo baaxad weyn oo aan warbixintaa lagu soo koobi karin.

Sidaa daraaddeed waxaa halka lagu soo taxayaa qaar ka mid ah hawlahaa ugu muhimsan ee qabsoomay.



Xarunta cusub ee wasaaradda caafimaadka-Garowe

Sahamada iyo cilmi baarista caafimaad:

01. Sahanka xogta xaaladda guud ee caafimaadka dalka,2 jeer
02. Cilmi baaris ku saabsan heerka cudurka HIV/AIDS ee bulshada,3 jeer
03. Cilmi baaris ku saabsan daawada cudurka duumada, 2 jeer
04. Cilmi baaris ku saabsan cudurka qaaxada ee carruurta,1 mar
05. Sahan ku saabsan nooca kaneecada dalka ku nool,16 jeer
06. Sahan ku saabsan heerka aqoonta bulshada ee cudurka qaaxada,3 jeer
07. Sahan ku saabsan heerka aqoonta bulshada ee cudurka HIV/AIDS,2 jeer
08. Sahan ku saabsan nafaqada iyo quudinta,4 jeer
09. Sahan ku saabsan baarista dhiig yaraanta,2 jeer
10. Sahan toddobaadle ah ee la socodka cudurrada halista ah,209 jeer

Kormeerka iyo qiimaynta caafimaadka:

1. Kormeerka qaybaha wasaaradda ee heer xarumeed,18 jeer
2. Kormeerka qaybaha wasaaradda heer gobol/degmo,96 jeer
3. Kormeerka mashaariicda wasaaradda,218 jeer
4. Kormeerka qaybaha kale,85 jeer

Wasaaraddu waxay fulisey barnaamijyo la xiriira wacyigelinta bulshada iyadoo la adeegsadey qalabka warbaahinta iyo kulamo bulshadeed,waana sidatan:

1. Munaasabadda maalinta caafimaadka adduunka,4 jeer
2. Munaasabadda xuska maalinta qaaxada adduunka,4 jeer
3. Munaasabadda xuska maalinta duumada Afrika,4 jeer.
4. Munaasabadda xuska maalinta AIDS-ka adduunka,3 jeer
5. Munaasabadda xuska maalinta carruurta Afrika,3 jeer
6. Munaasabadda xuska maalinta toddobaadka naas-nuujinta,2 jeer
7. Adeegga waxbarashada caafimaadka bulshada,614 jeer

#### **Horumarinta Habraacyada Hawlaha Caafimaadka:**

Waxaa la horumariyey aqoonta Hawlwadeennada caafimaadka, iaydoo la nidaamiyey lana soo saaray habraacyada hawlaha caafimaadka. Waxaa la diyaariyey Dekumentiga hoos ku qoran:

1. Horumarinta habraaca laanta duumada 3 nuql
2. Horumarinta & soo saarista habraaca mashruuca qaaxada,2 nuql
3. Horumarinta iyo soo saaridda habraaca mashruuca HIV/AIDS,2 nuql
4. Horumarinta iyo soo saaridda habraaca mashruuca sheybarrada,3 nuql
5. Horumarinta iyo soo saaridda habraaca mashruuca shubanka,85 nuql
6. Horumarinta iyo soo saarista siyaasadda caafimaadka,2 nuql

#### **Wax-qabadka ku saabsan adegga guud ee caafimaadka bulshada:**

Wasaaradda caafimaadka oo kaashanaysa hay'adaha iyo ururrada caalamiga,kuwa maxalliga ah iyo deeq-bixiyaasha waxay hirgelisey arrimaha hoos ku qoran.

#### **Mashruuca daryeelka caafimaadka carruurta:**

- Kaabidda dhiigyaradi
- Xaqijinta habak quudinta
- Wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah
- Kaalmaynta xarumaha qaxootiga
- Maaratnta dhibaatooyinka ay nafaqo-darridu keento
- Kor u qaadista nuujinta hagaagsan
- Aqoon is-weydaarsiyo ku saabsan nafaqaynta carruurta iyo hooyooyinka
- Xadidaadda cudurrada nafaqo-darrida ka dhasha

#### **Mashruuca HIV/AIDS:**

- Fududaynta keenista qalabka sheybarrada
- Dhisidda xarumo lagu daweeyo lagulana taliyo dadka la nool HIV/AIDS
- Dardar gelinta maamulada isbitaallada iyo kormeerkooda
- Shaqaalaynta HIV/AIDS PO
- Tababar ku aaddan bixinta daawooyinka ART oo loo qabtay shaqaalaha ka shaqeeya VCT-yada
- Xog ururin joogto ah kuna saabsan VCT-yada

#### **Mashruuca sheybarrada Puntland:**

- Xarunta sheybarka guud ee Boosaaso waxaa tusaale ahaan loogu soo qaadan karaa heerka horumarka sheybarrada Puntland ee ay wasaaraddu ku tallaabsatay.

- Waxaa kor loo qaaday heerka shaqada sheybaarrada ee isbitaallada Qardho, Garowe, L/ caanood iyo Gaalkacyo.
- Waxaa la keenay qalab casri ah oo lagu baaro virus-ka kaasoo wax weyn ka taraya baarista cudurka HIV/AIDS-ka
- Waxaa jira 18 sheybaar oo ah heer degmo
- 5 xarumood oo qaaxada ayaa Puntland ka hawlgala



Mid ka mid ah MCH-yada-Boosaaso

Mashruuca fidinta tallaalka:

- 31 MCH ayaa la siiyey agabkii tallaalka
- Waxaa la sameeyey sahan ku saabsan tallaalada loo baahan yahay
- Waxaa la sugayaa qaboojiyeyaa loogu tala galay 19 MCH
- 60 ka tirsan shaqaalaha caafimaadka ayaa loo tababaray qorshaynta tallaalada joogtada ah
- 30 ka tirsan shaqaalaha caafimaadka ayaa iyana loo tababaray qaabka bedbaadsan ee wax loo tallaalo
- 31 MCH ee 4 gobol oo Puntland ah ayaa bixiya tallaalka joogtada ah
- Waxaa la sameeyey 2 wareeg oo ah tallaalka Polio bilihi January iyo April 2007
- Ilaa iyo May sanadki 2006 la ma helin xaalad ah Polio
- Waxaa la sameeyey wacyigelin ku aaddan 4 ol'ole

Xakamaynta duumada:

- Iyadoo la fulinayo qorshaha loo dejiyey duumada kuna aaddan 2005-2010 waxaa la qaybiyey 18,820 maro kaneeco oo daweysan kuwaas oo la gaarsiiyey xarumaha hooyada iyo dhallaanka, xeryaha qaxootiga iyo dadka deggan goobaha ay kaneecadu ku badan tahay

Wax-qabadka ku aaddan xaaladaha degdeffa ah:  
Waxaa adeeg caafimaad la gaarsiyey dhammaan goobaha ay ku sugan  
yaihiin dadka soo barakacay iyo goobihii uu bad-giriirkii Tsunami saameeye

Caafimaadka dhimirka:  
Wasaaradda caafimaadku iyadoo la kashanaysa GRT/UNA waxay bilowday  
qaybtii dhimirka ee isbitaalka Boosaaso iyadoo la la kaashaday SRCS.

Si barnaamijkaan loo taabbageliyo waxaa:

- 3 khabiir ayaa si joogto ah u sameeya kormeer
- Waxaa la hagaajiyey lana cusboonaysiyyey qaybta dhimirka
- Waxaa isbitaalka la jiifiyey o lagu daweeeyey 297 bukaan
- Waxaa xaaladahooda la la socdaa oo daawo la siiyaa 2,975 bukaan

Tababarrada dibadeed ee hawl-wadeennada caafimaadka:

Wasaaradda caafimaadku iyadoo kaashanaysa hay'adaha caalamiga ah  
waxay 2005-2008 hirgelisey tababarrada soo socda:

Nooca shaqaale	2005	2006	2007	2008
Takhaatiir	2	1	2	1
K/caafimaad	0	0	0	0
Umuliso	1	2	2	1
Farmashiiste	0	0	0	0
Sheybaare	0	0	0	2
Agaasime	1	2	0	0

Tababarrada gudaha ee hawl-wadeennada caafimaadka:

Nooca shaqaale	2005	2006	2007	2008
Takihaatiir	3	2	1	2
K/caafimaad	3	4	2	5
Umuliso	5	0	6	5
Farmashiiste	0	0	1	2
Sheybaare	2	3	2	3
Auxillary	4	3	5	4
K/sheybaare	0	0	0	0
Raajiiste	0	0	0	0
Umuliso dhaqameed	3	2	3	4

Arday ka qalin jebisey macaahidda caafimaadka ee Boosaaso & Garowe:

Xirfadda	2005	2006	2007	2008
Kalkaaliye	44		24	67
Umuliso	0	0	0	0
Sheybaare	0	0	28	0

Dhaqaalaha:

Maaliyadda ay wasaaraddu ku hawl gasho waxay ka heshaa dowladda  
Puntland iyo sidoo kale deeq-bixiyaal iyo hay'ado caalami ah.

Dhismooyin:

Muddada 2005-2008 waxaa la fuliyey mashaariicda dhismaha iyo dayactirka  
ee soo socda:

Xarumaha Caafimaad ee la dayactiray Sanadaha 2005-2008

No	Gobolka	Degmada	Goobta	Nooca Goobta	Waxqabadka	Sanadka
	Karkar	Qardho	Qardho	MCH	Dayactir	2006
			Qardho	Hosp	Dayactir	2006
			Qardho	MCH	Dayactir/Balaarin	2006
			Guudcad	HP	Dayactir	2006
			Xabaalreer	HP	Dayactir	2006
			Cambar sare	HP	Dayactir	2006
			Yaka	HP	Dayactir	2006
			Shimbirale	HP	Dayactir	2006
			Jidad	HP	Dayactir	2006
	Waciye	Xidda	HP	Dayactir	2006	
		Sherbi	MCH	Dayactir/Balarin	2006	
	B/bayla	Xunbays	HP	Dayactir	2006	
	Rakko	Duudhooye	HP	Dayactir	2006	
Bari	Bosaso	Bosaso	Hosp Lab	Dayactir	2006	
		Bosaso	MHC Lab	Dayactir	2006	
		Bosaso	MCh	Dayactir	2006	
		Laag	HP	Dayactir	2006	
		Karin	HP	Dayactir	2006	
		Galgala	HP	Dayactir	2006	
	Iskushuban	Xiriyo	HP	Dayactir	2006	
		Meladen	HP		2006	
		Timirshe	HP		2006	
		Gargoore	HP		2006	
Sanag	Baran	Baran	TB Center			
Sool	Lasanod	Lasanod	MCH/OPD		2007	
		Kalabayr	MCH/OPD		2007	
Nugaal	Garowe	Garowe	TB Centre	Dayactir	2006	
	Garowe	Garowe	TB centre	Dayactir/Balarin	2006	
		Garowe	TB Lab		2006	
		Garowe	Hosp Lab		2006	
		Garowe	Hosp	Dayactir	2006	
		Garowe	HosP	Dayactir/Balarin	2006	
		Garowe	MoH Centre	Dayactir/Balarin		
		Kalabayr	MCH Lab	Dayactir/Balarin	2006	
		Sinujif	MCH	Dayactir/Balarin	2006	
	Dangoroyo	Dangoroyo	MCH lab	Dayactir/Balarin	2006	
		Dangoroyo	Isb. Degmo	Dayactir/Balarin	2006	
	Eyl	Eyl Badeyl	DHP	Dayactir	2006	
		Ely Dawad	DHP	Dayactir	2006	
Mudug	Galkacyo	Galkacyo	Hosp.	Dayactir/Balarin	2006	
		Galkacyo	TB Centre	Dayactir/Balarin	2006	

Dhismayaasha iyo Dayactirka Xarunta Dhexe ee WACAAF ee 2005-2008

No	Goobta	Nooca Waxqabadka	Sanadka
	Xaruntii Hore	Dayactir	2005
	Xaruntii Hore	Dayactir/Balaadhin	2007
	Xarunta Cusub	Dhisme	2008

Qalabka Xarumaha Wasaaradda Caafimaadka 2005 – 2008

No	Gobolka	Demada	Qalabka	Goobta	Tirada	Sanadka
1	Bari	Bosaso	Elec Generator 3 Cylender	Hosp	1	2006
			Computer PC	HIS Office	1	2006
			Computer PC	HIV/M&E	1	2006
			HP Laster Jet	HIV/M&E	1	2006
	Sanaag	Baran	Elec Generator 6 Cylender	Hosp/MCH	1	2006
	Karkaar	Qardho	Elec Generator 6 Cylender	Hosp	1	2006
			Computer PC	Isuduwaha	1	2006
			HP Laster Jet	Isuduwaha	1	2006
		RAKO	Elec Generator 6 Cylender	Hosp	1	2006
	Nugal	Garowe	Elec Generator 4 Cylender	Hosp	1	2006
			Computer PC	Hosp	2	2006
			Auto Clave Electric	Hosp	1	2006
			Operation MECHINE	Hosp	2	2006
			Operation Bed	Hosp	1	2006
			Bed sheets staff Unifroms	Set		2006
			Operation sets	Hosp	11	2006
			Eye Oper. Microscope	Hosp	1	2006
			Computer PC	Isuduwaha	1	2006
			HP Laser Jet	Isuduwaha	1	2006
	Mudug	Galkacyo	Elec generator 3 Cylender	Hopt	1	2006
			Computer PC	HIS	1	2006
			Computer PC	HIV/M&E	1	2006

			Hp laster jet	HIV/M&E	1	2006
	Sool	Lasanod	Elec. Generator 6 cylinder	Hosp	1	2006
			Portbale X- Ray	Hosp	1	2007
			Computer PC	HIV/M&E	1	2007
			HP laser jet	HIV/M&E	1	2007

Qalabka Xarunta Dhexe ee Wasaaradda Caafimaadka 2005 – 2008

Tiro	Degmada	Xafiiska	Nooca	Tirada	Sanadka
	Garowe	Wasiirka	Labtop Toshiba	1	2006
	Garowe	Wasiirka	HP Scaner		2006
	Garowe	Wasiirka	HP Laser jet	1	2006
	Garowe	Wasiirka	Projector	1	2006
	Garowe	Wasiirka	Thuraya	1	2006
	Garowe	W/Xigeenka	Compuer PC	1	2006
	Garowe		HP Laser jet	1	2006
	Garowe	Ag/ guud	Labtop Toshiba	1	2006
	Garowe		HP Laser jet	1	2006
			HP Laser jet	1	2006
			Desktop PC	1	
			Photocopy	1	2006
		A/W/Mamulka	Desktop PC	1	2006
			HP laser jet	1	2006
			Photocopy	1	2006
		A/W/Tababrade	Desktop PC	1	2006
			Labtop Toshiba	1	2006
			HP laser jet	1	2006
		Mshruuca Qaaxada	Toshiba laptop	2	2006
			Desktop PC	1	2006
			HP laser jet	1	2006
			HP diskjet printer	1	2006
			Thuraya	1	2006
			Digital V/Camera	1	2006
			TV Screen	1	2006
			Vedio Cassete	1	2006
			Stabliser 1000W	1	2006
		HIS	Desktop PC	1	2006
			Labtop	1	2006
		CDC	Desktop/flat screen	1	2006
		Madaxa MCHyada	Desktop PC	1	2006
			Printer HP	1	2006

			laser jet		
		Madaxa Talaalada	Comp Labtop, Hp Printer, photocopy, Scaner	4	2008
		Madaxa Qaybta Duumada	Comp. Labtop, Hp Printer	2	2008

Gaadiidka Wasaaradda Caafimaadka Heer Gobol 2005 – 2008

Gobolak	Degmada	Goobta	Nooca	Tirada	Sanadka
Karkaar	Qardho	Isbitaalka	Amulance 4WD GD	1	2006
	Bandarbayla	Isbitaalka	Amulance 4WD GD	1	2007
	Rako	Health C.	Amulance 4WD GD	1	2008
	Waciye	MCH/OPD	Amulance 4WD GD	1	2008
	Xaafuun	Isbitaalka	Amulance 4WD GD	1	2007
Sanaag	Baran	Isbitaalka	Amulance 4WD GD	1	2007
		Isuduwaha	Landcruiser 4WD GD	1	2007
Nugal	Garowe	Isbitaalka	Amulance 4WD GD	1	2006
		Ag: Isbita	Pick up 4WD GD	1	2006
	Eyl	Isbitaalka	Ambulance 4WD GD	1	2007
Mudug	Gaalkacyo	Isbitaalka	Ambulance 4WD GD	1	2006
		Agaasimaha	Pick up 4WD GD	1	2007
Sool	Lasanood	Isbitaalka	Ambulance 4WD GD	1	2006
		Agasimaha	Landcriuser 4WD GD	1	2007
Total				14	

Gaadiidka Xarunta WACAAF ee Sanadka 2005-2008

Xarunta	Goobta	Xafiiska	Nooca	Tirada	Sanadka
Xarunta	Garowe	Wasiirka	Pick up Toyota 4WD	1	2005
		Ag: Guud	Lacdruiser 1H 4WD	1	2005
		Ag/W/Mamulka	Toyota MarkII	1	2005
Total				3	

**WAX-QABADKA WASAARADDA H. HAWEENKA & ARR. QOYSKA**  
Warbixintaan waxaa soo gudbisey Saciido Xuseen Cali, agaasimaha guud ee H. haweenka & arr. Qoyska.

Wasaaradda horumarinta haweenka & arrimaha qoysku wax-qabadkeedi muddada u dhexaysa 2005-2008 ma aha mid halka lagu soo koobi karo sidaa daraaddeed waxaa warbixintaan lagu soo bandhigayaa wax-qabadyada ugu waaweyn:

01. Dhismaha xarunta cusub ee wasaaradda, diyaarinta qaab-dhismeedka iyo shaqaalaynta hawl-wadeennada.
02. Diyaarinta barnaamijka ku wajahan horumarinta haweenka & arr.qoyska
03. Diyaarinta iyo fulinta mashaariicda kor u qaadista nolosha qoyska, haweenka iyo ubadka iyadoo la sugayo dhowridda xuquuqda haweenka,ubadka iyo dadka laga tira badan yahay.
04. Tababaridda iyo sare u qaadista xirfadaha iyo aqoonta hawl-wadeennada si ay u hantaan fulinta mashaariicda iyo qorshaha wasaaradda.
05. Fidinta hawlaha wasaaradda oo la gaarsiiyey dhammaan gobollada GPL iyadoo laga wada furay xafiisyo qalabaysan oo ay gabdho isuduwayaal ahi ku shaqeeyaan.



Xarunta wasaaradda H.haweenka & arr. Qoyska- Garowe

06. Waxaa la sameeyaa kormeer,la-socod joogto ah iyo qiimayn ku saabsan wax-qabadka iyo habسامي u socodka hawlaha wasaaradda.
07. Ka hawlgalka xiriirinta iyo habسامي u la shaqaynta hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ah ee daneeya ka qayb qaadashada kor u qaadista nolosha qoyska iyo horumarinta haweenka.
08. Markii uu bad-giriirkii Tsunami ku dhuftay xeebaha Puntland waxay wasaaraddu ka hawl gashay diyaarinta daraasad iyo warbixin ku aaddan dhibaatada ka dhalatay bad-giriirkii iyo sida uu u saameeyey bulshada gaar ahaan degaamada Garacad, Xaafuun, Bayla iyo Eyl.  
Daraasaddaan waxaa loo gudbiyey hay'adihii wax ka qabadka goobaha Tsunamiga ku hawlanaa.
09. Waxaa xogo iyo warbixinno laga soo ururiyey jaaliyadaha Soomaalida ee dalalka Yurub qaarkood.
- 10.Wasaaraddu waxay iskeed u iibsatey 3 gaari iyadoo 1 gaari oo kalena ay dowladdu u iibisey.
- 11.Waxaa la qabtay shir guud [Forum].Shirkaan oo lagu diyaariyey qorshaha wasaaradda ee 3 sano (2005-2007) waxaa ka qayb galay 80 hoggaamiyeeyasha haweenka ee 7da gobol oo Puntland.

12.Aqoon is-weydaarsi ku saabsan sida ay is-kaashi iyo midow u lahaan lahaayeen haweenka degaamadii ay Tsunami waxyeeleysay ayey wasaaraddu u qabatay 20 haween ah oo 4ta degmo ee Tsunamiga laga soo xulay.

13.Waxay wasaaraddu soo saartay buug muujinaya dhammaan sawirradii shaqo ee laga soo qabtay DGPL iyo jaaliyadaha dibadda.

14.Wasaaraddu waxay ka qayb qaadataa dabaaldegyada lagu xusayo munaasabadaha caalamiga ah,sida maalinta haweenka ee 8da Maarso,maalinta carruurta,maalinta nabadda,maalinta gudniinka,maalinta HIV/AIDs-ka iyo maalinta deegaanka.Waxay wasaaraddu fulisey aqoon is-weydaarsiyo wacigelin ah kuna saabsan barnaamijyo kala geddisan sida ilaalinta xuquuqda haweenka iyo carruurta, sinnaanta waxbarashada gabdhaha iyo wiilasha,joojinta xad-gudubyada gabdhaha iyo haweenka ka dhanka ah,sad-bursiga lwm.

15.Shaqaalaha wasaaradaha oo dhan waxaa la siiyey tababar 3 bilood ah oo ku saabsan maamulka,xisaabaadka,luqada Ingiriiska & ku shaqaynta computer-ka

16. 13-ka wasaaradood ee DGPL waxaa mid kasta loo tababaray 1 gabar muddo 3 bilood ah kuna saabsanaa maamulka,xisaabaadka,luqada Ingiriiska iyo computer-ka si ay wasaaradahooda u caawiyaan.

17. 2 gabdhood oo wasaaradda ka tirsan ayaa la siiyey tababar ku saabsan qalabka maqalka iyo muuqaalka oo ay hadda ku shaqeeyaan.

18.Wasaaraddu waxay samaysay xog ururin ku saabsan tirada shaqaalaha GPL iyadoo la hubinayey sida ay labka iyo dhgeddigu kala yihiin markii la fiiriyo sinnaanta,mas'uuliyadaha iyo go'aan gaarista.Natiijadii daraasaddaan ka soo baxday waa la daabacay waxaana laga heli karaa wasaaradda.

19.Waxaa si dhammaystiran loo qalabeeeyey xafiisyada wasaaradda ee gobollada Karkaar,Cayn iyo Sanaag iyadoo horena sidaas oo kale loo qalabeeeyey xafiisyada wasaaradda ee gobollada Bari,Nugaal,Mudug iyo Sool.

20.Mas'uuliinta wasaaraddu waxay gobollada Puntland ka soo diyaariyeen daraasad laga lahaa ujeeddooyinka soo socda:

1. In loo kuurgalo maalgelinta ay hay'adaha caalamiga ahi sheegaan in la siiyo haweenka Puntland iyadoo la hubinayo inay gaarto iyo ilaha loo sii mariyey.
2. In la soo tirakoobo ururrada NGO-yada haweenka ee gobollada oo ay tiradoodu xad-dhaaf tahay,intooda badanina ayan wax kaalmo ah helin waxa iyaga ka baxa mooyee.
3. In wasaaraddu ururrada haweenka ee gobollada ka caawiso sidii ay ururrada gobol walbaa hal xafiis ugu midoobi lahaayeen taasoo fududaynaysa kormeerka,dabagalka ku aaddan kaalmada ay hay'adaha ka helaan iyo waxa ay bulshada ugu qabtaan.
4. Inay wasaaradda iyo hay'adaha caalamiga ah u fududaato inay la shaqeeyaan hal hoggaan goboleed.
5. Inay wasaaradda u suurta gasho u doodidda iyo tababaridda loogu tala gelayo xafiis goboleedyada dhismay ayna u helaan maalgelin ay bulshada ku daryeelaan uguna adeegaan.

Wasaaraddu waxay kaloo qabatay hawlaha soo socda:

1. Wasaaraddu waxay qalab ay ku hawl galaan siisay xafiisyada cusub ee dalladaha haweenka iyadoo xaflad ay wasaaraddu soo agaasintay uu Madaxweyne ku xigeenku ku guddoonsiiyey.



Mid ka mid ah shirarka ururrada haweenka oo lagu qabtay xarunta wasaaradda

2. Xafiis goboleedyada NGO-yada haweenka waxay wasaaraddu siisay aqoonsi.
3. Wasaaraddu waxay diyaarisay qorshaha sanadka 2008 oo ay ku cayiman yihiin mashaariic horumarineed oo haweenka ku aaddan.Hay'adaha caalamiga ahi si weyn ayey u soo dhoweeyeen uguna qanceen qorshahaan iyagoo ka duulaya kalsoonidii ay wasaaraddu ku kasbatay wax-qabadkeedi 2007.
4. Sanadka 2007 waxay UNICEF bixisay mushaarka la-taliye tababarayey waaxaha wasaaradda, gacanna ka siinayey diyaarinta qoraallada.

Sidoo kale sanadkan 2008 waxay hay'adaha UNDP & UNFPA wasaaradda ugu deequeen 2 la-taliye oo muddo 6 bilood ah ka caawini doona hawlo ay ka mid yihiin soo saaridda buug loogu magac-daray [Gender Policy Frame Work] iyo GBV.1 iyo proposal.

5. Tababarro kala duwan oo la siiyey shaqaalaha xarunta dhexe iyo gobollada ee wasaaradda kuna saabsanaa xirfado sare loogu qaadayo awoodda wax-qabad ee hawl-wadeennada wasaaradda.
6. Waxaa la qabtay tababarro ku saabsan ka hortagga fidista HIV/AIDS iyo sidii loo la tacaali lahaa iyo dhan kale sidii looga hortegi lahaa tacaddiyada haweenka lidka ku ah oo uu gudniinku ka midka yahay.
7. Wasaaraddu waxay tababaray 36 gabdhood oo si mutadawcnimo ah ugu shaqeeya xarunta wasaaradda iyo laamaheeda gobollada una badan gabdhaha dhigta ama dhammeeyey jaamacadaha Puntland.Gabdhahaan waxaa loo tababaray inay hoggaamiyeysa haweenka ee mustaqbalka noqdaan.
8. Shaqaalaha wasaaraddu waxay si joogto ah uga shaqeeyaan daryeelka iyo difaaca xuquuqda carruurta dhibaataysan ee aan waxbarashada iyo hoyga haysan.
9. Wasaaraddu waxay xiriirisaa wasaaradaha iyo hay'adaha barnamijka daryeelka carruurta ku hawlan iyadoo la kaashanaysa hay'adda UNICEF.



Tababar ku saabsan hawlaха wasaaradda oo loo qabtay hawl-wadeennada

10. Xarunta wasaaradda waxaa lagu kordhiyey dhismo ballaaran oo ka kooban xafiisyo,qol weyn oo shirar masjid,qol ilaalo iyo adeegyo kale.
11. Waxay wasaaraddu soo saartay warbixinno daabacan oo badan oo ay ka mid yihii:
  - a. buug ay ku urursan yihiiin macluumaad ku saabsan isku-dheellitirka genderka ee dhinacyada shaqada,waxbarashada,dhaqaalaha iyo siyaasadda.
  - b. Warbixin sanadeed
  - c. Buugga shaqo-qeexidda iyo kuwa kale.
12. Waxaa dhammaan xafiisyada wasaaradda loo dhammaystiray qalabka iyo alaabta xafiisyada (equipment & furniture).
13. Waxaa la abuuray oo waaxaha wasaaradda ku biirtay waax cusub oo qaabilan kaydinta xogta iyo isticmaalka qalabka isgaarsiinta oo loo qalabeeeyey si casri ah oo sahleysa soo koobidda wararka,filimada iyo sawirrada.
14. Waxaa la diyaariyey buug document ah oo ku saabsan shaqo qeexista waax iyo qof kasta.
15. Waxay wasaaraddu mushaar bille ah mashaariicda iyo adeegyada ka siisaa 41 mutadawiciin ah oo aan ahayn shaqaale rasmi ah miisaaniyaddana aan ku jirin.
16. Sanadkan waxay wasaaraddu iibsatey 2 gaari oo hor leh.
17. Wasaaraddu waxay si joogto ah uga qayb qaadataa nabadaynta goob kasta oo ay xiisad ama coolaadi ka ooganto sida nabadayntii Cagaarre.
18. Waxay wasaaraddu si joogto ah u xallisaa khilaafaadka dhex gala hawl-wadeennada haweenka ah ee gobollada iyo degmooyinka Puntland ka shaqeeya.
19. Wasaaraddu waxay u ololaysay sharciga uu Madaxweynuhu ku jideeyey in ka qaybgalka haweenka ee dhinacyada siyaasadda,dhaqaalaha iyo bulshada ee Puntland lagu kordhiyo 20 %..

20. 7 ka mid ah mas'uuliinta wasaaradda ayaa xilliyo kala duwan ee sanadka 2007 ka qaybgalay shirar caalami ah oo dalka dibaddiisa lagu qabtay halkaas oo ay guul ka soo hoyeen.
21. Wasaaraddu munaasabaddii sanad-guuradii 2ad ee astaynteeda kuna aaddaneyd 2007 waxay abaalmarino isugu jira lacag,gaadiid iyo shahaado sharaf hawkarnimo guddoonsiisay shaqaalah ka shaqeeya xarunta dhexe iyo gobollada,iyadoo uu abaalmarinndaas guddoonsiiyey Madaxweynaha DGPL.
22. Wasaaraddu waxay kaloo qabataa hawlo badan oo aan la soo koobi karin sida ka qaybgalka shirar,la-shaqaynta hay'adaha dowladda iyo kuwa caalamiga ah,martigelinta shirkanka iyo martida gobollada ka timaadda,u gargaarka dadka tabaalaysan ee dhibaatada u nugul,shaqo u raadinta gabdhaha iwm.
23. Wasaaradda horumarinta haweenka & arr.qoysku waxay wada-shaqayn la leedahay hay'adaha ay ka mldka yihiin UNICEF,UNFPA,UNDP,UNIFEM iyo DIAKONIA.

#### **WAX-QABADKA GOLAHA WAKIILADA**

Warbixintaan waxaa laga ururiyey arkiiviyada golaha, xafiiska garyaqaanka guud ee dowladda iyo madaxtooyada

Golaha wakiilada oo ah aqalka xeer-dejintu muddadii 4ta sano ee 2005-2008 wuxuu soo qabtay hawlo aad u ballaaran oo aan halka lagu soo koobi karin. Shuruucda uu goluhu jideeyey waxay ka muuqdaan warbxinta ku saabsan xafiiska garyaqaanka guud ee dowladda.



Mid ka mid ah kal-fadhiyada golaha wakiilada

Golaha wakiiladu wuxuu oggolaaday shuruuc badan oo ay xukuumaddu hordhigtagtay kuwaas oo ku saabsanaa arrimo siyaasadeed, horumarineed iyo kuwa la xiriira amniga & arrimaha bulshada iyo sidoo kale miisaaniyadaha, qorshaha 5ta sano, xiriirka Puntland iyo hay'adaha caalamiga iwm.

Dhan kale wuxuu goluhu si joogto ah xukuumadda ugu soo gudbinayey talooyin ku saabsan horumarka iyo guud ahaan danaha Puntland.

Xildhibaannada goluhu waxay dowr weyn ka qaateen:

- Difaaca iyo amniga
- Dhismaha golayaasha degaanka ee degmooyinka
- Wacyigelinta bulshada iyo hawlaho nabadaynta
- Xoojinta xiriirka bulshada iyo dowladda
- Xiriirka Puntland iyo DFKMG
- Xoojinta xiriirka Puntland iyo jaaliyadaha dibadda (qurbajoogta)
- Kormeeridda iyo u kuurgalka socodka hawlaho dowladda

#### WAX-QABAKA GUDDIGA SARE EE GARSOORKA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey, Dr. C/qaadir Sh. Axmed Maxamuud, guddoomiyaha guddiga sare ee garsoorka.

Garsoorku wuxuu ka mid yahay 3da qaybood ee dowladda wuxuuna u xil saaran yahay hawlaho garsoorka Puntland oo uu u madax bannaan yahay.

Warbixin guud:

Maxkamaduhu waxay u kala baxaan:

1. Maxkamadda sare
2. Maxkamadaha rafcaanka ee gobollada
3. Maxkamadaha Darajada 1aad ee gobollada iyo degmooyinka

Xeer ilaalinta guud waxay u kala baxdaa:

1. Xafiiska xeer ilaaliyaha guud
2. Xafiisyada ku xigeennada xeer ilaaliyaha guud ee gobollada

Garsoorku wuxuu ku baahsan yahay 7 gobol ee Puntland, inkastoo ay jiraan degmooyin aan weli la gaarsiin.

Tirada cududda ka hawl gasha garsoorka waa 135 qof oo isugu jira garsoorayaal, kaaliyeyaal, gaarsiiyeyaal iyo hawl-wadeenno kale.

Wax-qabadka garsoorka:

Maxkamaduhu waxay dhegeystaan dacwado kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- Dacwadaha ciqaabta, Madaniga, Maamulka iyo Shaqada
- Macaamilaadka sida, Guurka, Furriinka, Hibada, kala wareejinta iwm

Muddada 2005-2008 maxkamaduhu waxay galeen dacwadaha soo socda:

- |             |               |
|-------------|---------------|
| 1. Madani,  | 4,832 dacwo   |
| 2. Ciqaab,  | 2,304 dacwo   |
| 3. Maamul,  | 27 dacwo      |
| 4- Shaqada, | 34 dacwo      |
| 5- Nikaax,  | 1.212 nikaax  |
| 6- Furriin, | 1,320 furriin |

Waxay kaloo ay maxkamaduhu ka hawl galeen macaamilaad kale oo badan sida, hibooyinka, kala wareejinta & sugitaanka.

Guddiga garsoorka iyo xukuumaddu waxay ku guuleysteen in sanadkii 2007 maxkamado cusub laga hirgeliyo degmooyinka soo socda:

8. Degmada Goldogob ee gobolka Mudug oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.
9. Degmada Jarriiban ee gobolka Mudug oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.

10. Degmada Burtinle ee gobolka Nugaal oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.
11. Degmada Dangorayo ee gobolka Nugaal oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.
12. Degmada Xuddun ee gobolka Sool oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.
13. Degmada Taleex ee gobolka Sool oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.
14. Degmada Fiqi-fuliye ee gobolka Sanaag oo laga furay maxkamadda Darajada 1aad oo hawl gashay.

Baahida garsoorka:

1. In garsoorka la gaarsiiyo degmooyinka uusan weli gaarin
2. In xafiisyo iyo maxkamado loo dhiso degmooyinka aan lahayn.
3. In meelaha looga baahan yahay la dayctiro xarumaha garsoorka
4. In la sugo xuquuqda dastuuriga ah iyo adeegyada garsoorka.

Wax-qabad la'aanta hay'adaha caalamiga ah:

Muddadaan 4ta sano ah garsoorku ka ma helin hay'adaha caalamiga ah barnaamijiyadii u qorshaysnaa ee laga sugayey sida, dhismooyin, gaadiid, dayactir, qalabayn, tababarro iwm.

#### **WAX-QABADKA HAY'ADDA HANTI -DHOWRKA GUUD**

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey, Maxamed Yuusuf Cabdi, guddoomiyaha hay'adda hanti-dhowrka guud.

Xafiiska hanti-dhowrku waa hay'ad madax bannaan una xil saaran ilaaliinta iyo faaqidaadda hantida caamka ah si looga ilaaliyo lunsasho, ku tagri-fal iyo maamul-xumo loona sugo hafnaanta iyo ku dhaqanka xeerarka maamulka maaliyadda iyo hab-raaca xisaabaadka ee dowladda u jideysan.

Muddada 2005-2008 waxay hay'addu soo fulisey hawlo aad u fara badan oo mas'uuliyaddeeda soo gala.

Waxaa baaris lagu sameeyey:

Sanadka 2005

- Wasaaradda maaliyadda iyo laamaheeda,8 baaris
- Wasaaradda kalluumaysiga & dekedaha,2 baaris
- Wasaaradda warfaafinta,1 baaris
- Wasaaradda xanaanada xoolaha,1 baaris
- Wasaaradda ganacsiga & warshadaha,2 baaris
- Wasaaradda shaqada & dhalinyarada,1 baaris
- Wasaaradda D/ha hoose,1 baaris
- Wasaaradda caafimaadka,1 baaris
- Hay,adda Nesha,2 baaris
- Bangiga dowladda & laamijiisa,1 baaris
- Rugta ganacsiga & laamaheeda,2 baaris
- Duulista hawada & laamaheeda,2 baaris
- Maxkamadda D.1aad ee G/Bari,1 baaris
- Isbitaalka weyn ee Garowe,1 baaris
- Hay'adda Psawen,1 baaris
- Isbitaalka weyn ee Boosaaso,1 baaris
- Laanta socdaalka ee Boosaaso,1 baaris
- Laanta socdaalka ee Garowe,1 baaris
- Laanta socdaalka ee Gaalkacyo,1 baaris

### Sanadka 2006

- Dowladda hoose ee Gaalkacyo,2 baaris
- Dowladda hoose ee Garowe,1 baaris
- Dowladda hoose ee Burtinle,1 baaris
- Dowladda hoose ee D/Gorayo,1 baaris
- Dowladda hoose ee Qardho,1 baaris
- Wasaaradda maaliyadda & laamaheeda,14 baaris
- Xafiis yada PRA,4 baaris
- Duulista hawada & laamaheeda,3 baaris
- Wasaaradda kalluumaysiga & dekedaha,1 baaris
- Wasaaradda xanaanada xoolaha,2 baaris

### Sanadka 2007

- Dowladda hoose ee Boosaaso,1 baaris
- Dowladda hoose ee Garowe,1 baaris
- Dowladda hoose ee Gaalkacyo,1 baaris
- Dowladda hoose ee L/caanood,1 baaris
- Dowladda hoose ee Burtinle,1 baaris
- Wasaaradda maaliyadda & laamaheeda,12 baaris
- Xafiis yada PRA,3 baaris
- Duulista hawada,2 baaris
- Laanta socdaalka ee Boosaaso,1 baaris
- Rugta ganacsiga,1 baaris
- Hay'adda Nesha,1 baaris
- Wasaaradda kalluumaysiga & dekedaha,1 baaris
- Wasaaradda xanaanada xoolaha,2 baaris

### Sanadka 2008

- Dowladda hoose ee Qardho,1 baaris
- Dowladda hoose ee D/Gorayo,1 baaris
- Dowladda hoose ee Gaalkacyo,1 baaris
- Dowladda hoose ee Carmo,1 baaris
- Dowladda hoose ee Waaciya,1 baaris
- Wasaaradda maaliyadda ee G/Mudug,3 baaris
- Wasaaradda maaliyadda ee G/Nugaal,3 baaris
- Wasaaradda maaliyadda ee G/Bari,2 baaris
- Furdada garoonka Boosaaso,1 baaris
- Xafiiska PRA ee Garowe,1 baaris
- Duulista hawada & laamaheeda,2 baaris
- Laanta socdaalka ee garoonka Boosaaso,2 baaris

Hanti-dhowrku wuxuu eedaymaha la xiriira hantida la lunsado u gudbiyaa xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland si tallabada sharci ee ku habboon loo qaado.

Dhan kale warbixnada iyo natijjooyinka baarista wuxuu xafiiska hanti-dhowrku gaarsiiyaa madaxtooyada, golaha wakiilada iyo wasaaradda/hay'adda ay baaristu ku saabsan tahay.

Hay'adda hanti-dhowrku waxay baarista ku dhex waddaa toosin iyo saxitaan iyadoo la tixgelinayo in shaqaalaha dowladda ee maamulka iyo xisaabaadka u xil saarani ayan qaarkood lahayn aqoon xirfadeed iyo waayo-aragnimo hawlahas la xiriira.

## WAX-QABADKA BANGIGA DOWLADDA PUNTLAND

Worbixintaan waxaa soo gudbiyey, Xirsi Maxamed Jaamac, agaasimaha guud ee Bangiga dowladda Puntland.

Bangiga dowladdu wuxuu ka mid yahay hay'adaha dowladeed ee uu dastuurku cayimay abuuriddooda.

Bangigu wuxuu ku shaqeeyaa hannaan waafaqsan habkii ay bangiyadii dowladdii dhexe ku hawlgeeli jireen.

Muddadii 4ta sano ahayd ee 2005-2008 bangigu wuxuu soo qabtay hawlo badan oo si weyn qayb uga qaataay socodsiinta hawlaho dowladda, ka sokow hawlihiisa bangi ee caadiga ah.

Wax-qabadka & kharajyadii uu bangigu bixiyey waxaa laga xusi karaa:

1. Nabadgelyada:
  - a. Arrimo ah lana xiriira amniga , Sh.So.8,195,000,000
  - b. Kabis mushaar & raashin ciidan,Sh.So.1,900,000,000
  - c. Mago & dhexdhedaadin beelo, Sh.So.1,064,000,000

Isugeyn, Sh.So.11,159,000,000

2. Maamul-wanaajinta & arrimaha bulshada:
  - a. Taakulada maamulada degmooyinka, Sh.So.3,141,500,000
  - b. Qalabeyn xafiisyada bangiga & madaxtooyada, Sh.So.327,500,000
  - c. Ka qaybgal iibinta matoorrada dekedda, Sh.So.493,800,000
  - d. Gaadiid bangiga & dowladda loo iibiyey, Sh.So.939,900,000
  - e. Taakulada wasaarado & safarro dibadeed, Sh.So.565,423,000
  - f. masiibooyin,caafimaad & deeqo waxbarasho Sh.So.4,047,960,000,

Isugeyn, Sh.So.9,515,983,000

3. Dhismooyin:
  - a. Kaabayaasha dhaqaalah, Sh.So.1,806,516,000
  - b. Dhismo & dayactir, Sh.So.1,817,600,000

Isugeyn, Sh.So.3,624,116,000

Wadar guud, Sh.So.24,299,099,000



Xafiiska Madaxweyne xigeenka Puntland ee Garowe

Si loo taabbagliyo maamulada degmooyinka iyo gobollada lacagaha uu bangigu taakulo amaah ahaan ku siiyey waa sidatan:

1. Qardho,	Sh.So.200,000,000
2. Bayla,	Sh.So.135,000,000
3. Burtinle,	Sh.So.050,000,000
4. Eyl,	Sh.So.178,300,000
5. Goldogob,	Sh.So.100,000,000
6. Taleex,	Sh.So.060,000,000
7. Garowe,	Sh.So.425,550,000
8. Ufayn,	Sh.So.100,000,000
9. Waaciye,	Sh.So.050,000,000
10. Boocame,	Sh.So.100,000,000
11. Dhar,	Sh.So.080,000,000
12. Xingalool,	Sh.So.080,000,000
13. Xudun,	Sh.So.160,025,000
14. Dangorayo,	Sh.So.154,585,000
15. Laasqoray,	Sh.So.210,000,000
16. Caluula,	Sh.So.207,580,000
17. Baargaal,	Sh.So.210,226,000
18. Jarriiban,	Sh.So.210,226,000
19. Wirwir & Horfadhi,	Sh.So.080,000,000
20. Xaafuun,	Sh.So.200,000,000
21. Carmo,	Sh.So.050,000,000
22. Gobolka Bari,	Sh.So.050,000,000
23. Gobolka Karkaar,	Sh.So.050,000,000

Wadar, Isugeyn, Sh.So.3,141,492,000



Xafiisayada hab-maamuuska & xiriirka dadweynaha ee madaxtooyada-Garowe

4.Tababarro:

Si kor loogu qaado aqoonta xirfadeed ee hawl-wadeennada bangiga waxaa la qabtaa tababarro kala duwan iyadoo xubno bangiga ka tirsan loo fidiyo deeqo waxbarasho oo gaarsiisan heer jaamacadeed.

5.Xiriirka bangiga iyo bangiga adduunka:

Bangiga dowladdu wuxuu xiriir la leeyahay bangiga adduunka iyadoo ay labada dhinac si wadajir u sameeyeen daraasado.

6.Taageeridda hawlaho dowladda dhexe:

Bangigu wuxuu hawlaho dowladda ka galaa kaalin muhim ah gaar ahaan fududaynta arrimaha hawl socodsinta.

#### WAX-QABADKA GARYAQAAANKA GUUD EE DOWLADDA

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey Dr. Maxamed Muuse Ismaacii, garyaqaanka guud ee dowladda

Xafiiska garyaqaanka guud wuxuu hoos yimaadaa madaxtooyada, wuxuuna u xil saaran yahay arrimaha sharciga, la-talinta Madaxweynaha arrimaha sharciga, diyaarinta xeerarka ka soo baxa xafiiska Madaxweynaha, diyaarinta iyo soo-saarista faafinta rasmiga ah ee dowladda iyo u doodidda dowladda maxkamadaha hortooda.

Waxaa halka lagu soo uruurinaya shuruucdii uu xafiiska garyaqaanku ku soo saaray faafinta rasmiga ah ee dowladda, ka dib markii uu golaha wakiiladu oggolaaday.

### Sanadka 2005

- Sharciga shaqada iyo shaqaalaha
- Sharciga nidaamka xukuumadda iyo hay'adaha la xiriira
- Sharciga xanaanada xoolaha, beeraha iyo deegaanka
- Sharciga aftida dastuurka DGPL
- Sharciga hab-maamulka dowladda
- Sharciga ku tala-galka miisaaniyadda 2005

### Sanadka 2006

- Sharciga siyaasadda waxbarashada Puntland
- Sharciga hay'adda biyaha iyo tamarta (Psawen)
- Sharciga xeerka caasimadda Puntland
- Sharciga xisaab-xirka dowladda
- Sharciga miisaaniyadda 2006

### Sanadka 2007

- Sharciga wasaarddii awqafta & arr. Diinta loogu beddeley wasaaradda caddaaladda & arr. Diinta
- Sharciga akadeemiyada hiddaha iyo dhaqanka ee Puntland
- Sharciga heshiiska wax soo-saarka wadaagga ah ee shidaalka iyo gaaska
- Sharciga heshiiska ilaalinta xeebaha Puntland
- Sharciga heshiiska is afgarad ee dowladda Puntland iyo hay'adaha qaramada midoobey
- Sharciga siyaasadda macallimiinta waxbarashada ee Puntland
- Sharciga qorshaha 5ta sano ee Puntland
- Sharciga ansixinta degmooyinka Godob-jiiraan, Kala-bayr iyo Xarfo

### Sanadka 2008

- Sharciga ansixinta warbixinta hanti-dhowraha guud
- Sharciga ansixinta guddiga sare ee garsoorka
- Sharciga lifaaqa 2aad ee dastuurka Puntland
- Sharciga siyaasadda biyaha ee Puntland

### Sharci-qaanuun

Muddada 2005-2008 xafiisku wuxuu soo saaray 24 sharci-qaanuun

### Dacwado

Xafiisku wuxuu maxkamadaha hortooda ku galay 18 dacwadood iyadoo uu ku guuleystey 18 ka mid ah halka looga guuleystey 3 dacwadood

## WAX-QABADKA HAY'ADDA JIDADKA PUNTLAND (NESHA)

Warbixintaan waxaa diyaariyey C/risaaq Maxamed X.Xasan, guddoomiyaha hay'adda Nesha.

Nesha waa hay'ad maamul ahaan madax-bannaan oo leh guddi maamul iyo guddoomiyaha hay'adda fulinta oo mas'uul ka ah socodsiinta hawlahay'adda.

Hay'addaan waxaa la asaasay October 1997-dii waxaana shidaalka,gaadiidka iyo qalabka dayactirka gaadiidka iwm u saaran adeeg ah dakhliga ay nesha hawlaheeda ku socodsiso oo ay mashaariicdeeda ku fuliso.

Waxaa la wada ogsoon yahay in jidatku yihiiin kaabe ahmiyad ballaaran u leh horumarinta dhaqaale iyo bulsho,waa aaladda loo adeegsado safarrada dadka,dhaqdhaqaqa gaadiidka iyo badeecadaha,gaarsiinta adeegyada degaamada fog-fog.Dhan kale waxay jidatku laga ma maarmaan u yihiiin wax-soo-saarka iyo in la maalo lana manafacaadsado khayraadka dabiiciga ah.

Hay'addu waxay mas'uul ka tahay mashaariicda jidatka iyo gegooyinka dayuuradaha iyadoo hawlahay dayactirka jidatka toos u maalgelisa dhan kalena xag maaliyadeed,farsamo iyo maamulba uga qayb qaadata hawlo ay deeq-bixiyaasha & ururrada caalamiga ah la kaashato

Hawl-fulinta Nesha waxay ka jawaabeyesa fikradda joogteynta dayactirka jidatka (routine maintenance initiative RMI).



Buundada Sheerbi oo duntay dibna loo dhisay (2005)

Muddada 2005-2008 waxay Nesha fulisey hawlaha soo socda:

A.Dayactir:

Sanadka 2005:

T/T	Maalgeliyaha	Goobta	cabbirka	kharajka
1	Nesha	meermeerka	4 km	8,000 \$
2	Nesha	buundada Laag	300m	6,000 \$
3	Nesha	Dur-dur & Buran	300m	7,505 \$
4	Nesha	Sheerbi	6m	10,500 \$
5	Nesha	Xaaji-khayr	1,050m	4,000 \$
6	Nesha	Garowe-Boosaaso (Godad)	10 km	6,246 \$



Dayactirka buundada Laag oo ay fulisey Nesha

Sanadka 2006:

1	Nesha	Xaaji-khayr	1,100m	110,000 \$
2	Nesha	Garacad	300m	30,000 \$



Dhismaha jidka Jarriiban-Garacad-wadaagsin (2006)

3	Nesha	Laag	300m	77,000 \$
4	ILO	(Wadagsin)	12 km	165,000 \$
5	ILO	Eyl	12 km	165,000 \$
6	S. the Children	Dhuur	140 km	190,000 \$
7	S.the Children	Caris	12 km	140,000 \$



Madaxweyne ku xigeenka oo furaya qaybta filiyaale oo dib loo dhisay (2008)

Sanadka 2007:

01.	Nesha	Buundada Sheerbi	100m	1,007.40 \$
02	Nesha	Yalho-labawanley	184m	40,794.40 \$
03	Nesha	Buundada Garowe	200m	4,134.90 \$
04	Nesha	Faliiryaale	228m	31,779.70 \$
05	Nesha	Jalam-Burtinle	1 km	11,767.64 \$
06	Nesha	Xarfo-Bacaadweyn	LS	5,592.86 \$
07	Nesha	Bacaadweyn-Abaarey	10 km	20,588.30 \$
08	Nesha	Buundada Tuulo-ooman	24m	1,000.68 \$



Dhismaha Jidka Eyl oo ay iska kaashadeen Nesha & ILO



Furitaanka buudada Laag oo dib loo dhisay (2007)

B.Jidad dhir laga jaray:

09	Nesha	Far-janno-Bacaadweyn	25 km	7,260 \$
10	Nesha	Yaka-Sanjilbo	9 km	2,250 \$
11	Nesha	Qayaadsame-Carmo	75 km	2,000 \$



Dhismaha jidka Dhuudo oo ay iska kaashadeen Nesha iyo Save the Children



Jidka Lafa-gorayo oo ay iska kaashadeen PI, Nesha,ILO & bulshadu

C.Waddooyinka xagaafka ah:

12	Nesha	Jidbannaan	1 km	22,759 \$
13	S.the Children	Dhuudo	150m	200,000 \$
14	PL, ILO,Nesha & bul.	Lafagorayo	8 km	waa socdaa
15	ILO	Jarriiban-Garacad	18 km	80,000 \$
16	ILO	Daawad-Badey	12 km	11,286 \$
17	ILO	Awr-culus	150m	19,936 \$



Jidka Awr-culus oo ay iska kashaeen Nesha iyo ILO

WAX-QABADKA HAY'ADDA PSAWEN

Warbixintaa waxaa diyaariyey Axmed Maxamed Looyaan, k/s guddoomiyaha hay'adda Psawen.

Hay'adda Psawen waxay hoos timaaddaa wasaaradda hawlaha guud iyo gaadiidka waxayna u xil saaran tahay hawlaha korontaynta iyo biyaha.Waxaa la isla oggol yahay in biyaha iyo tamartu yihiin kaabayaal aad muhim ugu ah nolosha iyo horumarinta, sidaa darteed ayaa si gaar ah tixgelin iyo fiiro gaar ah loo siiyaa.

Biyuhu gaar ahaan waxay si toos ah u taabanayaan jiritaanka iyo caafimaadka dadka iyo noolaha kale, iyadoo ay bulshadenee reer-guuraa xoolo-dhaqato ah u badan tahay, dhan kalena ay nolosha dadkeenu ku tiirsan tahay wax-soo-saarka miyiga.Muddada u dhexaysa 2005-2008 hay'adda Psawen waxay qabatay hawlo badan oo mug weyn oo laga xusi karo:l

## 1. Biyaha

a. Waxaa la qoday oo hawshoodi la fuliyey ceelasha soo socda:

Gobolka Bari

1. Taageer
2. Timirshe
3. Kob-dhexaad
4. Kala-Bayr

Gobolka Karkaar

1. Qardho
2. Waaciye

Gobolka Sannag

1. Baran
2. Carmaale
3. Hadaaftimo
4. Dhahar
5. Xingalool

Gobolka Nugaal

1. Dhanaane
2. Garowe
3. Garowe (NAWACO)
4. Xasbahalle
5. Qarxis
6. Awr-culus

Gobolka Mudug

1. Ballibusle
2. Heema
3. Goldogob
4. Kulub
5. Mareer
6. Farda Cunayaal
7. Bacaad-weyn
8. Bacaad-weyn (dugsi)
9. Xarfo (dugsi)
10. Roox

Gobolka Sool

1. Awr Boogeys
2. Buuro Wadal
3. Sarmaanyo



Ceil la qoday oo ay dowladdu maalgelisay

b. Waxaa gacanta lagu hayaa:

4. Dangorayo, Gobolka Nugaal
2. Xuddun, Gobolka Sool

c. Ceelasha sahankoodi dhammaaday:

1. Burtinle
2. Reebenti
3. Huubi
4. Beyra
5. Qardho (xabsiga)
6. Kala-bayr (Nugaal)
7. Laqlaanjisle

Waxaa qorshaysan qodis iyo dayactir ceelal kale iyadoo la hayo

ballan-qaad oo ay dowladduna ka qayb qaadan doonto.

Qodista ceelashaan waxaa iska kaashaday dowladda iyo hay'adaha & ururrada caalamiga ah.

Waxaa intaa weheliya biyo-gelinta magaalooyinka oo ah barnaamij socda ilaa iyo haddana wax badan laga qabtay.

## II. Tamarta

Hay'adda Psawen waxay mas'uul ka tahay korontaynta iyo guud ahaan hawlahaa tamarta la xiriira.

Sida la ogsoon yahay waxaa ku shaqo-jira saldhigiyada korontada ee Boosaaso iyo Qardho oo ay hay'addu gacanta ku hayso iyadoo uusan weli dhammaystirmin dhaqan-galka heshiiskii maarayntooda lagu la galay shirkad gaar ah.

Hay'addu waxay kaloo shidaal gaarsiisa saldhigiyada korontada ee magaaloooyinka qaarkood.

Dhan kale waxay hay'adda Psawen diyaarisay daraasado kala duwan oo ku saabsan fidinta iyo sare u qaadista awoodda koronto ee degmooyinka Puntland guud ahaan.

Waxaa kaloo jirta in hay'ado caalami ah iyo shirkado ajnebi ah la la wado hindisayaal iyo barnaamijyo ku saabsan korontaynta.



Ceel qodistiisu socoto oo ay dowladdu maalgelisey

## WAX-QABADKA GUDDIGA AIDS-KA EE PUNTLAND

Warbixintaan waxaa diyaariyey Maxamed Yuusuf Cabdi,agaasimaha fulinta ahna xoghayaha guddiga PAC

### I. Asaasidda guddiga:

Guddiga Aids-ka ee Puntland (Puntlnad AIDS Commission-PAC) waxaa la asaasay October 15,2005 markii la dareemay in cudurkaan halista ahi uu si isa soo taraysa ugu fidiyo bulshada ku nool degaamada Puntland.

Tallaabadaani waxay kaloo ka jawabeysey baaqii caalamiga ahaa ee ku saabsanaa in dowladaha adduunku la tacaalaan,dadaalna ay u galaan ka-hortagga iyo daaweynta dadka uu cudurka Aids-ku haleelo.

Guddiga Aids-ka ee Puntland waxaa guddoomiya Madaxweyne ku xigeenka,waxaana xubno ka ah:

02. Wasiirka caafimaadka
03. Wasiirka H.haweenka & arrimaha qoyska
04. Wasiirka waxbarashada
05. Wasiirka shaqada
06. Wasiirka caddaaladda & arrimaha Diinta
07. Wasiirka warfaafinta
08. 3 xubnood oo golaha wakiilada ka tirsan
09. Wakiil ka socda ururrada bulshada (Bisha Cas)
10. Wakiil ka socda dadka cudurka HIV/AIDs-ka la nool
11. Agaasimaha fulinta ahna xoghayaha guddiga

### II. Ujeeddooyinka guddiga la abuuray:

1. Isku-xirka wax-qabadka qaybaha kala duwan ee fuliya barnaamijyada lagaga hortegayo fidista cudurka HIV/AIDs-ka
2. Dejinta siyaasadda iyo istaraateejiyadda hawl-fulineed ee lagu sugayo hakinta iyo xakamaynta fiditaanka cudurka HIV/AIDs-ka ee degaamada Puntland
3. U qareemidda ka hortagga,daaweynta,xanaanada iyo taageeridda dadka la nool cudurka HIV/AIDs-ka iyo qoysaska uu saameeyo
4. Fududaynta socodsinta iyo fulinta hawlaho iyo barnaamijyada la xiriira ka-hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/AIDs-ka

### III. Wax-qabadkii 2005-2008:

1. Furitaanka,qalabaynta iyo hawlgelinta xafiiska guddiga ee Garowe oo ah xarunta shaqo ee guddiga
2. Dejinta iyo diyaarinta dokumentiga qeexaya barnaamijka iyo istaraateejiyadda ka-hortagga iyo hakinta cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDs oo uu guddigu ku hawlgelayo
3. Furitaanka 6 xarumood oo cudurka lagu baaro kuna kala yaal isbitallada guud ee Boosaaso,Qardho,Garowe,L/caanood,Gaalkacyo iyo xarun gaar loo leeyahay (Galka'io Medical Centre). Hawlgelinta xarumahaan waxaa la la kaashaday taageerada dhaqaale ee Global Fund.

4. Waxaa la tababaray in ka badan 1,300 oo ah shaqaalaha caafimaadka ee ka hawlgala goobaha caafimaadka kuwaas oo isugu jira takhaatiir,kal-kaaliyeyaa,sheybaarayaal,umulisooyin iyo ardayda culuumta caafimaadka barata
5. Waxaa la daaweeyaa oo ilaa iyo hadda cudurka laga helay 180 qof
6. 60 qoys oo uu cudurku saameeyey ayaa waxaa u socota taageero quudin oo ay hay'adda WFP bixiso loona mariyo urur maxalli ah oo HOPE Net lagu magacaabo
7. Waxaa la qaybiyey 100Q oo ah daawooyin [Home Based Care] looguna tala galay in dadka bukaa ay guryahooda ku haystaan kuna isticmaalaan
8. Waxaa la diyaariyey adeegga loo yaqaan [PMTCT] oo loogu tala galay hooyooyinka uurka leh ee la nool cudurka si loo bedbaadiyo ilmaha ay sidaan

**IV. Wacyi-gelinta iyo ka-hortagga cudurka:**

1. In ka badan 3,000 qof oo isugu jira culimaa'uddiin,dhalinyaro,haween,suxufiyayaal,arday,baray aal dugsiyo,dad soo bara-kacay,xubno ka socda booliska kuliyadda Carmo,isu-duwayaasha gobollada,maamulda iyo bulshada gobollada ayaa la siiyey casharro la xiriira cudurka HIV/AIDs-ka
2. Waxaa la qaybiyey,la taagey ama la dhejiyey calaamado,hal-ku-dhegyo, farriimo,masawirro iwm ku saabsan wacyi-gelinta bulshada kuna aaddan cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDs-ka
3. Idaacadaha,televishannada iyo wargeesyada maxalliga ah waxaa loo adeegsadey in bulshada loo gudbiyo farriimaha,digniinaha iyo aqoonta ku saabsan cudurka.Sahan lagu qimaynayo waxtarka barnaamijkaan waxaa ka soo if baxay in 85% ay bulshadu ka faa'ideysatey

**V. Xiriirinta hawlgallada ka-hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/Aids:**

Tan iyo intii guddiga la asaasay xafiiska xoghaynta guddigu wuxuu isku hawlay isku-dubaridka shirarka,dood-cilmiyeedyada,tababarrada iyo xiriirinta kooxaha kala duwan ee fuliya barnaamijyada ka-hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/AIDs-ka.

Shirarka la qabto waxaa ka mid ah:

- Shirka billaha ah ee kooxaha hawlgala (multi-sectoral)
- Shirarka 3 billoodlaha,6 billoodlaha iyo sanadlaha ee wax-qabadka
- Shirar-goboleed sida IGAD,ICASSA iwm
- Shirarka heer caalami

## **WAX-QABADKA HAY'ADDA HADMA**

Warbixintaan waxaa soo gudbiyey C/laahi C/raxmaan Axmed, maareeyaha guud ee hay'adda HADMA

### **Hawlah Beni'aadnnimo (Humanitarian Affairs)**

1. Kormeerka iyo ilaalinta kaalmada la xiriirta hawlah gargaarka beni'aadnnimo
2. Kaydka raashinka,daawooyinka iyo agabka kale,sida Hoyga, Maacuunta IWM ee arrimaha beni'aadannimada iyo gurmadka degdeggah ah.
3. Hawlah gargaarka beni'aadnnimo ee dadka ay dagaallada iyo abaaruhu soo barakiciyaan.
4. Ka hawlgalka qaylo-dhaanta iyo baaqa loo jeedinayo hay'adaha ku hawlan wax ka qabashada masiibooyinka iyo gargaarka beni'aadnnimo.
5. Xiriirinta iyo la socodka wax-qabadka hay'adaha UN-ka iyo kuwa kale ee caalamiga ah iyo hubinta sida uu qorshahooda sanadlahaa hii u fulo, iyadoo ay HADMA warbixin 3 biloodle ah oo arrimahaan ku saabsan u gudbineyso madaxtooyada.
6. Hay'addu waxay PL wakiil uga tahay hawlah gargaarka beni'aadannimada iyo maaraynta aafooyinka iyo waxyeelada masiibooyinka.
7. Ka hawlgalka iyo baadi-goobka mashaariicda iyo barnaamijyada la xiriira gurmadka iyo u gargaarka dadka masiibooyinka ku tabaalooba.

### **Maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka**

**(Disasters Management)**

- 1) Caddaynta iyo soo-saaridda
- 2) Baaq wax ka qabasho marka ay aafooyin ama Masiibooyin dhacaan
- 3) Diyaarinta iyo u-gudbinta hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa UNka hawlah Degdeggah iyada oo ka tarjumaysa aragtida Dawladda Puntland.
- 4) La xiriirka Deeq bixiyaasha kuna saabsan baahida hawlah degdeggah ah.
- 5) Dejinta qorshaha ku aaddan wax ka qabadka hawlah gargaarka beni'aadnnimo iyo ka hortagga masiibooyinka.

HADMA waxa ay isku taxallujisay sidii dadka abaarahu tabaaleeyeen wax loogu qaban lahaa waxayna codsiyo qaylo dhaan ah u diri jirtey shirarna u abaabuli jirtey hay'adaha caalamiga ah, shirarkas oo la xiriira sidii gargaar beni'aadannimo loogu fidin lahaa dadka abaartu waxyelelayso. Waxay kaloo hay'addu joogteysey in kormeer iyo sahan lagu tago meel kasta oo dhib laga soo sheego si loo qiimeeyo heerka waxyeelada iyo saamayska aafada iyadoo la xiddidayo mugga baahida.

Dhammaan xilliyadii ay abaartu ku habsatey meelo Puntland ka mid ah, Hey'addu waxay ku guulaysatey in ay xogta dhabta ah ka keento degaamada dhibtu ku dhacday ayna ku qanciso Dowladda iyo Hay'adaha caalamiga ah ee ku howlan arrimaha gargaarka beni'aadannimada sidii loogu fidin lahaa gargaarka loo baahan yahay loona bedbaadin lahaa nolosha dadka iyo duunyada ay dhibaatada abaartu saamaysay.

Waxaana ka mid ah haan wixii la qabtay:

1. Sahan tifaftiran, qaylo-dhaan iyo codsi loo diray hay'adaha
2. Abaartii ugu dambaysay ee 2007-2008 Dowladdu si weyn ayey uga qayb qaadatay, iyadoo:
  - a) Bixisay \$23,000 oo biyo dhaamin ah loona qaybiyey Gobollada gaar ahaan meelaa aan hay'aduhu ka dhaaminayn ee liita
  - b) Waxay bixisay qayb ka mid ah kharajkii qodista ceelasha Awr boogays, Xingalool, iyo Bombooyin biyood oo loo gaday ceelal kale.
3. Hay'adaha caalamiga ah ee qaybta weyn ka qaata Biyo dhaanka waxaa ka mid ah:
  - a) UN OCHA oo Bixisay deeqda gargaarka Biyo dhaanka ee Puntland intii ugu badhayd iyada oo soo marisay hay'adaha kala ah: NCA, Islaamic Relief, Diakonia iyo Vet AID.
  - b) Hay'adda ICRC oo biyo iyo raashinba gaarsiisay Gobolladda intooda badan.
4. Kormeer iyo u kuurgal ay HADMA ku hubineysey sida ay u socdaan howlaha daryeelka gargaarka aadannimo.
5. Shaqaalaha hay'addu waxa ay dhammaan ku fuliyeen si nafti hur ah howlaha kor ku qoran iyaga oo aan helin agabkii shaqadaa lagu fulin lahaa oo dhaammaystiran.
  - 6) Hoggaaminta iyo xiriirinta barnaamijka Hay'adaha iyo ururrada calamiga ah kuna saabsan wax ka qabashada dhibaatada masiiboyinka dhaca.
  - 7) Qorshaynta iyo kala maraynta meelaha wax ka qabadka looga baahan yahay si loo hubiyo inaan is dul fuul dhicin iyo meelo aan wax qabadku gaarin.

#### Xaaladda Guud

Markii Maamulka hay'addu garowsaday in loo baahan yahay in isbeddel lagu sammeeyo qaabka ay hay'addu ku shaqayso oo ku kooban isugu yeeridda shirarka hay'adaha caalamiga ah markii dhibaato dhacdo iyo in ay kormeer iyo sahamo kooban ku samayso meelaha ay wax ka dhacaan ama wax laga fulinayo waxaa la guddoonsadey in khabuur kala taliya arrrimahaas laga dalbado hay'adda UNICEF si ay HADMA ugu gudubto marxalad ay wax kaga qaban karto dhibatooyinka masibooyinka iyo Hawlaha Beni'adannimo. Si Hawlaha Deg-Degga ahi ay (Humanitarian emergencies) dhaqso ugu hirgalan oo meeshii wax ka dhacaanba si degdeg ah loogu gurmado waxaa habboonaatay in awoodda hay'adeed ee HADMA sare loo qaado lana horumariyo.

Arrintaan waxaa daraasad ka diyaariyey oo talooyin ka soo jeediyey khabir hawshaan loo xil saaray. Khabiirku wuxuu warbixintiisa ku tilmaamay carqaladaha hor taagan in HADMA ay si buuxda u hanato hawlahu muhimka ah ee ay u xil saaran tahay isagoo si dhab ah farta ugu fiiqay meelaha ay awoodda hay'addu ka dabacsan tahay.

### WAXQABADKA HAY'ADAH

Dhinaca Waxbarashada

2. Xaafuun	6 dugsi	Xafuun iyo shan Tuulo	UNICEF	
3. B/Beyla	8 dugsi	6 Tuulo	SC.UK, CARE, UNICEF	
4. EYL & Badey	5dugsi	Dawad, Marraya, Gabbac,Dhanaane	ADRA, Action AID, CARE	
5. Jarriban/Gara'ad	6 dugsi	Garacad, Kulub and Dhinowda Ilfoocshe, Doomaryo	CARE, Diakonia,	
6. Dangorayo	1 dugsi	Baqbaq	ADRA	
Isu isugeyn Guud	28 dugsi+ 6	Tuulooyinka xeebaha xoogaa ka durugsan		

Waxaa halkan ka muuqda arday dhiganaysa fasal meel ka mida meelihii ay Tsunaamidu wax yeeshay iyo Sawirkii Dugsiga oo Farta laga gooyey



Dugsiga Marraye oo Dhismihiisi Dhammaaday



### Dhinaca Kalluumaysiga

Tsunaamidu waxa ay aastay ama burburisay dhammaan qalabkii kallumaysiga sida shabaagaha, xargaha, karabiska iyo doonyaha oo nooc walba leh sida ka muuqata sawirrada hoos ku yaal.



- ❖ Dadkii dhibaatadaasi ku dhacday waxaa loo qaybiyey: shabaago isugu jira libaax, Kalluun, Aragoosato oo gaaraya ilaa 240,186 Shabaagood iyo qalabkoodii si ay uga soo kabtaan khasaarihii ku dhacay.
- ❖ Waxaa loo dhisay Qaboojiyeyaal iyo kaydinta kalluunka ( 5 tan) meelaha kala ah:
  1. Bargaal
  2. Xaafuun
  3. B/Bayla
  4. Garacad

❖ Dhisme saddex(3) baraf-dhaliye oo midkiiba yahay 3 tan, waxaana laga kala dhisay:

- Dh/qoryoweyn
- Durdura
- Baar madoobe

❖ Diyaarin iyo kalluun qalajin

- Baargaal
- Baarmadoobe
- Ceel dhidar
- Dhixin buur
- Dhanaane
- Kulub
- Garacad
- Maraye

Meelaha qaarkood waxa ay Tsunaamidu la tagtay ama burburisay in ka badan boqolkii 80% doonyihii kalluumaysiga sida ka muuqata sawirka hoos ku yaal oo muujinaya xaaldda doonyaha maalmo ka dib markii tsunaamidu dhacday.



Sawirkani iyoqalabkii waxaa ka muuqda nin kallumaysto ah oo ka Murugaysan dhibaatadii Tsunaamidu ugeysatay iyo qalabkii kalluumaysiga ee badgariirku dibedda kentay.



Sawirkan wuxuu muujinayaa qalab kallumaysi oo meel aad uga fog xeebta ay baddu keentay

- ❖ Waxaa loo qaybiyey 285 doonyood oo isugu jira Volve, Af-dheer Doonyaha La Siiyey Degaammadii Tsunaamidu Waxyeeshay

Degmada	Tirada Donyaha La bixiyey	Isugeynta Doonyaha la Siiyey	Hey.adda bixisay	Tirada Dadka Doonyaha la siiyey	Dadka sheegtay in wax ka dhumeen
1. Bargaal/Cal uula	25Y+10W =	35	M/AID, FAO & IB/TADUM	110 qof	
2. Xaafuun	52Y+15W	67	CARE,SC.UK,M/AID- Konfur Africa	194 Qof	
3. B/Beyla	31Y+16W	47	UNA, M/AID & SC.UK	158 qof	
4. 3. EYL	83Y+5W	88	IB/TADUM, ADRA INT.Action AID	196 qof	
5. .Jarriban/Ga ra'ad	20Y +20W	40.	M.AID and FAO	160 qof	
6. Dangorayo	34Y	34	IB/TADUM, ADRA and M/AID	68 qof	
7. W.Kalluun	7W	7	ADRA		
Total		318		886	

30 qof oo Eyl iyo degaammo kale degaankeeda ah ayaa Bayla ku qaataj maadaama ay sheegteen in doonyohoodi kaga dhumen degaamadaas. Doonyahaasna waxaa bixisay SC.Uk, waxaana laga jaray qorshihii Xafuun. Doonyahaha Hay'adahu keeneen ama keenidonaan:

FAO	CARE	ADRA	MAID	AAI	IBank	UNO	SCUK	GGF
33	37	33+7=40	80	3	50	11	32	65*

- GGF Waa laga sugayaay

## Mashaariicda Biyaha ee laga fuliyey Xeebaha Tsunaamidu waxyeeshay

Waxaa degaanka Xeebaha ka jiray dhibaato xagga biyaha la xiriirta oo isugu jirtey biya yaraan iyo tayada biyaha laga cabbo oo aad u lidatey. Meelaha qaarkood waxaa dumarka iyo carruurtu ka degi jireen oo biyaha ka doonaan jireen gebiyo dhaadheer oo mararka qaarkood naftooda khatar geliya. Waxaa meelaha qaarkood caado ahayd in haweenka urka leh ay dhiciyaan biyaha qararka looga degaayo ama lagala soo baxayo awgood.

Dadka Xeebaha ku nool waxaa intooda badani biyaha ka heli jireen ceel gacmeedyo (shallow wells) ay ka qoteen agagaarka badda, Tsunaamidu markii ay dhacday waxa ay aastay ama dumisey dhammaan wixii ceel gacmeed ahaa oo dadkaasi ka cabbi jireen sida uu muujinayo sawirkha hoos ku qoran.



### Adeegga Caafimaadka

Adeegga caafimaadku aad ayuu ugu yaraa degaankii Tsunaamidu ku dhacday ee Xeebaha Badweyn Hadiya. In aan ka badnayn afar Magaalo oo Xarumo u ahaa degmooyinka da'daweyn sida Eyl, B/Beyla IWM oo keliya ayaa lahaa Xarumo caafimaad iyaguna si habboon uma shaqayn jirin



Nooc ka mid ah Guryaha loo dhisay Dadkii Tsunamidu waxyeeshay



Sawirkani wuxuu muujinaya Guryihii dadku dhisteen markii ay Tsunaamidu ka dumisay kuwii hore kaddib

1. GURYAHA LOO DHISAY DADKII TSUNAMIDU WAXYEESHAY  
yo IDPs

Degmada	Tirade Guryaha Loo dhisay	Meesha laga dhisay	Hey,adda dhistay	Faallo
1. Xaafuun	275 guri	243 Xaafun 32 Karduush	UN-habitat, Mus-AID iyo Konfur Africa (G.G.F)	Waa la dhamastiray tayda
2. B/Beyla	60	Carris	SC.UK	Waa socdaan
3. EYL	65	25 Marraye 40 Daawad	CARE .Action AID INT	Waxa ka yarhiin tiradii CARE ballan qaaday(dharin raq.)
4.Jarriban/Gara'ad	226	80 Gara'ad 126 Kulub 20 Dhinowda Qoryawyn.	Diakonia iyo M.AID CARE Diakonia	Waa la dhamastiray
5. Garowe	157	IDP Garowe ex- airport	UN-Habitat*	Waa la dhamastiray
6.. Bosaso	150	IDP Bosaso	UN-Habitat*	Waa la dhamastiray
Isugeyn Guud	933 houseunits			Waa la dhamastiray inttoda badan

\*FG. Guryaha UN Habitat Dhistaay waa ka taya hooseyaan guryaha kale  
Fikradda asaasidda Hay'adda arrimaha beni'aadannimo iyo maaryanta  
masiibooiyinka (Human affairs and disaster management disaster-HADMA)  
waxay ka dhalatay dhibaatadii ay geysteen roobabkii barafka lahaa,  
abaarihii 2002-2004 iyo masiibadii Tsunami.

#### WAX-QABADKA AKADEEMIYADA HIDDHA & DHAQANKA

Warbixinta waxaa diyaariyey, Axmed Sh. Jaamac, Maareeyaha guud ee  
akadeemiyada hiddaha & dhaqanka.

Sida la wada aogsoon yahay hiddaha iyo dhaqanku ummadaha waxay u  
leeyihii qima weyn maxaa yeelay waxay asteeyaan oo ay suurad dhab ah  
ka bixiyaan taariikhda iyo ilbaxnimada, waxay muujiyaan oo ay dhab u  
cabbiraan ummadnimada shacbi kasta.

Waxaa laga ma maarmaan loo arkay in la dhiso, dhidibbadana loo taago  
akadeemiyada hiddaha biyo dhaqanka ee Puntland.

Akadeemiyada Puntland ee hiddaha & dhaqanka waxaa la asaasay Jan-  
2006. iyadoo isla sanadkaas loo dhammaystiray dhismihii waaxaha iyo  
hawlihii shaqaalaynta hawl-wadeennada.

Astaynta akadeemiyada waxaa la mariyey golaha xukuumadda waxaana  
oggolaaday golaha wakiilada.

Si loo baahiyo hawlaha akadeemiyada waxaa sanadkii 2007 la qorsheeyey  
in dhammaan gobollada Puntland laga furo matxafyo lagu kaydiyo agabka

dhaqanka.Mashruucaan oo daraasaddiisi la dhammaystiray waxaa loo gudbiyey hay'adda UNDP oo maalgelin u dalabtay.

Akadeemiyaddu sanadaha 2007-2008 waxay ka qayb gashay 3 shir oo ay hay'adda UNESCO ku qabatay dalka dibaddiisa. Shirarkaan waxaa la hordhigay kaalmada loo baahan yahay si hawlaha akadeemiyada loo taabba-geliyo looguna helo kaalmada farsamo ee laga ma maarmaanka ah.

Waxaa jira dad badan oo ku nool gobollada Puntland oo iskood uga qayb gala hawlaha dhaqanka, iyadoo ay akdeemiyadu dadkaas intii awooddeeda gacan siiso oo ay dhiirri-geliso. Xubnaha akadeemiyada ku tiirsan ee arrimaha dhaqanka ku hawlani waxay isugu jiraan shakhsiyaad, kooxo, ururro iyo NGO-yo.

#### **WAX-QABADA HAY'ADDA ASTAYNTA MAAMUL-WANAAGGA (GOOD GOVERNANCE BUREAU)**

Warbixintaa waxaa laga helay:

- a. Hay'adda astaynta maamul-wanaagga
- b. Archive-yada madaxtooyada

Sida la ogsoon yahay maamul kasta wuxuu leeyahay siyaasad hagta, ujeeddooyin, qorshe iyo kaabayaal lagu maareeyo fulintiisa, tayeeytiisa iyo horumariintiisa.Maamulku waa inuu yahay mid si marxaladaysan loo horumariyo isla markaana la saan-qadi kara is-beddellada is daba-joogga ah ee hadba soo gudboonaanaya saamayskana ku leh baaxadda iyo dabeecadda hawlaha dowladda.

Iyadoo la tixgelinayo arrimaha kor lagu soo xusay, si loo tayeyo loona horumariyo hannaanka maamul ee D/goboleedka Puntland, waxaa laga ma maarmaan noqotay in xukuumaddu ka hawl gasho barnaamij arrintaan ku aaddan.Waxaa xeer Madaxweyne Lr. 50 ee March 10, 2006 lagu magacaabay guddiyo loo xil saaray inay talooyin ka soo jeediyaan sida loo hagaajin karo loona tayeyn karo hawlaha maamulka dowladda.

Guddiyada la magacaabay waxay kala ahaayeen:

- Guddiga arrimaha amniga
- Guddiga qaab-dhismeedka hay'adaha dowladda
- Guddiga arrimaha maaliyadda
- Guddiga arrimaha caddaaladda iyo sharciga
- Xafiiska xiriirinta guddiyada

Guddiyadu waxay bilaabeen daraasado, xog ururin iyo kormeer goobeed oo ay ku tageen dhammaan wasaaradaha, hay'adaha iyo xafiisyada ay mas'uuliyadahoodu soo galaan waajibaadka loo cayimay guddi kasta.Hawlaha guddiyada waxaa xiriirinayey oo adeegga ay u baahan yihiin u fududeynayey xafiiska xiriirinta oo isagu ahaa xubinta isku xirka guddiyada.

Guddiyadu waxay ugu dambayn soo gudbiyeen oo ay xukuumadda soo hordhigeen warbixinno iyo talooyin, iyadoo

01. Guddiga arrimaha amnigu soo bandhigay talooyin ku saabsan tayeynta & dib u habaynta hay'adaha hawlaha amniga u xil saaran.
02. Guddiga qaab-dhismeedku soo bandhigay warbixin iyo talooyin la xiriira muunadaha ugu habboon ee ku aaddan qaab-dhismeedka wasaaradaha, hay'adaha iyo wakaaladaha dowladda.

03. Guddiga arrimaha maaliyaddu soo jeediyey nidaamka hufan ee loo maamuli karo hawlahaa maaliyadda iyo xisaabaadka

04. Guddiga caddaaladda iyo sharcigu soo gudbiyey daraasad ku saabsan hawlahaa garsoorka iyo shuruucda ku hawl jira ee Puntland, isagoo soo raaciyeen talooyin arrinta la xiriirta.

Wasaaradaha iyo dhammaan hay'adaha dowladdu si wanaagsan oo hagar la'aan ah ayey guddiyada u la shaqeeyeen, taas oo si weyn u sahashey xil-gudashada guddiyada. Waxay kaloo dowladdu u fidisay guddiyada wixii tashii laad ah ee ay u baahnaayeen si ay u fuliyan waajibaadka loo xil saaray.

Talooyinkii ay guddiyadu soo gudbiyeen waxaa laga fuliyey qodobbada qaarkood iyadoo ay tahay in inta harsanna mustaqbalka la fuliyo.

Si barnaamijkani u noqdo mid si nidaamsan u socda oo leh jirtaan waara waxaa la dhisay hay'adda astaynta maamul-wanaagga puntland.

Waxaa kaloo natiijooyinka barnaamijka ka mid ah in la dhisay guddiga shaqaalaha rayadka ah (Civil service commission).